# Buug-yaraha Xubinta Caafimaadka Habdhaqan

## Adeegyada Caafimaadka Maskaxeed ee Takhasuska ah iyo Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka

**3255 Camino del Rio S,**
**San Diego, CA 92108**
**Laynka Helitaanka iyo Musiibooyinka ee 24/7 ah:**
**(888) 724-7240**
**https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs/bhs_services.html**

Taariikhda Dhaqangalka: Febraayo 1, 2026[1]

[1] Buug-yarahan waa in la bixiyo marka ugu horaysa ee xubintu galaangal u helayso adeegyada.

## OGEYSIISKA HELITAANKA ADEEGYADA CAAWINTA LUUQADDA IYO KAALIYAHA IYO ADEEGYADA

**English**
ATTENTION: If you need help in your language call (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). Aids and services for people with disabilities, like documents in braille and large print, are also available. Call (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). These services are free of charge.

**العربية (Arabic)**
يُرجى الانتباه: إذا احتجت إلى المساعدة بلغتك، فاتصل بـ (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100) . تتوفر أيضًا المساعدات والخدمات للأشخاص ذوي الإعاقة، مثل المستندات المكتوبة بطريقة بريل والخط الكبير. اتصل بـ (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). هذه الخدمات مجانية.

**Հայերեն (Armenian)**
ՈՒՇԱԴՐՈՒԹՅՈՒՆ: Եթե Ձեզ օգնություն է հարկավոր Ձեր լեզվով, զանգահարեք (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100): Կան նաև օժանդակ միջոցներ ու ծառայություններ հաշմանդամություն ունեցող անձանց համար, օրինակ` Բրայլի գրատիպով ու խոշորատառ տպագրված նյութեր: Զանգահարեք (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100): Այդ ծառայություններն անվճար են:

**ខ្មែរ (Cambodian)**
ចំណាំ៖ បើអ្នក ត្រូវ ការជំនួយ ជាភាសា របស់អ្នក សូម ទូរស័ព្ទទៅលេខ (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100) ។ ជំនួយ និង សេវាកម្ម សម្រាប់ ជនពិការ ដូចជាឯកសារសរសេរជាអក្សរផុស សម្រាប់ជនពិការភ្នែក ឬឯកសារសរសេរជាអក្សរពុម្ពធំ ក៏អាចរកបានផងដែរ។ ទូរស័ព្ទមកលេខ (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100) ។ សេវាកម្មទាំងនេះមិនគិតថ្លៃឡើយ។

**繁體中文 (Chinese)**
请注意：如果您需要以您的母语提供帮助， 请致电 (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100)。另外还提供针对残疾人士的帮助和服务， 例如盲文和需要较大字体阅读， 也是方便取用的。请致电 (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100)。这些服务都是免费的。

**فارسی (Farsi)**
توجه: اگر می‌خواهید به زبان خود کمک دریافت کنید، با (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100) تماس بگیرید. کمک‌ها و خدمات مخصوص افراد دارای معلولیت، مانند نسخه‌های خط بریل و چاپ با حروف بزرگ، نیز موجود است. با (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100) تماس بگیرید. این خدمات رایگان ارائه می‌شوند.

**हिंदी (Hindi)**
ध्यान दें: अगर आपको अपनी भाषा में सहायता की आवश्यकता है तो (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100) पर कॉल करें। अशक्तता वाले लोगों के लिए सहायता और सेवाएं, जैसे ब्रेल और बड़े प्रिंट में भी दस्तावेज़ उपलब्ध हैं। (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100) पर कॉल करें। ये सेवाएं नि: शुल्क हैं।

**Hmoob (Hmong)**

CEEB TOOM: Yog koj xav tau kev pab txhais koj hom lus hu rau (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). Muaj cov kev pab txhawb thiab kev pab cuam rau cov neeg xiam oob qhab, xws li puav leej muaj ua cov ntawv su thiab luam tawm ua tus ntawv loj. Hu rau (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). Cov kev pab cuam no yog pab dawb xwb.

**日本語 (Japanese)**

注意日本語での対応が必要な場合は (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100) へお電話ください。点字の資料や文字の拡大表示など、障がいをお持ちの方のためのサービスも用意しています。 (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100) へお電話ください。これらのサービスは無料で提供しています。

**한국어 (Korean)**

유의사항: 귀하의 언어로 도움을 받고 싶으시면 (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100) 번으로 문의하십시오. 점자나 큰 활자로 된 문서와 같이 장애가 있는 분들을 위한 도움과 서비스도 이용 가능합니다. (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100) 번으로 문의하십시오. 이러한 서비스는 무료로 제공됩니다.

**ພາສາລາວ (Laotian)**

ປະກາດ: ຖ້າທ່ານຕ້ອງການຄວາມຊ່ວຍເຫຼືອໃນພາສາຂອງທ່ານໃຫ້ໂທຫາເບີ (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). ຍັງມີຄວາມຊ່ວຍເຫຼືອແລະການບໍລິການສຳລັບຄົນພິການ ເຊັ່ນເອກະສານທີ່ເປັນອັກສອນນູນແລະມີໂຕພິມໃຫຍ່ ໃຫ້ໂທຫາເບີ (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). ການບໍລິການເຫຼົ່ານີ້ບໍ່ຕ້ອງເສຍຄ່າໃຊ້ຈ່າຍໃດໆ.

**Mien**

LONGC HNYOUV JANGX LONGX OC: Beiv taux meih qiemx longc mienh tengx faan benx meih nyei waac nor douc waac daaih lorx taux (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). Liouh lorx jauv-louc tengx aengx caux nzie gong bun taux ninh mbuo wuaaic fangx mienh, beiv taux longc benx nzangc-pokc bun hluo mbiutc aengx caux aamz mborqv benx domh sou se mbenc nzoih bun longc. Douc waac daaih lorx (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). Naaiv deix nzie weih gong-bou jauv-louc se benx wang-henh tengx mv zuqc cuotv nyaanh oc.

**ਪੰਜਾਬੀ (Punjabi)**

**ਧਿਆਨ ਦਿਓ:** ਜੇ ਤੁਹਾਨੂੰ ਆਪਣੀ ਭਾਸ਼ਾ ਵਿੱਚ ਮਦਦ ਦੀ ਲੋੜ ਹੈ ਤਾਂ ਕਾਲ ਕਰੋ (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). ਅਪਾਹਜ ਲੋਕਾਂ ਲਈ ਸਹਾਇਤਾ ਅਤੇ ਸੇਵਾਵਾਂ, ਜਿਵੇਂ ਕਿ ਬ੍ਰੇਲ ਅਤੇ ਮੋਟੀ ਛਪਾਈ ਵਿੱਚ ਦਸਤਾਵੇਜ਼, ਵੀ ਉਪਲਬਧ ਹਨ| ਕਾਲ ਕਰੋ (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). ਇਹ ਸੇਵਾਵਾਂ ਮੁਫਤ ਹਨ|

**Русский (Russian)**

ВНИМАНИЕ! Если вам нужна помощь на вашем родном языке, звоните по номеру (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). Также предоставляются средства и услуги для людей с ограниченными возможностями, например документы крупным шрифтом или шрифтом Брайля. Звоните по номеру (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). Такие услуги предоставляются бесплатно.

**Español (Spanish)**
ATENCIÓN: si necesita ayuda en su idioma, llame al (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7200). También ofrecemos asistencia y servicios para personas con discapacidades, como documentos en braille y con letras grandes. Llame al (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7200). Estos servicios son gratuitos.

**Tagalog (Filipino)**
ATENSIYON: Kung kailangan mo ng tulong sa iyong wika, tumawag sa (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). Mayroon ding mga tulong at serbisyo para sa mga taong may kapansanan,tulad ng mga dokumento sa braille at malaking print. Tumawag sa (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). Libre ang mga serbisyong ito.

**ภาษาไทย (Thai)**
โปรดทราบ: หากคุณต้องการความช่วยเหลือเป็นภาษาของคุณ กรุณาโทรศัพท์ไปที่หมายเลข (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100) น
อกจากนี้ ยังพร้อมให้ความช่วยเหลือและบริการต่าง ๆ สำหรับบุคคลที่มีความพิการ เช่น เอกสารต่าง ๆ ที่เป็นอักษรเบรลล์และเอกสารที่พิมพ์ด้วยตัวอักษรขนาดใหญ่ กรุณาโทรศัพท์ไปที่หมายเลข (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100) ไม่มีค่าใช้จ่ายสำหรับบริการเหล่านี้

**Українська (Ukrainian)**
УВАГА! Якщо вам потрібна допомога вашою рідною мовою, телефонуйте на номер (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). Люди з обмеженими можливостями також можуть скористатися допоміжними засобами та послугами, наприклад, отримати документи, надруковані шрифтом Брайля та великим шрифтом. Телефонуйте на номер (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). Ці послуги безкоштовні.

**Tiếng Việt (Vietnamese)**
CHÚ Ý: Nếu quý vị cần trợ giúp bằng ngôn ngữ của mình, vui lòng gọi số (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). Chúng tôi cũng hỗ trợ và cung cấp các dịch vụ dành cho người khuyết tật, như tài liệu bằng chữ nổi Braille và chữ khổ lớn (chữ hoa). Vui lòng gọi số (888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100). Các dịch vụ này đều miễn phí.

TUSMADA MAWDUUCYADA

LUUQADAHA IYO QAABABKA KALE ........ 6
MACLUUMAADKA XIDHIIDHKA DEGMADA ........ 8
UJEEDKA BUUG-YARAHAN ........ 10
MACLUUMAADKA ADEEGYADA CAAFIMAADKA HABDHAQAN ........ 11
HELITAANKA ADEEGYADA CAAFIMAADKA HABDHAQAN ........ 15
DOORASHADA ADEEG-BIXIYE ........ 24
XAQA AAD U LEEDAHAY INAAD HESHO DIIWAANADA CAAFIMAADKA HABDHAQAN IYO MACLUUMAADKA HAGAHA ADEEG-BIXIYEYAASHA ADIGA OO ADEEGSANAYA AALADAHA CASRIGA AH ........ 27
BAAXADDA ADEEGYADA ........ 28
ADEEGYADA LAGU HELI KARO TALEEFANKA AMA ADEEGGA CAAFIMAAD EE ONLAYNKA AH "TELEHEALTH" ........ 56
HANNAANKA XALLINTA MASHAAKILKA: SIDA LOO XAREEYO CABASHADA, RACFAANKA, AMA LOO CODSADO DHEGAYSI CADDAALAD AH OO GOBOL ... 57
DARDAARANKA HORE "ADVANCE DIRECTIVE" ........ 71
XUQUUQDA IYO MASUULIYADAHA ........ 72
WARGELINTA TAKOOR-LA'AANTA ........ 84
WARGELINTA NIDAAMYADA SIRNIMADA ........ 88
ERAYO AY TAHAY IN LA OGAADO ........ 90
MACLUUMAAD DHEERAAD AH OO KU SAABSAN DEGMADAADA ........ 101

## Luuqadaha kale

Haddii aad caawimo uga baahan tahay luuqadaha wac (888) 724-7240 (TTY: 711). Kaalmooyin iyo adeegyo loogu talagalay dadka naafada ah, sida dukumintiyada ku qoran farta indhoolka iyo farta waaweyn, ayaa sidoo kale la heli karaa. Wac (888) 724-7240 (TTY: 711). Adeegyadani waa bilaash.

## Qaabab kale

Waxa aad heli kartaa macluumaadkan oo ku qoran qaabab kale, sida farta indhoolka, farta waaweyn ee 20-booynti ah, maqal, iyo qaabab elegtaroonig ahaan lagu heli karo iyaga oo bilaash kuu ah. Wac lambarka taleefanka degmada ee ku qoran jaldiga buug-yarahan (TTY: 711). Wicitaanku waa bilaash.

## Adeegyada Turjumaadda

Degmadu waxa ay bixisaa adeegyo turjumaad afeed ah oo uu bixiyo turjumaan khibrad leh, oo la heli karo 24 ka saac, bilaashna kuu ah. Kuma qasbanid in xubin qoys ama saaxiib uu turjumaan kuu noqdo. Waxa aanu dhiirrigelinaa u adeegsiga dhallinyarta turjumaano ahaan, iyada oo xaaladdu tahay mid degdeg ah mooyee. Degmadu waxa ay sidoo kale kaalmooyin iyo adeegyo dheeraad ah siin kartaa xubin qoys, saaxiib, ama qof kale oo ay munaasab tahay in lala xidhiidho isaga oo kaa wakiil ah. Adeegyo turjumaad, luuqadeed iyo dhaqan ayaa laguu heli karaa iyaga oo kuu bilaash ah. Caawimo ayaa la heli karaa 24 ka saacadood maalintii, 7 da maalmood ee

toddobaadkii. Wixii caawimo luuqadeed ah ama sidii aad ugu heli lahayd buug-yarahan luuqad kale, wac lambarka taleefanka degmada ee ku qoran jaldiga buug-yarahan (TTY: 711). Wicitaanku waa bilaash.

## MACLUUMAADKA XIDHIIDHKA DEGMADA

Waxa aanu halkan u joognaa inaanu ku caawimo. Macluumaadka xidhiidhka ee degmada ee soo soca ayaa kaa caawin doona inaad hesho adeegyada aad u baahan tahay.

**Laynka Helitaanka iyo Musiibooyinka ee San Diego ee 24/7 ah**

(888) 724-7240 (TTY: 1-800-855-7100)

Lambarkan bilaashka ah waxa la heli karaa 24 ka saac, 7 da maalmood ee toddobaadka iyada oo laga heli karo la taliyeyaal kaaga jawaabi kara su'aalaha aad qabto isla markaana ku siin kara gudbinnada adeegyada caafimaadka maskaxda iyo adeegyada cilladda adeegsiga maandooriyaha.

**Websaytka Adeegyada Caafimaadka Habdhaqan ee Degmada San Diego**

https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/bhs.html

Waxa ku jira macluumaad ku saabsan adeegyada iyo sida loo heli karo daryeelka.

**Hagaha Adeeg-bixiyaha Degmada San Diego**

https://sdcountybhs.com/ProviderDirectory

Hage la baadhi karo oo ay ku jiraan macluumaad ku saabsan halka adeeg-bixiyeyaasha laga heli karo, adeegyada ay bixiyaan, iyo macluumaad kale ee kaa caawin kara helitaanka daryeelka.

**Khayraadka Waxbarashada Xubnaha ee loogu talagalay Helitaanka Diiwaanada Caafimaadka Habdhaqan**

API ga Helitaanka ee Bukaanka ayaa waxa uu soo bixi doonaa Sanad Miisaaniyadeedka 2025-2026. Macluumaad ku saabsan sida loo codsado diiwaanadaada caafimaadka habdhaqan ayaa waxa laga heli karaa barta https://www.calmhsa.org/interoperability-api/

**Sida loogu Xareeyo Cabasho ama Racfaan Elegtaroonig ahaan**

Fadlan booqo mid kamid ah linkiyada hoose:

- **Adeegyada Bukaan-jiifka iyo/ama Hoy "Residential"**
  Adeegga Qoyska Yuhuudiga ah ee San Diego

https://secure.jfssd.org/site/SPageServer?pagename=contact_patient_advocacy

- **Adeegyada Bukaan-socodka**
  Xarunta Adeeg-qaataha ee Waxbarashada iyo U Doodista Caafimaad (CCHEA)
  https://www.lassd.org/mental-health-and-substance-abuse-patients-rights/

**Ayo Ayaa aan La Xidhiidhaa Haddii ay Igu Soo Dhacayaan Fekrado Qudh-iska-jarid?**

Haddii adiga ama qof aad garanaysaa uu ku sugan yahay musiibo, fadlan ka wac 988 Laynka-caawimada ee Qudh-iska-jarista iyo Musiibada ee **988** ama Laynka-caawimada Kahortagga Qudh-iska-jarista Qaranka ee **1-800-273-TALK (8255)**. Wadahadal qoraal ayaa laga heli karaa barta https://988lifeline.org/.

Si aad galaangal ugu hesho barnaamijyadaada maxalliga ah, fadlan wac Laynka Helitaanka iyo Musiibada ee 24/7 ah ee ku qoran kor.

## UJEEDKA BUUG-YARAHAN

**Sababma ayaa ay muhiim u tahay in la akhriyo buug-yarahan?**

Degmadaadu waxa ay leedahay qorshe caafimaad maskaxeed kaas oo bixiya adeegyo caafimaadka maskaxeed ah oo loo yaqaano "adeegyada caafimaadka maskaxeed ee takhasuska ah." Taas marka laga yimaaddo, degmadaadu waxa ay leedahay Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka kaas oo bixiya adeegyo loogu talagalay adeegsiga khamriga ama daroogada, oo loo yaqaano "adeegyada cilladda adeegsiga maandooriyaha." Adeegyadan waxa la isku wada yidhaahdaa "adeegyada caafimaadka habdhaqan," waxana muhiim ah inaad macluumaad ka hayso adeegyadan si aad u heli karto daryeelka aad u baahan tahay. Buug-yarahani waxa uu sharraxayaa faa'iidooyinkaaga iyo sida aad u heli karto daryeel. Waxa uu sidoo kale ka jawaabi doonaa qaar badan oo kamid ah su'aalahaaga.

Waxa aad baran doontaa:

- Sida aad uga heli karto adeegyada caafimaadka habdhaqan degmadaada.
- Faa'iidooyinka aad galaangalka u heli karto.
- Waxa aad samaynayso haddii aad qabto su'aal ama mushkilad.
- Xuquuqdaada iyo masuuliyadahaaga ka xubin ka tirsan degmadaada ahaan.
- Haddii ay jiraan macluumaad dheeraad oo ku saabsan degmadaada, taas oo lagu tilmaami doono dhammaadka buug-yarahan.

Haddii aanad akhrin buug-yarahan, waa inaad haysato si aad u akhrin karto wakhti dambe. Buuggan waxa loogu talagalay in lala adeegsado buuggii aad heshay markii aad isku diiwaangelisay faa'iidooyinka Medi-Cal. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan faa'iidooyinka Medi-Cal, waxa aad wacdaa degmada adiga oo adeegsanaya lambarka taleefanka ee ku qoran halka hore ee buuggan.

**Halkee ayaa aan Tegi Karaa si aan u helo Macluumaad Dheeraad ah oo Ku Saabsan Medi-Cal?**

Ka Booqo websaytka Waaxda Adeegyada Daryeelka Caafimaadka barta https://www.dhcs.ca.gov/services/medi-cal/eligibility/Pages/Beneficiaries.aspx si aad u hesho macluumaad dheeraad oo ku saabsan Medi-Cal.

## MACLUUMAADKA ADEEGYADA CAAFIMAADKA HABDHAQAN

### Sida Lagu Ogaado Haddii Adiga ama Qof aad Garanaysaa uu U Baahan Yahay Caawimo?

Dad badani waxa ay ku wajahaan wakhtiyo adag nolosha waxana dhici karta inay wajahaan xaalado caafimaad maskaxeed ama adeegsi maandooriye ah. Waxa ugu muhiimsan ee ay tahay in la xusuusto ayaa ah in caawimo la heli karo. Haddii adiga ama xubin qoyskaaga ahi ay u qalanto Medi-Cal isla markaana u baahato adeegyada caafimaadka habdhaqan, waa inaad wacdo Laynka Helitaanka ee 24/7 ah ee ku qoran jaldiga buug-yarahan. Qorshahaaga daryeelka la maareeyey ayaa sidoo kale kaa caawin kara inaad la xidhiidho degmadaada haddii ay u arkaan in adiga ama xubin qoyskaaga ahi u baahan tahay adeegyada caafimaadka habdhaqan oo aan soo hoos galeyn qorshaha daryeelka la maareeyey. Degmadaada ayaa kaa caawin doonta inaad hesho bixiye adeegyada aad u baahan karto ah.

Liiska hoose ayaa kaa caawin kara inaad go'aansato in adiga ama xubin qoys ay u baahan tahay caawimo. Haddii wax ka badan hal calaamad ay jirto ama socoto muddo dheer, waxa ay noqon kartaa calaamad muujinaysa mushkilad halisnimo badan oo u baahan caawimo xirfadeed. Halkan waxa ah qaar ah calaamadaha caamka ah ee muujinaya in laga yaabo inaad caawimaad uga baahan tahay xaalad caafimaadka maskaxeed ah ama xaalad adeegsiga maandooriye ah:

**Fekerrada iyo Dareenada**

- Isbedellada muudhka ee xooggan, oo ay suuragal tahay inay sabab la'aan yihiin, sida:
  - Werwer, walaac, ama cabsi aad u badan
  - Murugo ama niyadjab aad u badan
  - Aad iskula wanaagsan, ugu sarreeya dunida
  - Cadha-dhaw ama cadhaysan muddo aad u dheer
- Ka fekeraya qudh-iska-jarid
- Diiradda saaraya keliya helitaanka ama adeegsiga khamri ama daroogo
- Mashaakil ka haysta dhanka diirad-saaridda, xusuusta ama fekerka maangalka ah iyo hadal ay adag tahay in la sharxaa

- Mashaakil ka haysta dhanka maqalka, aragga, ama waxyaabo ay adag tahay in la sharxaa ama kuwo dadka badankoodu ay sheegaan in aanay jirin

**Mid jireed**

- Mashaakil jireed oo badan, oo ay suuragal tahay in aanay lahayn sababo muuqdaa, sida:
  - Madax xanuun
  - Calool xanuun
  - Hurdo aad u badan ama aad u yar
  - Cunitaan aad u badan ama aad u yar
  - Aan awoodin in uu u hadlo si waadax ah
- Hoos u dhac ku yimaadda muuqaalka ama walaac xooggan oo kasoo kordha muuqaalka, sida:
  - Miisaan si kedis ah u luma ama u kordha
  - Indho cascas iyo wiilal si aan caadi ahayn u balballaadhan
  - Ur aan caadi ahayn oo ku timaadda neefta, jidhka, ama dharka

**Mid habdhaqan**

- Wajihidda cawaaqib ka timaadda habdhaqankaaga taas oo ay sabab u tahay isbedellada ku yimid caafimaadkaaga maskaxeed ama adeegsigaaga khamriga ama daroogada awgood, sida:
  - Mashaakil kaasoo wajaha shaqada ama dugsiga
  - Mashaakil kaasoo wajaha xidhiidhada aad la leedahay dadka kale, qoyska, ama saaxiibada
  - Illaabitaanka ballamahaaga "commitments"
  - Inaad awoodi weydo inaad qabato hawlahaagii maalinlaha ahaa ee joogtada ahaa
- Ka fogaanshaha saaxiibada, qoyska, ama hawlaha bulsheed
- Yeelashada habdhaqan sir ah ama baahi sir ah oo loo qabo lacag
- Ku lug lahaanshaha nidaamka garsoorka taas oo ay sabab u tahay isbedellada ku yimid caafimaadkaaga maskaxeed ama adeegsigaaga khamriga ama daroogada awgood

**Xubnaha Ka Yar Da'da 21**

***Sidee Baa aan Ku Ogaadaa marka Ilme ama Qof Ka Yar a'da 21 uu U Baahan Yahay Caawimo?***

Waxa aad la xidhiidhi kartaa degmadaada ama qorshahaaga daryeelka la maareeyey si baadhis iyo qiimeyn loogu sameeyo ilmahaaga ama dhawryo-toban-jirkaaga haddii aad u malayso in ay muujinayaan calaamado ah xaalad caafimaad habdhaqan. Haddii ilmahaaga ama dhawryo-toban-jirkaagu uu u qalmo Medi-Cal isla markaana baadhista ama qiimeyntu ay muujiso in adeegyo caafimaad habdhaqan loo baahan yahay, markaas degmada ayaa u qabanqaabin doonta ilmahaaga ama dhawryo-toban-jirkaaga helitaanka adeegyo caafimaad habdhaqan. Qorshahaaga daryeelka la maareeyey ayaa sidoo kale kaa caawin kara inaad la xidhiidho degmadaada haddii ay u arkaan in ilmahaaga ama dhawryo-toban-jirkaagu uu u baahan yahay adeegyada caafimaadka habdhaqan oo aan soo hoos galeyn qorshaha daryeelka la maareeyey. Waxa sidoo kale jira adeegyo ay heli karaan waalidiinta culayska nafsiyeed uu kasoo wajahay hawlaha waalidnimada.

Carruurta ah da'da 12 sano jirka ama ka weyn waxa laga yaabaa in aanay u baahan ogolaansho waalid si ay u helaan daaweyn ama la talin caafimaadka maskaxeed oo bukaan-socod ah haddii shakhsiga xirfadlaha ah ee daaweynaya uu u arko in ilmaha ay da'diisu u saamaxayso in uu ka qaybqaato adeegyada caafimaadka habdhaqan. Carruurta ah da'da 12 sano jirka ama ka weyn waxa laga yaabaa in aanay u baahan ogolaansho waalid si ay u helaan daryeel ama la talin caafimaad si looga daaweeyo mushkilad la xidhiidha cillad adeegsi maandooriye. Ku lug lahaansho waalid ama masuul ayaa loo baahan yahay iyada oo moojee shakhsiga xirfadlaha ah ee daaweynaya uu go'aamiyo in ku lug lahaanshahoodu aanu munaasab noqon doonin kadib marka uu la tashado ilmaha.

Liiska hoose ayaa kaa caawin kara inaad go'aansato in ilmahaaga ama dhawryo-toban-jirkaagu uu u baahan yahay caawimo. Haddii wax ka badan hal calaamad ay jirto ama tegi weydo muddo dheer, waxa ay noqon kartaa in ilmahaaga ama dhawryo-toban-jirkaagu uu leeyahay mushkilad sii halisnimo badan oo u baahan caawimo xirfadeed. Halkan waxa ah waxoogaa calaamado ah oo ay tahay in fiiro gaar ah loo yeesho:

- Iyada oo ay aad u adkaato niyad-soo-jeedinta ama xarakaad joojinta, taas oo gelinaysa halis jidheed ama sababaysa mashaakil dugsiyeed
- Werwero ama cabsiyo xooggan oo caqabad ku noqda hawlaha maalinlaha ah
- Cabsi weyn oo xooggan oo aan sabab lahayn, mararka qaar wadata xawaare sarreeya oo garaaca wadnaha ama neefsashada ah
- Dareema murugo badan ama ka fogaada dadka kale muddo laba toddobaad ama wax ka badan ah, taas oo mashaakil ku keenta hawlaha maalinlaha ah
- Isbedbeddel muudh oo xooggan taas oo mashaakil ku keenta xidhiidhada
- Isbedello waaweyn oo ku yimaadda habdhaqanka
- Cunitaan la'aan, matagid, ama adeegsiga daawooyinka dhimista miisaanka
- Adeegsi khamri ama daroogo oo soo noqnoqda
- Habdhaqan daran, oo xad-ka-bax ah oo waxyeello u keeni kara qofka naftiisa ama dadka kale
- Qorsheyaal ama isku dayo halis ah oo qofku ku waxyeellaynayo ama ku dilayo naftiisa
- Dagaalo, adeegsi hub, ama qorshe halis ah oo qofku ku waxyeellaynayo dadka kale oo soo noqnoqda

# HELITAANKA ADEEGYADA CAAFIMAADKA HABDHAQAN

**Sidee Baa aan Ku Helaa Adeegyada Caafimaadka Habdhaqan?**

Haddii aad u aragto in aad u baahan tahay adeegyo caafimaad habdhaqan sida adeegyada caafimaadka maskaxeed iyo/ama adeegyada cilladda adeegsiga maandooriyaha, waxa aad wici kartaa degmadaada adiga oo adeegsanaya lambarka taleefanka ee ku qoran jaldiga buug-yarahan. Marka aad la xidhiidho degmada, waxa aad heli doontaa baadhis waxana laguu muddeyn doonaa ballan qiimeyn.

Waxa aad sidoo kale codsan kartaa adeegyada caafimaadka habdhaqan ee ku jira qorshahaaga daryeelka la maareeyey haddii aad tahay xubin. Haddii qorshaha daryeelka la maareeyey uu go'aamiyo inaad buuxisay shuruudda helitaanka adeegyada caafimaadka habdhaqan, qorshaha daryeelka la maareeyey waxa uu kaa caawin doonaa inaad hesho qiimeyn si aad uga hesho adeegyada caafimaadka habdhaqan degmadaada. Ugu dambeyn, ma jirto waddo khaldan oo lagu helo adeegyada caafimaadka habdhaqan. Waxa laga yaabaa xattaa inaad awood u yeelato inaad adeegyada caafimaadka habdhaqan ka hesho qorshahaaga daryeelka la maareeyey oo dheeraad ka ah adeegyada caafimaadka habdhaqan ee aad ka helayso degmadaada. Waxa aad adeegyadan heli kartaa adiga oo u maraya adeeg-bixiyaha caafimaadka habdhaqan haddii adeeg-bixiyahaagu go'aamiyo in adeegyadu caafimaad ahaan munaasab kuu yihiin adiga illaa inta adeegyadaasi yihiin kuwo si wadajir ah loo qorsheeyey ee aanay ahayn kuwo lagu soo celceliyo.

Taas marka laga yimaaddo, waxa aad maskaxda ku haysaa waxyaabaha soo socda:

- Waxa laga yaabaa in uu degmadaada kuugu gudbiyo adeegyada caafimaadka habdhaqan shakhsi ama hay'ad kale, oo ay kamid yihiin dhakhtarkaaga guud, dugsigaaga, xubin qoyskaaga ah, masuulkaaga, qorshahaaga daryeelka la maareeyey, ama hay'adaha degmada ee kale. Caadi ahaan, dhakhtarkaaga ama qorshahaaga daryeelka la maareeyey waxa uu u baahan doonaa ogolaanshahaaga ama ogolaanshaha waalidka ama daryeelaha ilmaha, si uu si toos ah ugu gudbiyo degmada, iyada oo moojee ay jirto xaalad degdeg ahi.
- Degmadaadu ma diidi karto codsi ah inay samayso qiimeyn hore oo ay ku go'aaminayso inaad buuxisay shuruudaha helitaanka adeegyada caafimaadka habdhaqan iyo inkale.

- Adeegyada caafimaadka habdhaqan waxa bixin kara degmada ama adeeg-bixiyeyaal kale oo ay degmadu qardaraas kula jirto (sida xarumo caafimaad, xarumo daaweyn, hay'ado bulsheed, ama adeeg-bixiyeyaal shakhsi ah).

**Halkee Ayaa aan Ka Heli Karaa Adeegyada Caafimaadka Habdhaqan?**

Waxa aad adeegyada caafimaadka habdhaqan ka heli kartaa degmada aad ku nooshahay, waxana sidoo kale aad ka heli kartaa meel aan degmadaada ahayn haddii ay daruuri noqoto. Degmo waliba waxa ay leedahay adeegyo caafimaadka habdhaqan ah oo loogu talagalay carruurta, dhallinyarta, dadka waaweyn, iyo waayeelka. Haddii aad ka yar tahay da'da 21 sano jirka, waxa aad u qalantaa kharash-bixin iyo faa'iidooyin dheeraad ah oo hoos yimaadda barnaamijka Baadhista, Ogaanshaha, iyo Daaweynta Hore ee Joogtada ah "Early and Periodic Screening, Diagnostic, and Treatment". Ka eeg qaybta "Baadhista, Ogaanshaha, iyo Daaweynta Hore ee Joogtada ah - Early and Periodic Screening, Diagnostic, and Treatment" ee buug-yarahan wixii macluumaad ah ee dheeraad ah.

Degmadaada ayaa kaa caawin doonta helitaanka adeeg-bixiye kaas oo ku siin kara daryeelka aad u baahan tahay. Degmadu waa inay kuu gudbisaa adeeg-bixiyaha ugu dhaw gurigaaga, ama wakhti ama masaafad macquul ah kuu jira oo dabooli doona baahiyahaaga.

**Goorma Ayaa aan Heli Karaa Adeegyada Caafimaadka Habdhaqan?**

Degmadaadu waa inay buuxisaa halbeegyada loo dhigay wakhtiga ballanta marka ay kuu muddaynayso adeeg adiga. Wixii ah adeegyada caafimaadka maskaxeed, degmadu waa inay bixiso ballan:

- Muddo 10 maalin shaqeed ah gudahood oo ka bilaabma codsigaaga aan-degdegga ahayn si loo bilaabo adeegyada qorshaha caafimaadka maskaxeed;
- Muddo 48 saacadood ah gudahood haddii aad adeegyada u codsatay xaalad degdeg ah oo aan u baahneyn ogolaansho hore;
- Muddo 96 saacadood ah xaalada degdegga ah ee u baahan ogolaansho hore;
- Muddo 15 maalin shaqeed ah gudahood oo ka bilaabma codsigaaga aan-degdegga ahayn ee ballanta aad la yeelanayso dhakhtarka maskaxda; iyo,

- Muddo 10 maalin shaqeed ah gudahood oo ka bilaabma ballantii hore wixii ah ballamihii la soocdka aan degdegga ahayn ee xaaladaha socda.

Wixii ah adeegyada cilladda adeegsiga maandooriyaha, degmadu waa inay ku siisaa ballan:

- Muddo 10 maalin shaqeed ah gudahood oo ka bilaabma codsigaaga aan-degdegga ahayn si loo bilaabo adeegyada uu bixinayo adeeg-bixiyaha cilladda adeegsiga maandooriyaha ee adeegyada bukaan-socodka iyo kuwa bukaan-socodka ee la dardargeliyey;
- Muddo 48 saacadood ah gudahood haddii aad adeegyada u codsatay xaalad degdeg ah oo aan u baahneyn ogolaansho hore;
- Muddo 96 saacadood ah xaalada degdegga ah ee u baahan ogolaansho hore;
- Muddo 3 maalin shaqeed ah guahood oo ka bilaabma codsigaaga adeegyada Barnaamijka Daaweynta Xashiishadda;
- Ballan aan-degdeg ahayn oo la-socod muddo 10 maalmood ah gudahood haddii aad marayso muddo daaweyn oo cilladda adeegsiga maandooriyaha oo socota ah, marka laga reebo xaalado cayiman oo uu xusay adeeg-bixiyahaaga daaweyntu.

Si walba ha noqotee, wakhtiyadani waxa laga yaabaa inay intii hore ka dheeraadaan haddii adeeg-bixiyahaagu uu go'aamiyo in wakhti sugitaan oo intii hore ka dheer uu caafimaad ahaan munaasab yahay isla markaana aanu waxyeello ku yeelaneyn caafimaadkaaga. Haddii laguu sheegay in lagu geliyey liis sugitaan isla markaana aad dareemayso in muddada wakhtigu ay waxyeello ku tahay caafimaadkaaga, waxa aad kala xidhiidhaa degmadaada lambarka taleefanka ee ku qoran jaldiga buug-yarahan. Waxa aad xaq u leedahay inaad xarayso cabasho haddii aad heli weydo daryeel wakhtiga munaasab ku ah. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xareynta cabasho, ka eeg qaybta "Hannaanka Cabashada" ee buug-yarahan.

**Waa Maxay Adeegyada Xaaladda Degdegga ahi?**

Adeegyada xaaladda degdegga ah waa adeegyo loogu talagalay xubnaha wajahaya xaalad caafimaad oo lama filaan ah, oo ay kamid tahay xaalad caafimaad oo degdeg ah oo maskaxeed. Xaalad caafimaad oo degdeg ah waxa ay leedahay calaamado aad u

daran (oo ay suuragal tahay in uu ku jiro xanuun daran) kaas oo qofka caadiga ah uu suuragal ahaan filan karo waxyaabaha soo socdaa inay dhici karaan wakhti kasta:

- Caafimaadka shakhsiga (ama caafimaadka ilmaha aan dhalan) waxa uu geli karaa halis daran
- Waxa uu waxyeello halis ah ku keenaa qaabka uu jidhkaagu u shaqeeyo
- Waxa uu dhaawac halis ah ku keenaa xubin ama qayb jidhka ah

Xaalad caafimaad oo degdeg ah oo maskaxeed waxa ay dhacdaa marka qofka caadiga ahi u arko in qof:

- Halis hadda ah uu ku hayo naftiisa ama qofkale taas oo ay sabab u tahay xaalad caafimaad maskaxeed ah ama xaalad caafimaad maskaxeed oo laga shakiyey ah.
- Wakhtiga la taagan yahay aanu awoodin in uu daboolo baahiyihiisa, sida cuntada, dharka, hoyga, ammaanka shakhsiyeed, ama helitaanka daryeelka caafimaad ee daruuriga ah taas oo ay sabab u tahay xaalad caafimaad maskaxeed ah ama xaalad caafimaad maskaxeed oo laga shakiyey ah iyo/ama cillad adeegsiga maandooriyaha ah oo daran.

Adeegyada xaaladda degdegga ah waa kuwo kharashkooda laga bixiyo 24 ka saacadood ee maalintii, toddobada maalmood ee toddobaadkii xubnaha Medi-Cal. Ogolaansho hore loogama baahna adeegyada xaaladda degdegga ah. Barnaamijka Medi-Cal waxa uu bixin doonaa kharashka xaaladaha degdegga ah, iyada oo aan loo kala eegeyn in xaaladda ay keentay xaalad caafimaad jidheed ama mid maskaxeed (fekero, dareeno, habdhaqano ah kuwo keena culays-nafsiyeed iyo/ama khalkhal la xidhiidha qofka naftiisa ama dadka kale). Haddii aad ka diiwaangashan tahay Medi-Cal, lagugu ma soo dallici doono lacagta tegitaanka qolka xaaladda degdegga ah, xattaa haddii la ogaado in aanay xaalad degdeg ah ahayn. Haddii aad u aragto inaad wajahayso xaalad degeg ah, waxa aad wacdaa **911** ama waxa aad tagtaa isbitaal ama goob kale si aad caawimo uga hesho.

**Ayaa Go'aamiya Adeegyada aan Heli Doono?**

Adiga, adeeg-bixiyahaaga, iyo degmada ayaa dhammaantiin ka qaybqaadanaya go'aaminta adeegyada aad u baahan tahay inaad qaadato. Xirfadle caafimaadka habdhaqan ah ayaa kula hadli doona isla markaana gacan ka geysan doona go'aaminta nooca adeegyada loo baahan yahay.

Uma baahnid inaad ogaato in lagaa helay xanuun caafimaadka habdhaqan ah ama xaalad caafimaadka habdhaqan oo cayiman ah si aad u dalbato caawimaad. Waxa aad awood u yeelan doontaa inaad hesho waxoogaa adeegyo ah inta uu adeeg-bixiyahaagu dhamaystirayo qiimeyn.

Haddii aad ka yar tahay da'da 21, waxa aad sidoo kale awood u yeelan doontaa inaad hesho adeegyada caafimaadka habdhaqan haddii aad leedahay xaalad caafimaadka habdhaqan ah taas oo ay sabab u tahay uur-ku-taallo, ku lug yeelashada nidaamka daryeelka carruurta, ku lug yeelashada garsoorka carruurta, ama hoy-la'aan. Taas marka laga yimaaddo, haddii aad ka yar tahay 21, degmadu waa inay ku siiso adeegyada daruuriga u ah caafimaadka si ay caawimo uga geysato xaaladdaada caafimaadka habdhaqan. Adeegyada joogteeya, taageera, ladnaysiiya, ama ka dhiga kuwo sidii hore si ka wanaagsan loogu xammili karo xaalad caafimaadka habdhaqan ah waxa loo tixgeliyaa inay daruuri yihiin caafimaad ahaan.

Adeegyada qaar waxa ay ogolaansho hore uga baahan karaan degmada. Adeegyada u baahan ogolaansho hore waxa kamid ah Adeegyada Guriyeed ee La Dardargeliyey "Intensive Home-Based Services", Daaweynta Maalintii ee La Dardargeliyey "Day Treatment Intensive", Dhaqancelinta Maalintii "Day Rehabilitation", Adeegyada Habdhaqan ee Daaweyneed "Therapeutic Behavioral Services", Daryeelka Korinta ee Daaweyneed "Therapeutic Foster Care" iyo Adeegyada Hoy ee Cilladda Adeegsiga Maandooriyaha "Substance Use Disorder Residential Services". Waxa aad wacdaa degmadaada adiga oo adeegsanaya lambarka taleefanka ee ku qoran jaldiga buug-yarahan si aad u codsato macluumaad dheeraad ah.

Hannaanka ogolaanshaha degmadu waa in uu raaco jadwal-wakhtiyeedyo cayiman.

- Wixii ah ogolaanshaha cilladda adeegsiga maandooriyaha ee caadiga ah, degmadu waa inay ku go'aansato codsiga adeeg-bixiyahaaga muddo shan (5) maalin shaqeed ah gudahood.
    - Haddii adiga ama adeeg-bixiyahaagu aad codsataan, ama haddii degmadu ay u aragto in dantaadu ku jirto inaad macluumaad dheeraad ah ka hesho adeeg-bixiyahaaga, jadwal-wakhtiyeedka waxa lagu kordhin karaa illaa 14

maalmood oo kale. Tusaale ah marka kordhinta ay ku jiri karto dantaadu waa marka degmadu u aragto in laga yaabo inay awooddo ansixinta codsiga adeeg-bixiyahaaga ee ogolaanshaha haddii degmadu macluumaad dheeraad ah ay ka hashay adeeg-bixiyahaaga isla markaana ay ku khasbanaan lahayd inay diiddo codsiga haddii aanay hayn macluumaadka. Haddii degmadu ay kordhiso jadwal-wakhtiyeedka, degmadu waxa ay kuu soo diri doontaa wargelin qoraal ah oo ku saabsan kordhinta.

- Wixii ah ogolaanshaha caafimaadka maskaxeed ee hore ee caadiga ah, degmadu waa inay go'aansato iyada oo ku salaynaysa codsiga adeeg-bixiyahaaga sida ugu dhakhsaha badan ee xaaladdaadu qasabto, balse waa in aanay dhaafin shan (5) maalin shaqeed oo ka bilaabma marka degmadu ay hesho codsiga.
  - Tusaale ahaan, haddii raacitaanka jadwal-wakhtiyeedka caadiga ah ay si daran halis u gelin karto noloshaada, caafimaadkaaga, ama awoodda aad u leedahay helitaanka, joogteynta, ama dib u helidda caafimaadka ugu wanaagsan, degmadaadu waa inay dedejiso go'aanka ogolaanshaha isla markaana ay bixiso wargelin iyada oo ku salaynaysa jadwal-wakhtiyeedka la xidhiidha xaaladdaada caafimaad taas oo aan ka dambeyn 72 saacadood kadib helitaanka codsiga adeegga. Degmadaadu waxa ay ku kordhin kartaa wakhtiga illaa 14 maalmood oo dheeraad ah kadib marka degmadu ay hesho codsiga haddii adiga ama adeeg-bixiyahaagu aad codsataan kordhinta ama degmadu ay qiil u keento sababta ay kordhinta ugu jirto dantaadu.

Labada xaaladoodba, haddii degmadu ay kordhiso jadwal-wakhtiyeedka codsiga ogolaanshaha adeeg-bixiyaha, degmadu waxa ay kuu soo diri doontaa wargelin qoraal ah oo ku saabsan kordhinta. Haddii degmadu ay go'aan ku gaadhi weydo jadwal-wakhtiyeedyada qoran gudahood ama ay diiddo, dib u dhigto, dhinto, ama joojiso adeegyada la codsaday, degmadu waa inay kuu soo dirto Wargelinta Go'aaminta Dheefaha ee Taban taas oo ay kuugu sheegayso in adeegyada la diiday, dib loo dhigay, la dhimay ama la joojiyey, kugu wargelinayso in aad xareyn karto racfaan, isla markaana ay kugu siinayso maclumaad ku saabsan sida loo xareeyo racfaan.

Waxa aad ka dalban kartaa degmada macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hannaanadeeda ogolaanshaha.

Haddii aad ogolaan weydo go'aanka degmada ee hannaanka ogolaanshaha, waxa aad xareyn kartaa racfaan. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, waxa aad ka eegtaa qaybta "Xallinta Mashaakilka" ee buug-yarahan.

**Waa Maxay Daruuro Caafimaad?**

Adeegyada aad heshaa waa inay noqdaan kuwo daruuri ah caafimaad ahaan isla markaana ay noqdaan kuwo munaasab ku ah in ay wax ka qabtaan xaaladdaada. Wixii ah xubnaha ah 21 sano jir iyo wixii ka weyn, adeeggu waxa uu daruuri yahay caafimaad ahaan marka uu macquul yahay isla markaana daruuri u yahay ilaalinta noloshaada, ka hortagga xanuuno iyo naafanimo laxaad leh, ama ladnaysiinta xanuun daran.

Wixii ah xubnaha ka yar da'da 21, adeegga waxa loo tixgeliyaa in yahay mid daruuri ah caafimaad ahaan haddi uu saxo, joogteeyo, taageero, ladnaysiiyo, ama ka dhigo mid sidii hore si ka wanaagsan loo xammili karo xaalad caafimaadka habdhaqan ah. Adeegyada joogteeya, taageera, ladnaysiiya, ama ka dhiga mid sidii hore si ka wanaagsan loo xammili karo xaalad caafimaadka habdhaqan ah ayaa loo tixgeliyaa kuwo daruuri ah caafimaad ahaan waxaana kharashkooda loo bixiyaa ka adeegyada Baadhista, Ogaanshaha, iyo Daaweynta Hore ee Joogtada ah ahaan "Early and Periodic Screening, Diagnostic, and Treatment".

**Sidee Baa aan Ku Heli Karaa Adeegyada Caafimaadka Maskaxeed ee Kale ee aanay Kharashkooda Bixin Degmadu?**

Haddii aad ka diiwaangashan tahay qorshe daryeel la maareeyey, waxa aad galaangal u leedahay adeegyada caafimaadka maskaxeeed ee bukaan-socodka ee soo socda adiga oo u maraya qorshahaaga daryeelka la maareeyey:

- Qiimeynta iyo daaweynta caafimaadka maskaxeed, oo ay kamid yihiin daaweyn shakhsiyeed, kooxeed iyo qoys.
- Shaybaadhka nafsiyeed iyo neerfo-nafsiyeed, marka caafimaad ahaan loo arko inay daruuri yihiin si loo qiimeeyo xaalad caafimaadka maskaxeed ah.
- Adeegyada bukaan-socodka ee loo bixiyo ujeedooyinka kormeerka daawooyinka

la qoro.

- La talinta caafimaadka maskaxeed.

Si aad u hesho mid kamid ah adeegyada sare, waxa aad si toos ah u wacdaa qorshahaaga daryeelka la maareeyey. Haddii aanad ku jirin qorshe daryeelka la maareeyey ah, waxa aad awood u yeelan kartaa inaad ka hesho adeegyadan adeeg-bixiyeyaal shakhsiyeed iyo xarumo caafimaad oo aqbala Medi-Cal. Degmadu waxa ay awood u yeelan kartaa inay kaa caawiso helitaanka adeeg-bixiye ama xarun caafimaad.

Farmasi kasta oo aqbala Medi-Cal waxa uu bixin karaa daawooyinka lagu daaweynayo xaaalad caafimaadka maskaxeed ah. Fadlan ogsoonow in daawooyinka la qoro inta ugu badan ee uu bixiyo farmasi, ee loo yaqaan Medi-Cal Rx, waxa kharashkooda lagu bixiyaa barnaamijka Fee-For-Service Medi-Cal, ee lagu ma bixiyo qorshahaaga daryeelka la maareeyey.

**Waa Maxay Adeegyada Cilladda Maandooriyaha ee Kale ee Laga Heli Karo Qorsheyaasha Daryeelka La Maareeyey ama Barnaamijka Medi-Cal "Fee for Service"?**
Qorsheyaasha daryeelka la maareeyey waa inay ku bixiyaan adeegyada cilladda adeegsiga maandooriyaha ee kharashkooda la bixiyo goobaha daryeelka ee aasaasiga ah iyo sidoo kale baadhitaanka tubaakada, khamriga, iyo daroogada sharci-darrada ah. Waa inay sidoo kale bixiyaan kharashka adeegyada cilladda adeegsiga maandooriyaha ee xubnaha uurka leh iyo sidoo kale baadhista adeegsiga khamriga iyo daroogada, qiimeynta, wax ka qabashooyin kooban, iyo u gudbin goobta daaweynta ee munaasabka ku ah xubnaha da'doodu yihiin 11 iyo wixii ka weyn. Qorsheyaasha daryeelka la maareeyey waa inay bixiyaan ama qabanqaabiyaan adeegyada Daawooyinka Daaweynta Balwadda (sidoo kale loo yaqaan Daaweynta Loo Kaashado Daawooyinka) ee lagu bixiyo goobo ah daryeelka aasaasiga ah, isbitaal bukaan-jiif, waaxaha xaaladaha degdegga ah, iyo goobaha caafimaad ee qandaraaska lagu la jiro ee kale. Qorsheyaasha daryeelka la maareeyey waa inay sidoo kale bixiyaan adeegyada daruuriga u ah xasilinta xubinta, oo ay kamid tahay sun-ka-saarista bukaan-jiifka ee ikhtiyaariga ah.

**Sidee Baa aan Ku Heli Karaa Adeegyada Medi-Cal ee Kale (Daryeelka Aasaasiga ah/Medi-Cal)?**

Haddii aad ku jirto qorshe daryeel la maareeyey, degmada ayaa masuul ka ah inay kuu hesho adeeg-bixiye. Haddii aanad ka diiwaangashaneyn qorshe maareyn daryeel isla markaana aad leedahay Medi-Cal "caadi ah", sidoo kale loo yaqaan Fee-For-Service Medi-Cal, markaas waxa aad u tegi kartaa adeeg-bixiye kasta oo aqbala Medi-Cal. Waa inaad u sheegto adeeg-bixiyahaaga inaad leedahay Medi-Cal kahor inta aanad bilaabin helitaanka adeegyada. Haddii kale, waxa lagugu soo dallici karaa kharashaadka adeegyadaas. Waxa aad adeegsan kartaa adeeg-bixiye ka baxsan qorshahaaga daryeelka la maareeyey si uu kuu siiyo adeegyada kala korinta.

**Waa Maxay Sababta aan Ugu Baahan Karo Adeegyada Isbitaalka Bukaan-jiifka ee Maskaxda?**

Waxa laga yaabaa in lagu dhigo isbitaal haddii aad qabto xaalad caafimaadka maskaxeed ah ama aad leedahay calaamado muujinaya xaalad caafimaadka maskaxeed ah oo aan si ammaan ah loogu daaweyn karin heer daryeel oo kaas ka hooseeya, xaaladda iyo calaamadaha caafimaadka maskaxeed ee xaaladda caafimaadka maskaxeed awgoodna, waxa aad:

- Halis ku tahay naftaada, dadka kale, ama hantida.
- Tahay mid aan awoodin inaad ka daryeesho naftaada dhanka cuntada, dharka, hoyga, ammaanka shakhsiyeed, ama daryeelka caafimaad ee daruuriga ah.
- Halis daran ku hayso caafimaadkaaga jidheed.
- Wajahday hoos u dhac dhawaan ah, oo laxaad leh oo ku yimid awoodda aad u leedahay inaad hawlahaaga qabsato taas oo ay sabab u tahay xaalad caafimaadka maskaxeed ah.
- U baahato qiimeyn caafimaadka maskaxeed ah, daaweyn daawo, ama daaweyn kale oo keliya lagu bixin karo isbitaal.

## DOORASHADA ADEEG-BIXIYE

**Sidee Baa aan Ku Heli Karaa Adeeg-bixiye i siiya Adeegyada Caafimaadka Habdhaqan ee aan u Baahanahay?**

Degmadaada ayaa laga rabaa inay internet ka soo geliso hagaha adeeg-bixiyeyaasha hadda. Waxa aad ka heli kartaa linkiga hagaha adeeg-bixiyeyaasha qaybta Macluumaadka Xidhiidhka Degmada ee buug-yarahan. Hagaha waxa ku jira macluumaad ku saabsan halka adeeg-bixiyeyaasha laga heli karo, adeegyada ay bixiyaan, iyo macluumaad kale oo kaa caawinaya helitaanka daryeel, oo ay kamid yihiin macluumaad ku saabsan adeegyada dhaqan iyo luuqadeed ee laga heli karo adeeg-bixiyeyaasha.

Haddii aad su'aalo ka qabto adeeg-bixiyeyaasha hadda ama aad jeclaan lahayd hage adeeg-bixiyeyaasha ah oo la cusbooneysiiyey, waxa aad booqataa websaytka degmadaada ama waxa aad adeegsataa lambarka taleefanka ee ku yaalla jaldiga buug-yarahan. Waxa aad ku heli kartaa liis adeeg-bixiyeyaasha ah qoraal ahaan ama boos ahaan haddii aad dalbato mid.

**Ogsoonow:** Degmadu waxa ay waxoogaa xaddidaado ah saari kartaa ikhtiyaarkaaga bixiyeyaasha adeegyada caafimaadka habdhaqan. Marka ugu horaysa ee aad bilawdo helitaanka adeegyada caafimaadka habdhaqan waxa aad codsan kartaa in degmadaadu ku siiso ikhtiyaar hore oo aad ku kala dooran karto ugu yaraan laba adeeg-bixiyeyaal. Degmadaadu waa inay sidoo kale kuu ogolaataa inaad iska beddesho adeeg-bixiyeyaasha. Haddii aad dalbato inaad iska beddesho adeeg-bixiyeyaasha, degmadu waa inay kuu ogolaataa inaad kala doorato ugu yaraan laba adeeg-bixiyeyaal marka ay suuragal tahay. Degmadaada ayaa masuul ka ah xaqiijinta inaad hesho wakhtiga munaasabka ah daryeelka iyo in ay jiraan adeeg-bixiyeyaal kugu filan oo kuu dhaw si loo xaqiijiyo inaad heli karto adeegyada caafimaadka habdhaqan ee kharashkooda la bixiyo haddii aad u baahato.

Mararka qaar adeeg-bixiyeyaasha ay qandaraaska kula jirto degmadu waxa ay doortaan inaanay haddeed bixin adeegyada caafimaadka habdhaqan taas oo ay sabab u tahay in laga yaabo in aanay haddeed qandaraas kula jirin degmada, ama aanay

haddeed aqbalin Medi-Cal. Marka ay tani dhacdo, degmadu waa inay dedaal daacad ah u gashaa inay siiso wargelin qoraal ah xubin kasta oo adeegyo ka helaysay adeeg-bixiyaha. Waxa lagaaga baahan yahay inaad wargelin ku hesho 30 maalmood kahor taariikhda ay dhaqangasho joojintu ama 15 maalmood kadib marka degmadu ay ogaato in adeeg-bixiyuhu uu joojin doono shaqada. Marka ay tani dhacdo, degmadaadu waa inay kuu ogolaato inaad sii waddo ka helitaanka adeegyada adeeg-bixiyaha ka tegey degmada, haddii adiga iyo adeeg-bixiyuhu aad isla qaadataan. Tan waxa loo yaqaanaa "sii waditaanka daryeelka" waxana lagu sharxayaa hoos.

**Ogsoonow:** Shakhsiyaadka Hindida Maraykanka ah iyo Dhaladka Alaska ee u qalma Medi-Cal isla markaana deggan degmooyinka qaybta ka ah Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka "Drug Medi-Cal Organized Delivery System", waxa ay sidoo kale heli karaan adeegyada Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka iyaga oo u maraya Bixiyeyaasha Daryeelka Caafimaadka ee Hindida.

**Ma Sii Wadi Karaa Ka Helitaanka Adeegyada Caafimaadka Maskaxeed ee Takhasuska ah Adeeg-bixiyahayga Hadda?**

Haddii aad hore uga helaysay adeegyada caafimaadka maskaxeed qorshe daryeelka la maareeyey ah, waxa aad sii wadi kartaa ka helitaanka daryeelka adeeg-bixiyahaas xattaa haddii aad adeegyo caafimaadka maskaxeed ah aad ka hesho adeeg-bixiyahaaga caafimaadka maskaxeed, illaa inta adeegyada ay isla qorshaynayaan adeeg-bixiyeyaashu isla markaana adeegyadu aanay isku mid noqoneyn.

Taas marka laga yimaaddo, haddii aad hore uga helaysay adeegyada qorshe caafimaadka maskaxeed ah oo kale, qorshe daryeel oo la maareeyey, ama adeeg-bixiye Medi-Cal ah oo shakhsiyeed, waxa aad codsan kartaa "sii waditaanka daryeelka" si aad ula sii joogi karto adeeg-bixiyahaaga hadda, muddo ah illaa 12 bilood. Waxa laga yaabaa inaad doonto inaad codsato sii waditaanka daryeelka haddii aad u baahato inaad lasii joogto adeeg-bixiyahaaga hadda si aad u sii waddo daaweynta socota ama maadaama oo ay ku sababi karto halis daran xaaladda caafimaadkaaga maskaxeed u wareegitaanka adeeg-bixiye cusub. Codsigaaga sii waditaanka daryeelka waa la ogolaan karaa haddii waxyaabaha soo socdaa ay run noqdaan:

- Xidhiidh socda ayaa aad la leedahay adeeg-bixiyaha aad codsanayso waxana

aad arkaysay adeeg-bixiyaha 12 kii bilood ee ugu dambeeyey;

- Waxa aad u baahan tahay inaad la joogto adeeg-bixiyaha hadda si aad usii waddo daaweynta socota si looga hortago waxyeello halis ah oo soo gaadha caafimaadka xubinta ama loo dhimo halista isbitaal-dhigista ama xarun-daryeel-dhigista.
- Adeeg-bixiyuhu waa mid khibrad leh isla markaana buuxiyey shuruudaha Medi-Cal;
- Adeeg-bixiyuhu waxa uu ogol yahay shuruudaha qorshaha caafimaadka maskaxeed ee qandaraas-la-gelista qorshaha caafimaadka maskaxeed iyo kharashbixinta adeegyada; iyo
- Adeeg-bixiyuhu waxa uu la wadaagaa dukumintiyada muhiimka ah degmada ee la xidhiidha baahida aad u qabto adeegyada.

**Ma Sii Wadi Karaa inaan Ka Helo Adeegyada Ciladda Adeegsiga Maandooriyaha Ee Adeeg-bixiyahayga Hadda?**

Waxa aad codsan kartaa inaad sii haysato adeeg-bixiyahaaga ka-baxsan-shabakadda muddo wakhti ah haddii:

- Xidhiidh socda aad la leedahay adeeg-bixiyaha aad codsanayso isla markaana aad arkaysay adeeg-bixiyahaas kahor taariikhda u wareegitaankaaga degmada Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka.
- Waxa aad u baahan tahay inaad la joogto adeeg-bixiyaha hadda si aad usii waddo daaweynta socota si looga hortago waxyeello halis ah oo soo gaadha caafimaadka xubinta ama loo dhimo halista isbitaal-dhigista ama xarun-daryeel-dhigista.

## XAQA AAD U LEEDAHAY INAAD HESHO DIIWAANADA CAAFIMAADKA HABDHAQAN IYO MACLUUMAADKA HAGAHA ADEEG-BIXIYEYAASHA ADIGA OO ADEEGSANAYA AALADAHA CASRIGA AH

Waxa aad heli kartaa diiwaanadaada caafimaadka habdhaqan oo/ama raadin kartaa adeeg-bixiye adiga oo adeegsanaya ablikayshan aad kala soo degtay kombuyuutar, taablet casri ah, ama taleefanka gacanta. Degmadaadu waxa ay hayn kartaa macluumaad laga heli karo websaytkooda oo aad eegi karto kahor inta aanad dooran ablikayshan si aad macluumaadkaaga ugu heli karto qaabkan. Si aad u hesho macluumaadka ku saabsan helitaanka galaangalkaaga, waxa aad la xidhiidhaa degmadaada adiga oo tixraacaya qaybta "Macluumaadka Xidhiidhka ee Degmada" ee ku jirta buug-yarahan.

## BAAXADDA ADEEGYADA

Haddii aad buuxiso shuruudda helitaanka adeegyada caafimaadka habdhaqan, adeegyada soo socda ayaa aad heli kartaa iyada oo lagu salaynayo baahidaada. Adeeg-bixiyahaaga ayaa kaala shaqayn doona go'aaminta adeegyada kugu munaasabka noqon doona.

**Adeegyada Caafimaadka Maskaxeed ee Takhasuska ah**

***Adeegyada Caafimaadka Maskaxeed "Mental Health Services"***

- Adeegyada caafimaadka maskaxeed waa adeegyo daaweyn shakhsiyeed, kooxeed, ama qoys oo ka caawiya dadka qaba xaaladaha caafimaadka maskaxeed horumarinta xirfadaha la qabsiga ee nolosha maalinlaha ah. Adeegyadan waxa sidoo kale kamid ah shaqada uu adeeg-bixiyuhu qabto si uu gacan uga geysto u wanaajinta adeegyada shakhsiga helaya daryeelka. Waxyaabahan waxa kamid ah qiimeynada lagu eegayo inaad u baahan tahay adeegga iyo in adeeggu shaqaynayo; qorshaynta daaweynta ee lagu go'aaminayo yoolasha daaweynta caafimaadkaaga maskaxeed iyo adeegyada gaarka ah ee la bixin doono; iyo "collateral", taas oo ka dhigan la shaqaynta xubnaha qoyska iyo dadka muhiimka ah ee ku jira noloshaada (haddii aad bixiso ogolaansho) si lagaaga caawiyo horumarinta ama joogtaynta awoodahaaga nolosha maalinlaha ah.
- Adeegyada caafimaadka maskaxeed waxa lagu bixin karaa xarun caafimaad ama xafiis adeeg-bixiye, gurigaaga ama goob bulsho oo kale, taleefanka, ama adeegga caafimaad ee onlaynka ah "telehealth" (kaas oo ay kamid yihiin falgallo keliya-maqal ah iyo kuwo muuqaal ah labadaba). Degmada iyo adeeg-bixiyaha ayaa kaala shaqayn doona go'aaminta inta jeer ee aad qaadan doonto adeegyadaada/ballamahaaga.

***Adeegyada Taageerada Daawooyinka "Medication Support Services"***

- Adeegyadan waxa kamid ah qorista, bixinta, qaybinta, iyo la socodka daawooyinka caafimaadka maskaxda. Adeeg-bixiyahaagu waxa uu sidoo kale bixin karaa waxbarasho ku saabsan daawooyinka. Adeegyadan waxa lagu bixin karaa xarun caafimaad, xafiiska dhakhtarka, gurigaaga, goob bulsheed,

taleefanka, ama adeegga caafimaad ee onlaynka ah "telehealth" (kaas oo ay kamid yihiin falgallada keliya-maqalka ah iyo kuwa muuqaalka ah labadaba).

***Maareynta Kiiska La Bartilmaameedsaday "Targeted Case Management"***

- Adeeggani waxa uu ka caawiyaa xubnaha inay helaan adeegyo caafimaad, waxbarasheed, bulsheed, kahor-shaqo, shaqo, soo kabasho, ama adeegyada bulsheed ee kale marka adeegyadan laga yaabo inay ku adag yihiin dadka qaba xaalad caafimaad maskaxeed inay iyagu doontaan. Maareynta kiiska la bartilmaameedsaday waxa kamid ah, balse aan ku xaddidneyn:
    - Samaynta qorshaha;
    - Xidhiidhka, isku dubaridka, iyo gudbinta;
    - La socodka bixinta adeegga si loo xaqiijiyo helitaanka shakhsiga ee adeegga iyo nidaamka bixinta adeegga; iyo
    - La socodka horumarka shakhsiga.

***Adeegyada Wax Ka Qabashada Musiibooyinka "Crisis Intervention Services"***

- Adeeggani waa mid la heli karo si wax looga qabto xaalad degdeg ah oo u baahan daryeel degdeg ah. Yoolka wax ka qabashada musiibadu waa in la caawiyo dadka ku sugan bulshada si aanay ugu baahan inay tagaan isbitaalka. Wax ka qabashada musiibadu waxa ay socon kartaa illaa siddeed saacadood waxana lagu bixin karaa xarun caafimaad ama xafiiska adeeg-bixiyaha, ama gurigaaga ama goob bulsheed oo kale. Adeegyadan waxa sidoo kale lagu bixin karaa taleefanka ama adeegga daryeelka caafimaad ee onlaynka ah "telehealth".

***Adeegyada Xasilinta Musiibooyinka "Crisis Stabilization Services"***

- Adeeggani waa mid la heli karo si wax looga qabto xaalad degdeg ah oo u baahan daryeel degdeg ah. Xasilinta musiibadu waxa ay socotaa wax ka yar 24 saacadood waana in lagu bixiyaa xarun daryeel caafimaad oo 24 ka saacadood ah oo liisan haysata, barnaamij bukaan-socod isbitaal, ama goob adeeg-bixiye shahaado u haysta bixinta adeegyadan.

***Adeegyada Daaweynta Hoy ee Dadka Waaweyn "Adult Residential Treatment Services"***

- Adeegyadani waxa ay siiyaan daaweyn caafimaadka maskaxeed ah dadka qaba xaalad caafimaadka maskaxeed ah ee ku nool xarumaha hoy ee liisanka haysta. Waxa ay gacan ka geystaan dhisidda xirfadaha dadka waxana ay siiyaan adeegyo daaweyn hoy dadka qaba xaalad caafimaadka maskaxeed ah. Adeegyadan waxa la heli karaa 24 ka saacadood maalintii, toddobada maalmood ee toddobaadkii. Medi-Cal ma bixiso kharashka qolka iyo cuntada ee joogista xarumahan.

***Adeegyada Daaweynta Hoy ee Musiibooyinka "Crisis Residential Treatment Services"***

- Adeegyadani waxa ay siiyaan daaweyn caafimaadka maskaxda ah iyo dhisid xirfadeed dadka qaba xaalad maskaxeed ama musiibo shucuureed oo daran. Tan loogu ma talagelin dadka u baahan daryeel caafimaadka maskaxeed ah in lagu siiyo isbitaal. Adeegyada waxa laga heli karaa xarumaha liisanka haysta 24 ka saacadood ee maalintii, toddobada maalmood ee toddobaadkii. Medi-Cal ma bixiso kharashka qolka iyo cuntada ee xarumahan.

***Adeegyada La Dardargeliyey ee Daaweynta Maalintii "Day Treatment Intensive Services"***

- Kani waa barnaamij qaabaysan oo daaweynta caafimaadka maskaxeed ah oo la siiyo koox dad ah oo ay dhici kari lahayd haddii aan la siin inay u baahan lahaayeen in la dhigo isbitaal ama xarun daryeel oo 24 ka saacadood ah oo kale. Barnaamijku waxa uu socdaa saddex saacadood maalintii. Waxa ku jira daaweyn, daaweyn-nafsiyeed iyo hawlo xirfad-dhisid.

***Dhaqan-celinta Maalintii "Day Rehabilitation"***

- Barnaamijkan waxa loogu talagalay in lagu caawiyo dadka qaba xaalad caafimaadka maskaxeed ah inay bartaan oo horumariyaan xirfaaha la qabsiga iyo nolosha si ay si wanaagsan ugu maareeyaan calaamadaha. Barnaamijkani waxa uu socdaa ugu yaaan saddex saacadood maalintii. Waxa ku jira daaweyn iyo hawlo xirfad-dhisid.

***Adeegyada Isbitaalka Bukaan-jiifka ee Caafimaadka Maskaxeed "Psychiatric Inpatient Hospital Services"***

- Kuwani waa adeegyo lagu bixiyo isbitaal caafimaadka maskaxeed ah oo liisan haysta. Xirfadle caafimaadka maskaxeed ah oo liisan haysta ayaa go'aamiya haddii qof uu u baahan yahay daaweyn maalinta oo dhan ah oo la dardargeliyey in loo siiyo xaaladdiisa caafimaadka maskaxeed ah. Haddii uu xirfadluhu go'aansado in xubintu u baahan tahay daaweyn maalinta oo dhan ah, xubintu waa inay joogtaa isbitaalka 24 ka saacadood ee maalintii.

***Adeegyada Xarunta Caafimaadka Maskaxeed "Psychiatric Health Facility Services"***

- Adeegyadan waxa lagu bixiyaa xarun caafimaadka maskaxeed ah oo liisan haysata oo takhasuskeedu yahay daaweynta dhaqan-celineed ee 24 ka saacadood ah ee xaaladaha caafimaadka maskaxeed ee halista ah. Xarumaha caafimaadka maskaxeed waa inay heshiis kula jiraan isbitaal ama xarun caafimaad oo u dhaw si ay u daboolaan baahiyaha daryeelka caafimaad ee jidheed ee dadka ku jira xarunta. Xarumaha caafimaadka maskaxeed waxa keliya la dhigi karaa laguna daaweyn karaa bukaanka aan qabin xanuun ama dhaawac jidheed kuwaas oo u baahan kara daaweyn ka baxsan waxa caadi ahaan loogu daaweyn kari lahaa qaab bukaan-socod.

***Adeegyada Habdhaqanka Daaweyneed "Therapeutic Behavioral Services"***

Adeegyada Habdhaqanka Daaweyneed waa wax ka qabashooyin daaweyn bukaan-socod oo muddo-gaaban oo la dardargeliyey oo loogu talagalay xubnaha ah illaa da'da 21. Adeegyadan si khaas ah ayaa loogu naqshadeeyey xubin kasta. Xubnaha hela adeegyadan waxa ay qabaan khalkhal shucuureed oo daran, waxa ay wajahayaan isbeddel culays-nafsiyeed leh ama musiibo nololeed, waxana ay u baahan yihiin adeegyo taageero oo dheeraad ah oo muddo-gaaban, oo cayiman.

Adeegyadani waa nooc kamid ah adeegga caafimaadka maskaxeed ee takhasuska ah ee laga heli karo degmada haddii aad qabto mashaakil shucuureed oo daran. Si aad u hesho Adeegyo Habdhaqan Daaweyneed, waa inaad hesho adeeg caafimaadka

maskaxeed ah, aad ka yar tahay da'da 21, isla markaana aad leedahay Medi-Cal dhamaystiran.

- Haddii aad ku nooshahay guriga, shakhsi ah shaqaale ka hawlgala Adeegyada Habdhaqanka Daaweyneed ayaa si fool ka fool ah kaala shaqayn kara yareynka mashaakilka habdhaqan ee daran si la isugu dayo in lagaa ilaaliyo inaad u baahato heer daryeel oo ka sarreeya kaas, sida guri kooxeed oo carruurta iyo dhallinyarta ka yar da'da 21 ee qaba mashaakilka shucuureed ee aadka u daran ah.
- Haddii aad ku nooshahay goob ka baxsan guriga, shaqaale ka hawlgala Adeegyada Habdhaqanka Daaweyneed ayaa kaala shaqayn kara sidii aad awood ugu yeelan lahayd inaad dib ugu noqoto guriga ama goob qoys, sida guri korin.

Adeegyada Habdhaqanka Daaweyneed waxa ay kaa caawin doonaan adiga, iyo qoyskaaga, daryeelahaaga, ama masuulkaaga inaad barataan qaabab cusub oo wax lagaga qaban karo habdhaqanka mushkiladda ah isla markaana lagu kordhin karo noocyada habdhaqan ee kuu saamixi kara inaad noqoto mid guulaysta. Adiga, shakhsiga ka hawlgala Adeegyada Shaqaalaha Habdhaqan, iyo qoyskaaga, daryeelahaaga, ama masuulkaaga ayaa si wadajir ah uga wada shaqayn doona wax ka qabashada habdhaqanada mushkiladda ah muddo gaaban illaa la gaadho wakhti aanad haddeed usii baahan adeegyada. Waxa aad yeelan doontaa qorshe Adeegyada Habdhaqan ee Daaweyneed ah oo sheegi doona waxa aad adiga, qoyskaaga, daryeelahaaga, ama masuulkaaga, iyo shakhsiga ka hawlgala Adeegyada Habdhaqanka Daaweyneed qaban doontaan inta aad helayso adeegyadan. Qorshaha Adeegyada Habdhaqanka Daaweyneed waxa sidoo kale ku jiri doona goorta iyo goobta adeegyada lagu bixin doono. Shaqaalaha ka hawlgaha Adeegyada Habdhaqanka Daaweyneed ayaa kugu la shaqayn doona goobaha ugu badan ee ay u badan tahay inaad caawimo ugu baahato. Tan waxa kamid ah gurigaaga, gurigaaga korinta, dugsigaaga, barnaamijka daaweynta maalintii, iyo aagagga kale ee bulshada.

***Isku Dubaridka Daryeelka ee La Dardargeliyey "Intensive Care Coordination"***

Kani waa barnaamij maareynta kiiska la bartilmaameedsaday ah kaas oo fudaydiya qiimeynta, qorshaynta daryeelka, iyo isku dubaridka adeegyada la siinayo ka faa'iidaystayaasha ka yar da'da 21. Adeeggan waxa loogu talagalay kuwa u qalma adeegyada Medi-Cal ee dhamayska tiran iyo kuwa loogu gudbiyey adeegga qaab ah

daruuro caafimaad. Adeeggan waxa lagu bixiyaa iyada oo la raacayo mabaadi'da Habka Nidaamka Aasaasiga ah ee Isku-dhafan "Integrated Core Practice Model". Waxa ku jira sameynta Kooxda Ilmaha iyo Qoyska ee gacan ka geysanaya xaqiijinta in cilaaqo wada xidhiidh oo caafimaad qabtaa ay ka dhaxayso ilmaha, qoyskiisa, iyo nidaamyada ilmaha u adeega ee ku lugta leh.

Kooxda Ilmaha iyo Qoyska waxa kamid ah taageero xirfadeed (tusaale ahaan: isku dubaride daryeel, adeeg-bixiyeyaal, iyo maareeyeyaal kiis oo ka socda hay'adaha u adeegga ilmaha), taageero dabiici ah (tusaale ahaan: xubno qoys, jaarka, saaxiibada, iyo culimada), iyo dadka kale ee ka wada shaqeeya sidii ay u sameyn lahaayeen isla markaana ay u fulin lahaayeen qorshaha bukaanka. Kooxdani waxa ay ku taageeraan isla markaana xaqiijiyaan inay carruurta iyo qoysasku gaadhaan yoolashooda.

Adeeggani sidoo kale waxa uu leeyahay isku dubaride kaas oo:

- Xaqiijiya in adeegyada daruuriga ah caafimaad ahaan la helo, la isku dubarido, isla markaana loo bixiyo qaab ku salaysan awoodaha, la khaasyeelay, diiradda-saara macmiilka, dhaqaan ahaan iyo luuqad ahaanna munaasab ah.
- Xaqiijiya in adeegyada iyo taageeradu ay ku salaysan yihiin baahiyaha ilmaha.
- Suuragaliya qaab ay cidwaliba si wadajir ah ugu wada shaqeeyaan ilmaha, qoyska, adeeg-bixiyeyaasha, iwm.
- Ka taageera waalidka/daryeelaha gacan ka geysashada daboolidda baahiyaha ilmaha.
- Gacan ka geysta samaynta Kooxda Ilmaha iyo Qoyska isla markaana bixiya taageero joogto ah.
- Xaqiijiya in ilmaha ay daryeelaan nidaamyada ilmaha u adeega ee kale marka loo baahdo.

***Adeegyada Guriyeed ee La Dardargeliyey "Intensive Home-Based Services"***

- Adeegyadan si khaas ah ayaa loogu naqshadeeyey xubin kasta. Waxa ku jira wax ka qabashooyin ku salaysan awoodaha oo lagu ladnaysiinayo xaaladaha caafimaadka maskaxeed ee caqabadda ku noqon kara habsami u shaqaynta ilmaha/dhallinyarta. Adeegyadani waxa ay bartilmaameedsadaan ka caawinta ilmaha/dhallinyarta dhismaha xirfadaha daruuriga u ah inay si habsami leh ugu

shaqeeyaan guriga iyo bulshada dhexdeeda iyo horumarinta awoodda qoyskiisu u leeyahay inay ka caawiyaan sameynta taas.

- Adeegyada Guriyeed ee La Dardargeliyey waxa Habka Nidaamka Aasaasiga ah ee La Isku-dhafay ku bixiya Kooxda Ilmaha iyo Qoyska. Waxa ay adeegsataa qorshaha daryeelka guud ee qoyska. Adeegyadan waxa la siiyaa xubnaha ka yar da'da 21 jirka kuwaas oo u qalma adeegyo Medi-Cal oo dhamaystiran. Gudbin ku salaysan daruuro caafimaad ayaa loo baahan yahay si loo helo adeegyadan.

***Daryeelka Korinta Daaweyneed "Therapeutic Foster Care"***

- Habka adeegga Daryeelka Korinta Daaweyneed waxa uu siiyaa adeegyo caafimaadka maskaxeed ee takhasuska ah oo muddo-gaaban, la dardargeliyey, oo ku salaysan uur-ku-taallo carruurta ah illaa da'da 21 kuwaas oo leh baahiyo shucuureed iyo habdhaqan oo kakan. Adeegyadan si khaas ah ayaa loogu naqshadeeyey xubin kasta. Daryeelka Korinta Daaweyneed, carruurta waxa lagu wareejiyaa waalidiin Daryeelka Korinta Daaweyneed ah oo tababaran, la kormeero, oo la taageero.

***Daaweynta Falgalka Waalidka-Ilmaha "Parent-Child Interaction Therapy" (PCIT)***

- PCIT waa barnaamij caawiya carruurta da'doodu tahay 2-7 kuwaas oo leh habdhaqano mushkilad ah isla markaana ku caawiya waalidiintooda ama daryeeleyaashooda inay bartaan qaabab cusub oo ay kula tacaali karaan iyaga. Habdhaqanadan waxa kamid noqon kara cadhoonta ama raacitaan la'aanta xeerarka.
- Iyaga oo u maraya PCIT, waalidka ama daryeeluhu waxa uu xidhanayaa sameecadda dhegaha "headset" isaga oo kula ciyaaraya ilmihiisa qol-ciyaareed gaar ah. Daaweeye ayaa kasoo daawada qol kale ama muuqaal isla markaana talo siiya waalidka ama daryeelaha isaga oo kala hadlaya sameecadda dhegaha. Daaweeyuhu waxa uu ka caawiyaa waalidka ama daryeelaha in uu barto sida loo dhiirrigeliyo habdhaqanka caafimaadka qaba isla markaana loo wanaajiyo xidhiidhka uu la leeyahay ilmihiisa.

***Daaweynta Qoyska ee Shaqayneed "Functional Family Therapy" (FFT)***

- FFT waa barnaamij gaaban oo diirad-saarid oo loogu talagalay qoysaska iyo dhallinyarta da'doodu tahay 11-18 kuwaas oo leh habdhaqano mushkilad ah ama ay ku adag tahay inay la tacaalaan shucuurtooda. Tan waxa kamid noqon kara jebinta xeerarka, dagaalanka, ama adeegsiga daroogada.
- FFT waxa ay la shaqaysaa qoyska dhallinyarta mararka qaarna xubno kale oo ka mid ah nidaamka taageerada dhallinyarta sida macallimiinta ama dhakhaatiirta si gacan looga geysto dhimista habdhaqanka aan caafimaadka qabin ee dhallinyarta.

***Daaweynta Nidaamyada-badan "Multisystemic Therapy" (MST)***

- MST waa barnaamij qoys oo loogu talagalay dhallinyarta ay da'doodu tahay 12-17 kaas oo muujiya mushkilad daran oo ka haysata habdhaqanka. MST badanaa waxa loo adeegsadaa dhallinyarta ay dhib ka haysatay sharciga ama ay suuragal ahayd in uu halis ugu jiray in uu sharci-jebin sameeyo, ama uu halis ugu jiray in looga kaxeeyo gurigiisa habdhaqankiisa awgii.
- MST waxa ku jira taageerooyin daaweyn oo qoys iyo bulsheed oo lagaga caawinayo dhallinyarta inay ka hawlgalaan habdhaqanada ay kamidka yihiin sharci-jebinta ama adeegsiga daroogada. MST sidoo kale waxa ay ka caawisaa waalidiinta barashada xirfado ka caawinaya kula tacaalidda habdhaqanadan guriga, iyaga oo la kaashanaya saaxiibadood, ama goobaha bulshada ee kale.
- Iyada oo loo marayo MST, waalidiinta iyo daryeeleyaashu waxa ay baran karaan sida loola tacaalo caqabadaha iyaga oo la kaashanaya carruurtooda ama dhawryo-toban-jirradooda. Waxa ay sidoo kale baran karaan sida qaab wanaagsan loogu la tacaalo mashaakilka guriga, iyaga oo la kaashanaya saaxiibadood, ama xaafadooda. Barnaamijku waxa uu ixtiraamaa dhaqanada kala duwan waxana uu diiradda saaraa ku caawinta qoysaska guryahooda iyo bulshooyinkooda dhexdooda. Waxa uu sidoo kale la shaqeeyaa dugsiyada, bilayska, iyo maxkamadaha.
- Inta jeer ee qoysasku la kulmaan barnaamijka waa ay isbeddeli kartaa. Qoysaska qaar waxa laga yaabaa inay keliya u baahdaan soo gelitaano kooban, halka kuwo kale laga yaabo inay qaataan kulammo qaadanaya laba saacadood maalin kasta ama toddobaad kasta. Caawimadani waxa ay caadi ahaan socotaa 3 illaa 5 bilood.

***Dib Ugu Noqoshada Bulshada ee Dadka Ku Lugta Leh Garsoorka "Justice-Involved Reentry"***

- Siiya adeegyo caafimaaad xubnaha ku lugta yeesha garsoorka muddo ah illaa 90 maalmood kahor kasii deyntooda xabsiga. Noocyada adeegyada la heli karo waxa kamid ah maareynta kiiska dib ugu noqoshada bulshada "reentry case management", adeegyada la talinta kiliinikada ee caafimaadka habdhaqan "behavioral health clinical consultation services", taageerooyin faceed "peer supports", la talin caafimaadka habdhaqan ah "behavioral health counseling", daaweyn "therapy", waxbarasho bukaan "patient education", adeegyo daawooyin "medication services", qorshayn kadib sii deynta iyo fasixidda ah "post-release and discharge planning", adeegyada shaybaadhka iyo raajada "laboratory and radiology services", macluumaadka daawooyinka "medication information", adeegyada taageerada "support services", iyo kaalmada iska diiwaangelinta adeeg-bixiye munaasab ah, tusaale ahaan Barnaamijka Daaweynta Xashiishadda "Narcotic Treatment Program" si loo sii wado Daaweynta Loo Kaashado Daawooyinka "Meication Assisted Treatment" marka lasii daayo. Si ay u helaan adeegyadan, shakhsiyaadku waa inay yihiin xubin Medi-Cal ama CHIP ah, iyo:
  - Haddii ay ka yar yihiin da'da 21 oo ku xidhan yihiin Xarun Asluubta Dhallinyarta ah.
  - Hadii ay yihiin dad waaweyn, oo xidhan yihiin isla markaana ay buuxiyaan mid kamid ah baahiyaha daryeelka caafimaad ee barnaamijka.
- La xidhiidh degmadaada adiga oo adeegsanaya lambarka taleefanka ee ku yaalla jaldiga buug-yarahan si aad macluumaad dheeraad ah uga hesho adeeggan.

***Adeegyada Taageerada Faceed ee Medi-Cal "Medi-Cal Peer Support Services" (waa ay ku kala duwan yihiin degmooyinku)***

- Adeegyda Taageerada Faceed ee Medi-Cal waxa ay dardargeliyaan soo kabashada, adkaysiga, ka qaybqaadashada, bulshaynta, isku-filnaanshaha, isku-doodista, horumarinta taageerooyinka dabiiciga ah, iyo aqoonsiga awoodaha iyada oo loo marayo hawlo qaabaysan. Adeegyadan waxa lagu siin karaa adiga

ama shakhsi(yaadka) taageerada laxaadka leh ee wakiilka kaa ah isla wakhtiga aad helayso adeegyada caafimaadka maskaxeed ama Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka "Drug Medi-Cal Organized Delivery System". Khabiirka Taageerada Faceed ee Adeegyada Taageerada Faceed ee Medi-Cal waa shakhsi lasoo noolaa xaalado caafimaadka habdhaqan ama adeegsiga maandooriyaha ah isla markaana ku jira soo kabasho, kaas oo buuxiyey shuruudaha barnaamijka shahaado-siinta ay Dawladdu-ansixiyey ee degmada, kaas oo shahaado ka haysta degmada, isla markaana bixiya adeegyadan isaga oo uu hagayo Xirfadle Caafimaadka habdhaqan ah kaas oo liisan ka haysta, rukhsad khaas ah ka haysta, ama ka diiwaangashan Dawladda.

- Adeegyada Taageerada Faceed ee Medi-Cal waxa kamid ah tababarid shakhsiyeed ama kooxeed, kooxo xirfado-dhisid waxbarasheed, dhex mushaaxid khayraad, adeegyo ka qaybqaadasho oo kugu dhiirrigelinaya inaad ka qaybqaadato daaweynta caafimaadka habdhaqan, iyo hawlo daaweyneed oo ay kamid yihiin dardargelinta isku-doodista.
- Xubnaha ka yar da'da 21 waxa laga yaabaa inay u qalmaan adeegga iyada oo loo marayo Baadhista, Ogaanshaha, Daaweynta Hore ee Joogtada ah "Early and Periodic Screening, Diagnostic, and Treatment" iyada oo aan loo eegayn degmada ay ku nool yihiin.
- Bixinta Adeegyada Taageerada Faceed ee Medi-Cal waa arrin ikhtiyaari u ah degmooyinka ka qaybqaateyaasha ah. Tixraac qaybta "Macluumaadka Dheeraadka ah ee Ku Saabsan Degmadaada" ee ku taalla gebagebada buug-yarahan si aad u ogaato in degmadaadu ay bixiso adeeggan.

***Adeegyada Musiibooyinka ee Guurguura "Mobile Crisis Services"***

- Adeegyada Musiibooyinka ee Guurguura ayaa aad heli kartaa haddii aad wajahdo musiibo caafimaadka maskaxeed ah.
- Adeegyada Musiibooyinka ee Guurguura waxa ay adeeg-bixiyeyaashu ku bixiyaan goobta aad ku wajahayso musiibada, oo ay kamid yihiin gurigaaga, shaqadaada, dugsigaaga, ama goobaha bulsheed ee kale, marka laga reebo isbitaal ama goob adeeg oo kale. Adeegyada Musiibooyinka ee Guurguura waxa la heli karaa 24 ka saacadood ee maalintii, 7 da maalmood ee toddobaadkii, iyo 365 ka maalmood ee sanakii.

- Adeegyada Musiibooyinka ee Guurguura waxa kamid ah gargaar-bixin degdeg ah, qiimeyn shakhsiyeed, iyo ku xasilinta bulshada dhexdeeda "community-based stabilization". Haddii aad u baahato daryeel dheeraad ah, adeeg-bixiyeyaasha musiibooyinka ee guurguuraa ayaa sidoo kale bixin kara wareejino ama gudbino toos-isugu-xidhis ah oo ay kuugu gudbinayaan adeegyada kale.

***Daaweynta Bulshada ee Firfircoon "Assertive Community Treatment" (ACT) (waa ay ku kala duwan yihiin degmooyinku)***

- ACT waa adeeg caawiya dadka leh baahiyo caafimaad maskaxeed oo daran. Dadka u baahan ACT waxa ay caadi ahaan ku sugnaayeen isbitaalka, booqdeen qolka xaaladda degdegga ah, ku sugnaayeen xarumaha daaweynta oo/ama soo sameeyeen sharci-jebin. Waxa laga yaabaa sidoo kale inay hore usoo ahaayeen hoy-la'aan ama aanay awoodin inay caawimo ka helaan xarumaha caafimaadka ee caadiga ah.
- ACT waxa ay ku jaangoysaa adeegyada shakhsi walba iyo baahiyihiisa gaarka ah. Yoolku waa in lagu caawiyo dadka inay ladnaadaan isla markaana ay bartaan sidii ay ugu noolaan lahaayeen bulshadooda dhexdooda. Koox ka kooban khubaro kala duwan ayaa ka wada shaqeeya bixinta dhammaan noocyada taageerada iyo daaweynta. Kooxdani waxa ay dadka ka caawiyaan caafimaadkooda maskaxeed, waxa ay baraan xirfadaha nolosha ee muhiimka ah, waxa ay isku duba ridaan daryeelkooda, waxana ay taageerada ku bixiyaan bulshada dhexdeeda. Bartilmaameedka guud waa in shakhsi walba laga caawiyo kasoo kabashada xaaladdiisii caafimaadka habdhaqan iyo ku noolaanta nolol wanaagsan bulshadiisa dhexdeeda.
- Bixinta ACT waa arrin ikhtiyaari u ah degmooyinka ka qaybqaateyaasha ah. Tixraac qaybta "Macluumaadka Dheeraadka ah ee Ku Saabsan Degmadaada" ee ku taalla gebagebada buug-yarahan si aad u ogaato in degmadaadu ay bixiso adeeggan.

***Daaweynta Bulshada ee Firfircooon ee Caafimaadka-sharciyeed "Forensic Assertive Community Treatment" (FACT) (waa ay ku kala duwan yihiin degmooyinku)***

- FACT waa adeeg caawiya dadka qaba baahiyo caafimaadka maskaxeed ah

kuwaas oo sidoo kale hore u soo sameeyey sharci-jebin. Waxa uu u shaqeeya isla sida barnaamijka ACT oo kale, balse waxa uu leeyahay dhawr adeeg oo dheeraad ah oo caawiya daka halista sare ku jira ama hore ugu soo lug yeeshay nidaamka garsoorka faldembiyeedka.

- Kooxda FACT waxa ay ka kooban tahay khubaro tababar gaar ah loo siiyey fahanka baahiyaha dadka hore u soo sameeyey sharci-jebinta. Waxa ay bixiyaan noocyo taageero oo lamid ah kuwa ACT, sida caawimo ka geysashada caafimaadka habdhaqan, baritaanka xirfadaha nololeed, isku dubaridka daryeelka, iyo bixinta taageero bulsheed.
- Yoolku waxa weeyi in laga caawiyo qof walba in uu ladnaado, mashaakilka ka dheeraado, isla markaana ku noolaado nolol caafimaad qabta bulshadiisa dhexdeeda.
- Bixinta FACT waa arrin ikhtiyaari u ah degmooyinka ka qaybqaateyaasha ah. Tixraac qaybta "Macluumaadka Dheeraadka ah ee Ku Saabsan Degmadaada" ee ku taalla gebagebada buug-yarahan si aad u ogaato in degmadaadu ay bixiso adeeggan.

***Daryeelka Takhasuska ah ee La Isku Dubariday "Coordinated Specialty Care" (CSC) ee Kacdoonka Waallida ee Ugu Horaysa "First Episode Psychosis" (FEP) (waa ay ku kala duwan yihiin degmooyinku)***

- CSC waa adeeg caawiya dadka wajahaya waallida markii ugu horaysay. Waxa jira calaamado badan oo tilmaamaya waallida, oo ay kamid yihiin aragtida ama maqalka waxyaabo aanay dadka kale arki karin ama maqli karin. CSC waxa ay bixisaa taageero degdeg ah oo isku-dhafan inta lagu gudo jiro marxaladaha koowaad ee waallida, taas oo gacan ka geysata ka hortagga gelitaanka isbitaalka, booqashooyinka qolka xaaladda degdegga ah, wakhti lagu qaato xarumaha daaweynta, sharci-jebin, adeegsiga maandooriyaha, iyo hoy-la'aanta.
- CSC waxa ay diiradda saartaa qof kasta iyo baahiyihiisa gaarka ah. Koox ka kooban khubaro kala duwan ayaa ka wada shaqeeya bixinta dhammaan noocyada caawimada. Waxa ay kaalmo ka geystaan daaweynta caafimaadka maskaxeed, waxa ay dhigaan xirfadaha nololeed ee muhiimka ah, waxa ay isku dubaridaan daryeelka, waxana ay taageero ku bixiyaan bulshada dhexdeeda. Yoolku waa inay ka caawiyaan dadka inay ladnaadaan, maareeyaan

calaamadahooda, oo si wanaagsan ugu noolaadaan bulshadooda dhexdeeda.

- Bixinta CSC ee FEP gu waa arrin ikhtiyaari u ah degmooyinka ka qaybqaateyaasha ah. Tixraac qaybta "Macluumaadka Dheeraadka ah ee Ku Saabsan Degmadaada" ee ku taalla gebagebada buug-yarahan si aad u ogaato in degmadaadu ay bixiso adeeggan.

***Adeegyada Naadiga "Clubhouse Services" (waa ay ku kala duwan yihiin degmooyinku)***

- Naadiyadu waa goobo gaar ah oo ku caawiya dadka inay kasoo kabtaan xaaladaha caafimaadka habdhaqan. Waxa ay diiradda saaraan awoodaha dadka waxana ay abuuraan bulsho taageero leh.
- Marka la joogo Naadiga, dadku waxa ay raadin karaan shaqooyin, sameysan karaan saaxiibo, baran karaan waxyaabo cusub, yeelanna karaan xirfado ay ku horumariyaan caafimaadkooda iyo badqabkooda. Dadku sidoo kale waxa ay ka barbar shaqeyn karaan shaqaalaha Naadiga si ay gacan uga geystaan baahiyaha Naadiga ee la wadaago, sida u sameynta qadada xubnaha Naadiga ee kale. Yoolku waa in laga caawiyo qofwalba inay xubno ka noqdaan bulsho, lagu dhiirrigeliyo dadka kale inay xaqiijiyaan yoolashooda, isla markaana horumariyaan tayada guud ee noloshooda.
- Bixinta Adeegyada Naadiga waa arrin ikhtiyaari u ah degmooyinka ka qaybqaateyaasha ah. Tixraac qaybta "Macluumaadka Dheeraadka ah ee Ku Saabsan Degmadaada" ee ku taalla gebagebada buug-yarahan si aad u ogaato in degmadaadu ay bixiso adeeggan.

***Adeegyada Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada ee La Xoojiyey "Enhanced Community Health Worker" (CHW) (waa ay ku kala duwan yihiin degmooyinku)***

- CHW yadu waa shaqaale caafimaad oo tababar gaar ah qaba isla markaana xubno lagu kalsoon yahay ka ah bulshooyinkooda.
- Yoolka Adeegyada CHW ee La Xoojiyey waa in gacan lagaga geysto joojinta cudurrada, naafanimada, iyo mashaakilka caafimaad ee kale kahor inta aanay ka darin. Adeegyada CHW ee La Xoojiyey waxa kamid ah dhammaan isla qaybaha iyo xeerarka ay leeyihiin adeegyada ka hortagga ee CHW ee caadiga ah, balse waxa loo khaasyeelay dadka u baahan taageero caafimaadka habdhaqan ah oo

dheeraad ah. Yoolku waa in taageero dheeraad ah la bixiyo si loo ilaaliyo caafimaadka iyo badqabka xubnahan.

- Qaar adeegyadan ah waxa kamid ah waxbarasho iyo tababar caafimaad, oo ay kamid yihiin xakameynta iyo kahortagga cudurrada dabadheeraada ama gudba; xaaladaha caafimaadka habdhaqan, kuwa dhalmada-kahor, iyo kuwa afka; iyo kahortagga dhaawaca; dardargelin iyo tababar caafimaad, oo ay kamid yihiin dejinta yoolasha iyo abuuritaanka qorshe hawleedka lagaga hadlayo kahortagga iyo maareynta cudurrada.
- Bixinta Adeegyada CHW ee La Xoojiyey waa arrin ikhtiyaari u ah degmooyinka ka qaybqaateyaasha ah. Tixraac qaybta "Macluumaadka Dheeraadka ah ee Ku Saabsan Degmadaada" ee ku taalla gebagebada buug-yarahan si aad u ogaato in degmadaadu ay bixiso adeeggan.

***Shaqaaleynta La Taageero "Supported Employment" (waa ay ku kala duwan yihiin degmooyinku)***

- Habka Meelaynta iyo Taageerada Shakhsiga (IPS) ee Shaqaaleynta La Taageero waa adeeg ka caawiya dadka qaba baahiyo caafimaad habdhaqan oo daran inay helaan oo haystaan shaqooyin wanaagsan oo bulshadooda dhexdeeda ah.
- Iyaga oo ka qayb qaadanaya Shaqaalaynta La Taageero ee IPS, dadku waxa ay heli karaan natiijooyin shaqo oo wanaagsan waxana ay taageeri karaan kasoo kabashadooda xaaladdooda caafimaadka habdhaqan.
- Barnaamijkani sidoo kale waxa uu gacan ka geystaa horumarinta madax-banaanida, dareenka kamid ahaanshaha, iyo caafimaadka iyo badqabka guud.
- Bixinta Shaqaaleynta La Taageero waa arrin ikhtiyaari u ah degmooyinka ka qaybqaateyaasha ah. Tixraac qaybta "Macluumaadka Dheeraadka ah ee Ku Saabsan Degmadaada" ee ku taalla gebagebada buug-yarahan si aad u ogaato in degmadaadu ay bixiso adeeggan.

***Adeegyada Ugu-Tegista-Gudaha "In-Reach Services" (waa ay ku kala duwan yihiin degmooyinku)***

- Adeegyada Ugu-Tegista-Gudaha ee U Wareegitaanka Bulshada "Community Transition In-Reach Services" waxa ay caawiyaan dadka ku jira isbitaal ama

xarun caafimaadka maskaxeed ah wakhti dheer ama halista ugu jira inay halkaas ku jiraan wakhti dheer. Barnaamijku waxa uu kaala shaqeeyaa adiga, qoyskaaga, isbitaalka ama xarunta, iyo dadka taageerada ee kale sidii uu kaaga caawin lahaa inaad dib ugu noqoto bulshada. Yoolku waa in uu kaa caawiyo ka hortagga joogitaanka dheer ee isbitaal ama xarun daryeel oo kale oo caafimaadka maskaxeed ah.

## Adeegyada Cilladda Adeegsiga Maandooriyaha "Substance Use Disorder Services"

### *Waa Maxay Adeegyada Degmada ee Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka?*

Adeegyada degmada ee Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka waxa loogu talagalay dadka leh xaalad adeegsiga maandooriyaha ah, taas oo ka dhigan inay si xad dhaaf ah u adeegsanayaan khamriga ama daroogooyinka kale, ama dadka laga yaabo inay halis ugu jiraan yeelasha xaalad adeegsiga maandooriyaha ah taas oo dhakhtar ama xirfadle caafimaad carruureed laga yaabo in uu awoodi waayo in uu daaweeyo. Adeegyadan waxa sidoo kale kamid ah shaqada uu adeeg-bixiyuhu qabto si uu gacan uga geysto u wanaajinta adeegyada shakhsiga helaya daryeelka. Waxyaabahan waxa kamid ah qiimeynada lagu eegayo inaad u baahan tahay adeegga iyo in adeeggu shaqaynayo iyo inkale.

Adeegyada Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka waxa lagu bixin karaa xarun caafimaad ama xafiiska adeeg-bixiye, ama gurigaaga ama goob bulsho oo kale, taleefanka, ama adeegga caafimaad ee onlaynka ah "telehealth" (kaas oo ay kamid yihiin falgallo ah keliya-maqal iyo kuwo muuqaal ah labadaba). Degmada iyo adeeg-bixiyaha ayaa kaala shaqayn doona go'aaminta inta jeer ee aad qaadan doonto adeegyadaada/ballamahaaga.

### *Ururka Daaweynta Balwadda ee Maraykanka "American Society of Addiction Medicine" (ASAM)*

Degmada ama adeeg-bixiyuhu waxa uu agabka Ururka Daaweynta Balwadda ee Maraykanka u adeegsan doonaa in uu ku ogaado heerka daryeelka ee munaasabka ah. Noocyadan adeegyada waxa lagu sharxaa inay yihiin "heerarka daryeelka" waxana lagu qeexayaa hoos.

***Baadhista, Qiimeynta, Wax Ka Qabashada Kooban, iyo U Gudbinta Daaweynta (Heerka 0.5 ee Ururka Daaweynta Balwadda ee Maraykanka)***

Baadhista, Qiimeynta, Wax Ka Qabashooyinka Kooban, iyo U Gudbinta Daaweynta (SABIRT) ee Khamriga iyo Daroogada ma aha faa'iido ah Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka. Waa faa'iido ku jirta Medi-Cal Free-For-Service iyo nidaamka bixinta daryeelka la maareeyey ee Medi-Cal oo loogu talagalay xubnaha ay da'doodu tahay 11 sano iyo wixii ka weyn. Qorsheyaasha daryeelka la maareeyey waa inay siiyaan adeegyada cilladda adeegsiga maandooriyaha ee kharashkooda la bixiyo, oo uu kamid yahay adeeggan xubnaha ay da'doodu tahay 11 sano iyo wixii ka weyn.

***Adeegyada Wax Ka Qabashada Hore "Early Intervention Services"***

Adeegyada wax ka qabashada hore waa adeeg Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka ah oo kharashkooda la bixiyo oo loogu talagalay xubnaha ka yar da'da 21. Xubin kasta oo ka yar da'da 21 kaas oo la baadhay lana go'aamiyey in uu halis ugu jiro yeelashada cilladda adeegsiga maandooriyaha waxa uu heli karaa adeeg kasta oo ku jira kharashkiisana loo bixiyo heerka adeegga ee bukaan-socod iyada oo loo tixgelinayo adeegyada wax ka qabashada hore. Ogaanshaha cilladda adeegsiga maandooriyuhu ma aha qasab si adeegyada wax ka qabashada hore ay u helaan xubnaha ka yar da'da 21.

***Baadhista, Ogaanshaha, iyo Daaweynta Hore ee Joogtada ah "Early Periodic Screening, Diagnosis, and Treatment"***

Xubnaha ka yar da'da 21 ayaa heli kare adeegyada lagu sharxay halka hore ee buug-yarahan iyo sidoo kale adeegyo Medi-Cal oo dheeraad ah iyada oo loo marayo faa'iido loo yaqaano Baadhista, Ogaanshaha, iyo Daaweynta Hore ee Joogtada ah "Early and Periodic Screening, Diagnostic, and Treatment".

Si ay awood ugu yeelato helitaanka adeegyada Baadhista, Ogaanshaha, iyo Daaweynta Hore ee Joogtada ah "Early and Periodic Screening, Diagnostic, and Treatment", xubintu waa inay noqotaa mid ka yar da'da 21 isla markaana ay leedahay Medi-Cal dhamaystiran. Faa'iidadani waxa ay dabooshaa kharashka adeegyada daruuriga ah caafimaad ahaan si loo saxo ama gacan looga geysto xaaladaha caafimaad ee jidheed iyo kuwa habdhaqan. Adeegyada joogteeya, taageera,

horumariya, ama xaalad ka dhiga mid sidii hore si ka wanaagsan loo xammili karo waxa loo tixgeliyaa inay caawimo ka geystaan xaaladda isla markaana waxa kharashkooda lagu bixiyaa iyaga oo loo tixgelinayo Baadhista, Ogaanshaha, iyo Daaweynta Hore ee Joogtada ah "Early and Periodic Screening, Diagnostic, and Treatment services". Shuruudda helitaanka ee xubnaha ka yar 21 waa ay ka duwan yihiin kana dabacsan yihiin shuruudda helitaanka ee dadka waaweyn ee helaya adeegyada Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka, si loo buuxiyo shuruudda Baadhista, Ogaanshaha, iyo Daaweynta Hore ee Joogtada ah "Early and Periodic Screening, Diagnostic, and Treatment" iyo doonista ka hortagga iyo wax ka qabashada hore ee xaaladaha cilladda adeegsiga maandooriyaha.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan adeegyadan, fadlan wac degmadaada ama booqo bogga websaytka Baadhista, Ogaanshaha, iyo Daaweynta Hore ee Joogtada ah "Early and Periodic Screening, Diagnostic, and Treatment" ee DHCS.

***Adeegyada Daaweynta Bukaan-socodka (Heerka 1 ee Ururka Daaweynta Balwadda ee Maraykanka)***

- Adeegyo la talin ayaa la siiyaa xubnaha illaa sagaal saacadood toddobaadkii wixii dad waaweyn ah waxana la siiyaa wax ka yar lix saacadood wixii ah xubnaha ka yar da'da 21 marka ay daruuri tahay caafimaad ahaan. Waxa laga yaabaa inaad hesho saacado dheeraad ah iyada oo lagu salaynayo baahiyahaaga. Adeegyada qof liisan haysta, sida la taliye, ayaa u bixin kara qaab fool ka fool ah, taleefan ah, ama adeegga caafimaadka ee onlaynka ah "telehealth".
- Adeegyada Bukaan-socodka waxa kamid ah qiimeynta, isku dubaridka daryeelka, la talinta (shakhsiyeed iyo kooxeed), daaweynta qoys, adeegyada daawooyinka, Daawooyinka Daaweynta Balwadda ee cilladda adeegsiga opioid ka, Daawooyinka Daaweynta Balwadda ee Cilladda adeegsiga khamriga iyo cilladaha adeegsiga maandooriyaha aan opioid ka ahayn, waxbarashada bukaanka, adeegyada soo kabashada, iyo adeegyada wax ka qabashada musiibooyinka cilladda adeegsiga maandooriyaha.

***Adeegyada Bukaan-socodka ee La Dardargeliyey (Heerka 2.1 ee Ururka Daaweynta Balwadda ee Maraykanka)***

- Adeegyada Bukaan-socodka La Dardargeliyey waxa la siiyaa xubnaha ugu yaraan sagaal saacadood ugu badnaanna 19 saacadood toddobaadkii dadka waayeyn, sidoo kale ugu yaraan lix saacadood ugu badnaanna 19 saacadood toddobaadkii xubnaha ka yar da'da 21 marka ay daruuri tahay caafimaad ahaan. Adeegyadu waa ay dhaafi karaan saacadaha ugu badan iyada oo lagu salaynayo daruurada caafimaad ee shakhsiga. Adeegyadu badanaa waa la talin iyo waxbarasho ku saabsan arrimaha la xidhiidha balwadda. Adeegyada xirfadle liisan haysta ama la taliye shahaado haysta ayaa ku bixin kara goob nidaaamsan. Adeegyada Daaweynta Bukaan-socodka ee La Dardargeliyey waxa lagu bixin karaa fool ka fool, adeegga caafimaadka ee onlaynka ah "telehealth", ama taleefanka.
- Adeegyada Bukaan-socodka La Dardargeliyey waxa kamid ah isla adeegyada ku jira Adeegyada Bukaan-socodka. Saacado adeeg oo dheeraad ah ayaa ah kala duwanaanshaha ugu weyn.

***Isbitaal-dhigis Qaybeed "Partial Hospitalization" (waa ay ku kala duwan yihiin degmooyinku) (Heerka 2.5 ee Ururka Maraykanka ee Daaweynta Balwadda)***

- Xubnaha ka yar da'da 21 waxa ay ku heli karaan adeeggan Baadhista, Ogaanshaha, iyo Daaweynta Hore ee Joogtada ah "Early and Periodic Screening, Diagnostic, and Treatment" iyada oo aan loo eegayn degmada ay ku nool yihiin.
- Adeegyada Isbitaal-dhigista Qaybeed waxa kamid ah 20 saacadood ama wax ka badan toddobaadkii, hadba sida ay daruuri u tahay caafimaad ahaan. Barnaamijyada isbitaal-dhigista qaybeed waxa ay galaangal toos ah u leeyihiin adeegyaa caafimaadka maskaxeed, caafimaadka guud, iyo shaybaadhka waxana ay daboolaan baahiyaha la aqoonsaday ee u baahan la socod ama maareyn maalinle ah balse si munaasab ah wax looga qaban karo xarun caafimaad. Adeegyada waxa lagu bixin karaa fool ka fool, adeegga caafimaadka ee onlaynka ah "telehealth", ama taleefan.
- Adeegyada Isbitaal-dhigista Qaybeed waxa ay la mid yihiin Adeegyada Bukaan-socodka ee La Dardargeliyey, iyada oo korodhka tirada saacadaha iyo

galaangalka dheeraadka ah ee adeegyada caafimaad ay yihiin kala duwanaanshaha ugu weyn.

***Daaweynta Hoy "Residential Treatment" (ku xidhan ogolaanshaha degmada) (Heerarka 3.1 - 4.0 ee Ururka Daaweynta Balwadda ee Maraykanka)***

- Daaweynta Hoy waa barnaamij siiya adeegyo dhaqancelin xubnaha la ogaaday inay qabaan cilladda adeegsiga maandooriyaha, marka la go'aamiyo inay daruuri yihiin caafimaad ahaan. Xubintu waa inay ku noolaataa guriga isla markaana laga taageeraa dedaallada ay ugu jirto isbedelka, joogtaynta, dabaqaadda xirfadaha bulsho-dhexgalka iyo madax-banaanida iyada oo galaangal u helaysa nidaamyada taageerada bulshada. Adeegyada badankooda waxa lagu bixiyaa fool ka fool; si walba ha noqotee, adeegga caafimaadka ee onlaynka ah "telehealth" iyo taleefan ayaa sidoo kale loo adeegsan karaa in lagu bixiyo adeegyada inta qofku uu ku jiro daaweynta hoy. Adeeg-bixiyeyaasha iyo dadka deggan hoyga ayaa ka wada shaqeeya qeexitaanka caqabadaha, dejinta mudnaanaha, xaqiijinta yoolasha, iyo xallinta mashaakilka la xidhiidha cilladda adeegsiga maandooriyaha. Yoolasha waxa kamid ah joojinta adeegsiga maandooriyaha, u diyaargarawga kiciyeyaasha dib-ugu-noqoshada balwadda, horumarinta caafimaadka shakhsiyeed iyo xirfadaha bulsheed, iyo ka qaybqaadashada daryeel muddo-dheer.
- Adeegyada hoy waxa ay u baahan yihiin ogolaansho hore oo laga helo degmada Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka.
- Adeegyada Hoy waxa kamid ah qaadashada iyo qiimeynta, isku dubaridka daryeelka, la talinta shakhsiyeed, la talinta kooxeed, daaweynta qoys, adeegyada daawooyinka, Daawooyinka Daaweynta Balwadda ee cilladda adeegsiga opioid ka, Daawooyinka Daaweynta Balwadda ee Cilladda adeegsiga khamriga iyo cilladaha adeegsiga maandooriyaha aan opioid ka ahayn, waxbarashada bukaanka, adeegyada soo kabashada, iyo adeegyada wax ka qabashada musiibooyinka cilladda adeegsiga maandooriyaha.
- Bixiyeyaasha Adeegyada Hoy waxa looga baahan yahay inay daawooyinka daaweynta balwadda ay si toos ah ugu bixiyaan goobta ama inay xubnaha ka caawiyaan inay ku helaan daawooyinka daaweynta balwadda meel ka baxsan goobta. Bixiyeyaasha Adeegyada Hoy kuma buuxiyaan shardigan keliya inay

bixiyaan macluumaadka xidhiidhka ee bixiyeyaasha Daawooyinka Daaweynta Balwadda. Bixiyeyaasha Adeegyada Hoy waxa looga baahan yahay inay siiyaan oo u qoraan daawooyinka xubnaha kharashkooda lagu bixiyo Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka.

***Adeegyada Daaweynta Bukaan-jiifka "Inpatient Treatment Services" (ku xidhan ogolaanshaha degmada) (waa ay ku kala duwan yihiin degmooyinku) (Heerarka 3.1 - 4.0 ee Ururka Daaweynta Balwadda ee Maraykanka)***

- Ka faa'iidaystayaasha ka yar da'da 21 ayaa u qalmi kara adeegga iyaga oo hoos imanaya Baadhista, Ogaanshaha, iyo Daaweynta Hore ee Joogtada ah "Early and Periodic Screening, Diagnostic, and Treatment" iyada oo aan la eegayn degmada ay deggan yihiin.
- Adeegyada bukaan-jiifka waxa lagu bixiyaa goob 24 ka saacadood ah oo ku bixisa qiimeyn, u kuurgal, la socod caafimaad, iyo daaweyn balwadeed oo ay xirfadleyaal hagaan goob bukaan-jiif. Adeegyada badankooda waxa lagu bixiyaa fool ka fool; si walba ha noqotee, adeegga caafimaadka ee onlaynka ah "telehealth" iyo taleefan ayaa sidoo kale loo adeegsan karaa in lagu bixiyo adeegyada inta qofku uu ku jiro daaweynta bukaan-jiif.
- Adeegyada bukaan-jiifku waa kuwo si sare u nidaamsan, dhakhtar ayaana ay u badan tahay in laga heli karo goobta 24 ka saacadood maalintii, iyo sidoo kale Kalkaalisooyin Caafimaad oo Diiwaangashan, la taliyeyaal balwadeed, iyo shaqaale caafimaad oo kale. Adeegyada Bukaan-jiifka waxa kamid ah qiimeynta, isku dubaridka daryeelka, la talinta, daaweynta qoys, adeegyada daawooyinka, Daawooyinka Daaweynta Balwadda ee cilladda adeegsiga opioid ka, Daawooyinka Daaweynta Balwadda ee Cilladda adeegsiga khamriga iyo cilladaha adeegsiga maandooriyaha aan opioid ka ahayn, waxbarashada bukaanka, adeegyada soo kabashada, iyo adeegyada wax ka qabashada musiibooyinka cilladda adeegsiga maandooriyaha.

***Barnaamijka Daaaweynta Xashiishadda "Narcotic Treatment Program"***

- Barnaamijyada Daaweyna Xashiishaddu waa barnaamijyo ka baxsan isbitaal oo bixiya daawooyin lagu daaweeyo cilladaha adeegsiga maandooriyaha, marka uu dhakhtar uu qoro oo ay noqdaan daruuri caafimaad ahaan. Barnaamijyada

Daaweynta Xashiishadda waxa looga baahan yahay inay daawooyin siiyaan xubnaha, oo ay kamjid yihiin methadone, buprenorphine, naloxone, iyo disulfiram.

- Xubinta waa in la siiyo, ugu yaraan, 50 daqiiqo oo kulanno la talin ah bishiiba. Adeegyadan la talinta waxa lagu bixin karaa fool ka fool, adeegga caafimaadka ee onlaynka ah "telehealth", ama taleefanka. Adeegyada Daaweynta Xashiishadda waxa kamid ah qiimeynta, isku dubaridka daryeelka, la talinta, daaweynta qoys, adeegyada daawooyinka, maareynta daryeelka, Daawooyinka Daaweynta Balwadda ee cilladda adeegsiga opioid ka, Daawooyinka Daaweynta Balwadda ee Cilladda adeegsiga khamriga iyo cilladaha adeegsiga maandooriyaha aan opioid ka ahayn, waxbarashada bukaanka, adeegyada soo kabashada, iyo adeegyada wax ka qabashada musiibooyinka cilladda adeegsiga maandooriyaha.

***Maareynta Xaraaradda Joojinta Balwadda "Withdrawal Management"***

- Adeegyada maaraynta xaraaradda joojinta balwaddu waa kuwo degdeg ah isla markaana loo bixiyo qaab muddo-gaaban. Adeegyadan waxa la bixin karaa kahor inta aan qiimeyn buuxda la sameyn. Adeegyada maaraynta xaraaradda joojinta balwadda waxa lagu bixin karaa goob bukaan-socod, hoy, ama bukaan-jiif.
- Iyada oo aan loo eegayn nooca goobta, xubinta waa in la kormeeraa inta lagu gudo jiro hannaanka maareynta xaraaradda joojinta balwadda. Xubnaha ku qaadanaya maareynta xaraaradda joojinta balwadda goob hoy ama bukaan-jiif waa in ay ku noolaadaan goobtaas. Adeegyada dhaqan-barid "habilitative" iyo dhaqan-celin "rehabilitative" ee daruuriga ah caafimaad ahaan waxa qora dhakhtar liisan haysta ama daawo-qore "prescriber" liisan haysta.
- Adeegyada maareynta xaraaradda joojinta balwadda waxa kamid ah qiimeynta, isku dubaridka daryeelka, adeegyada daawooyinka, Daawooyinka Daaweynta Balwadda ee cilladda adeegsiga opioid ka, Daawooyinka Daaweynta Balwadda ee Cilladda adeegsiga khamriga iyo cilladaha adeegsiga maandooriyaha aan opioid ka ahayn, u kuurgal, iyo adeegyada soo kabashada.

***Daawooyinka Daaweynta Balwadda***

- Adeegyada Daawooyinka Daaweynta Balwadda waxa laga heli karaa goobaha ah kuwa caafimaad iyo goobo kuwa caafimaad aan ahayn. Daawooyinka

Daaweynta Balwadda waxa kamid ah dhammaan daawooyinka iyo wax soo saarrada bayoolajiyeed ee FDA-ansixisay ee lagu daaweeyo cilladda adeegsiga khamriga, cilladda adeegsiga opioid ka, iyo cilladda adeegsiga wixii maandooriye ah. Xubnuhu waxa ay xaq u leeyihiin in Daawooyinka Daaweynta Balwadda lagu siiyo goobta ama gudbin ka baxsan xarunta. Liis ah daawooyinka la ansixiyey waxa kamid ah:

  - Acamprosate Calcium
  - Buprenorphine Hydrochloride
  - Daawada Irbadda-lagu-qaato ee Siideynta-Dheer ee Buprenorphine "Buprenorphine Extended-Release Injectable" (Sublocade)
  - Buprenorphine/Naloxone Hydrochloride
  - Naloxone Hydrochloride
  - Naltrexone (afka)
  - Heehaabka Irbadda-lagu-qaato ee Naltrexone Microsphere "Naltrexone Microsphere Injectable Suspension" (Vivitrol)
  - Lofexidine Hydrochloride (Lucemyra)
  - Disulfiram (Antabuse)
  - Methadone (lagu bixiyo keliya Barnaamijyada Daaweynta Xashiishadda)

- Daawooyinka Daaweynta Balwadda waxa lala bixin karaa adeegyada soo socda: qiimeynta, isku dubaridka daryeelka, la talinta shakhsiyeed, la talinta kooxeed, daaweynta qoys, adeegyada daawooyinka, waxbarashada bukaanka, adeegyada soo kabashada, adeegyada wax ka qabashada musiibooyinka cilladda adeegsiga maandooriyaha, iyo adeegyada maareynta xaraaradda joojinta balwadda. Daawooyinka Daaweynta Balwadda waxa la bixin karaa iyaga oo qayb ka ah dhammaan adeegyada Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka, oo ay kamid yihiin Adeegyada Daawooyinka Bukaan-socodka, Adeegyada Bukaan-socodka La Dardargeliyey, iyo Daaweynta Hoy, tusaale ahaan.
- Xubnuhu waxa ay galaangal u heli karaan Daawooyinka Daaweynta Balwadda ee ka baxsan degmada Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka sidoo kale. Tusaale ahaan, Daawooyinka Daaweynta Balwadda, sida buprenorphine, waxa qori kara qaar kamid ah dawo-qoreyaasha ka hawlgala goobaha daryeelka aasaasiga ah ee la shaqeeya daryeelkaaga la maareeyey waxana lagu qaybin karaa ama lagu bixin karaa farmasi.

***Dib Ugu Noqoshada Bulshada ee Dadka Ku Lugta Leh Garsoorka "Justice-Involved Reentry"***

- Siiya adeegyo caafimaaad xubnaha ku lugta yeesha garsoorka muddo ah illaa 90 maalmood kahor kasii deyntooda xabsiga. Noocyada adeegyada la heli karo waxa kamid ah maareynta kiiska dib ugu noqoshada bulshada "reentry case management", adeegyada la talinta kiliinikada ee caafimaadka habdhaqan "behavioral health clinical consultation services", taageerooyin faceed "peer supports", la talin caafimaadka habdhaqan ah "behavioral health counseling", daaweyn "therapy", waxbarasho bukaan "patient education", adeegyo daawooyin "medication services", qorshayn kadib sii deynta iyo fasixidda ah "post-release and discharge planning", adeegyada shaybaadhka iyo raajada "laboratory and radiology services", macluumaadka daawooyinka "medication information", adeegyada taageerada "support services", iyo kaalmada iska diiwaangelinta adeeg-bixiye munaasab ah, tusaale ahaan Barnaamijka Daaweynta Xashiishadda "Narcotic Treatment Program" si loo sii wado Daaweynta Loo Kaashado Daawooyinka "Meication Assisted Treatment" marka lasii daayo. Si ay u helaan adeegyadan, shakhsiyaadku waa inay yihiin xubin Medi-Cal ama CHIP ah, iyo:
    - Haddii ay ka yar yihiin da'da 21 oo ku xidhan yihiin Xarun Asluubta Dhallinyarta ah.
    - Hadii ay yihiin dad waaweyn, oo xidhan yihiin isla markaana ay buuxiyaan mid kamid ah baahiyaha daryeelka caafimaad ee barnaamijka.
- La xidhiidh degmadaada adiga oo adeegsanaya lambarka taleefanka ee ku yaalla jaldiga buug-yarahan si aad macluumaad dheeraad ah uga hesho adeeggan.

***Adeegyada Taageerada Faceed ee Medi-Cal "Medi-Cal Peer Support Services" (waa ay ku kala duwan yihiin degmooyinku)***

- Adeegyda Taageerada Faceed ee Medi-Cal waxa ay dardargeliyaan soo kabashada, adkaysiga, ka qaybqaadashada, bulshaynta, isku-filnaanshaha, isku-doodista, horumarinta taageerooyinka dabiiciga ah, iyo aqoonsiga awoodaha iyada oo loo marayo hawlo qaabaysan. Adeegyadan waxa lagu siin karaa adiga

ama shakhsi(yaadka) taageerada laxaadka leh ee la magacaabay waxana aad heli kartaa isla wakhtiga aad helayso adeegyada caafimaadka maskaxeed ama Nidaamka Bixinta Nidaamsan ee Medi-Cal ee Daawooyinka "Drug Medi-Cal Organized Delivery System". Khabiirka Taageerada Faceed ee Adeegyada Taageerada Faceed ee Medi-Cal waa shakhsi lasoo noolaa xaalado caafimaadka habdhaqan ama adeegsiga maandooriyaha ah isla markaana ku jira soo kabasho, kaas oo buuxiyey shuruudaha barnaamijka shahaado-siinta ay Dawladdu-ansixiyey ee degmada, kaas oo shahaado ka haysta degmooyinka, isla markaana bixiya adeegyadan isaga oo uu hagayo Xirfadle Caafimaadka habdhaqan ah kaas oo liisan ka haysta, rukhsad khaas ah ka haysta, ama ka diiwaangashan Dawladda.

- Adeegyada Taageerada Faceed ee Medi-Cal waxa kamid ah tababarid shakhsiyeed ama kooxeed, kooxo xirfado-dhisid waxbarasheed, dhex mushaaxid khayraad, adeegyo ka qaybqaadasho oo kugu dhiirrigelinaya inaad ka qaybqaadato daaweynta caafimaadka habdhaqan, iyo hawlo daaweyneed oo ay kamid yihiin dardargelinta isku-doodista.
- Xubnaha ka yar da'da 21 waxa laga yaabaa inay u qalmaan adeegga iyada oo loo marayo Baadhista, Ogaanshaha, Daaweynta Hore ee Joogtada ah "Early and Periodic Screening, Diagnostic, and Treatment" iyada oo aan loo eegayn degmada ay ku nool yihiin.
- Bixinta Adeegyada Taageerada Faceed ee Medi-Cal waa arrin ikhtiyaari u ah degmooyinka ka qaybqaateyaasha ah. Tixraac qaybta "Macluumaadka Dheeraadka ah ee Ku Saabsan Degmadaada" ee ku taalla gebagebada buug-yarahan si aad u ogaato in degmadaadu ay bixiso adeeggan.

***Adeegyada Soo Kabashada "Recovery Services"***

- Adeeygada Soo Kabashadu waxa ay noqon karaan qayb muhiim ah oo kamid ah soo kabashadaada iyo badqabkaaga. Adeegyada Soo Kabashadu waxa ay kaa caawin karaan inaad ku xidhanto bulshada daaweynta si aad u maarayso caafimaadkaaga iyo daryeelkaaga caafimaad. Sidaas darteed, adeeggani waxa uu xoojiyaa doorka aad ku leedahay maaraynta caafimaadkaaga, adeegsiga xeeladaha taageerada is-maaraynta, iyo nidaaminta khayraadka gudeed iyo bulsheed ee lagu bixinayo taageero is-maarayn joogto ah.

- Waxa aad heli kartaa Adeegyo Soo Kabasho oo ku salaysan is-qiimeyntaada ama qiimeynta adeeg-bixiyahaaga ee halista dib-ugu-noqoshada balwadda. Waxa aad sidoo kale Adeegyada Soo Kabashada ku heli kartaa fool ka fool, adeegga caafimaadka ee onlaynka ah "telehealth", ama taleefanka.
- Adeegyada Soo Kabashada waxa kamid ah qiimeynta, isku dubaridka daryeelka, la talinta shakhsiyeed, la talinta kooxeed, daaweynta qoys, la socoshada soo kabashada, iyo qaybaha kahortagga dib ugu noqoshada balwadda.

***Isku Dubaridka Daryeelka "Care Coordination"***

- Adeegyada Isku Dubaridka Daryeelku waxa ay ka kooban yihiin hawlo la isugu dubaridayo daryeelka cilladda adeegsiga maandooriyaha, daryeelka caafimaadka maskaxeed, iyo daryeelka daaweyneed, isla markaana lagu bixinayo ku xidhitaano adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagay caafimaadkaaga. Isku Dubaridka Daryeelka waxa lala bixiyaa dhammaan adeegyada waxana uu ka dhici karaa goobo ah kuwo caafimaad iyo aan kuwo caafimaad ahayn, oo ay kamid tahay bulshadaada dhexdeedu.
- Adeegyada Isku-dubaridka Daryeelka waxa kamid ah isku-dubaridka adeeg-bixiyeyaasha daaweyneed iyo kuwa caafimaadka maskaxeed ee lagu la soconayo isla markaana lagu taageerayo xaaladaha caafimaad, qorshaynta bixitaanka, iyo isku dubaridka adeegyada kaabayaasha ah ee ay kamid yihiin in lagugu xidho adeegyada bulshada sida daryeerka ilmaha, gaadiidka, iyo guriyeynta.

***Maareynta Dhiirrigelinta-abaalmarineed "Contingency Management" (waa ay ku kala duwan yihiin degmooyinku)***

- Xubnaha ka yar da'da 21 ayaa u qalmi kara adeegga iyaga oo hoos imanaya Baadhista, Ogaanshaha, iyo Daaweynta Hore ee Joogtada ah "Early and Periodic Screening, Diagnostic, and Treatment" iyada oo aan loo eegayn degmada ay deggan yihiin.
- Bixinta Adeegyada Maaraynta Dhiirrigelinta-abaalmarineed waa arrin ikhtiyaari u ah degmooyinka ka qaybqaateyaasha ah. Tixraac qaybta "Macluumaadka Dheeraadka ah ee Ku Saabsan Degmadaada" ee ku taalla gebagebada buug-yarahan si aad u ogaato in degmadaadu ay bixiso adeeggan.

- Adeegyada Maaraynta Dhiirrigelinta-abaalmarineed waa daaweyn ku salaynsan caddeyn oo loogu talagalay cilladda adeegsiga daroogooyinka kiciyeyaasha ah "stimulant use disorder" halkaas oo xubnaha u qalmaa ay ka qaybqaadan doonaan adeeg Maaraynta Dhiirrigelinta-abaalmarineed oo bukaan-socod oo 24-toddobaad ah oo qaabaysan, oo ay ku xigaan lix bilood ama wax ka badan oo adeegyo taageero daaweyn iyo kuwo soo kabasho oo dheeraad ah oo aan lahayn dhiirrigelin.
- Muddada 12 ka toddobaad ee ugu horaysa ee adeegyada Maaraynta Dhiirrigelinta-abaalmarineed waxa kamid ah dhiirrigelino isdaba-joog ah oo lagu bixinayo gaadhitaanka yoolasha daaweynta, gaar ahaan adeegsi la'aanta daroogooyinka kiciyeyaasha ah (sida, cocaine, amphetamine, iyo methamphetamine). Ka qaybqaateyaashu waa inay ogolaadaan shaybaadhada daroogada ee kaadida illaa inta uu go'aamiyo barnaamijka adeegyada Maareynta Dhiirrigelinta-abaalmarineed. Abaalmarinadu waxa ay ka kooban yihiin waxyaabo u dhigma kaash (sida, kaadhadhka hadiyadeed "gift cards").
- Adeegyada Maareynta Dhiirrigelinta-abaalmarineed waxa keliya heli kara xubnaha ku qaata adeegyada goob aan hoy ahayn "non-residential setting" oo uu ka hawlgalo adeeg-bixiye ka qaybqaate ah kuwaas oo ka diiwaangashan kana qaybqaata muddo daaweyn oo dhamaystiran, oo la khaasyeelay.

***Adeegyada Musiibooyinka ee Guurguura "Mobile Crisis Services"***

- Adeegyada Musiibooyinka ee Guurguura ayaa aad heli kartaa haddii aad wajahdo musiibo adeegsiga maandooriyaha ah.
- Adeegyada Musiibooyinka ee Guurguura waxa ay adeeg-bixiyeyaashu ku bixiyaan goobta aad ku wajahayso musiibada, oo ay kamid yihiin gurigaaga, shaqadaada, dugsigaaga, ama goobaha bulsheed ee kale, marka laga reebo isbitaal ama goob adeeg oo kale. Adeegyada Musiibooyinka ee Guurguura waxa la heli karaa 24 ka saacadood ee maalintii, 7 da maalmood ee toddobaadkii, iyo 365 ka maalmood ee sanakii.
- Adeegyada Musiibooyinka ee Guurguura waxa kamid ah gargaar-bixin degdeg ah, qiimeyn shakhsiyeed, iyo ku xasilinta bulshada dhexdeeda "community-based stabilization". Haddii aad u baahato daryeel dheeraad ah, adeeg-

bixiyeyaasha musiibooyinka ee guurguuraa ayaa sidoo kale bixin kara wareejino ama gudbino toos-isugu-xidhis ah oo ay kuugu gudbinayaan adeegyada kale.

***Nidaamyada Daryeelka Caafimaadka ee Soo-jireenka ah "Traditional Health Care Practices"***

- Nidaamyada daryeelka caafimaadka ee soo-jireenka ah waxa laga filayaa inay wanaajiyaan helitaanka daryeelka munaasabka ah dhaqan ahaan; taageeraan awoodda ay xarumahani u leeyihiin inay u adeegaan bukaankooda; joogteeyaan oo ilaaliyaan caafimaadka; wanaajiyaan natiijooyinka caafimaadka iyo tayada iyo khibrada daryeelka; isla markaana ay dhimaan sinnaan la'aanta ka jirta helitaanka daryeelka.
- Nidaamyada daryeelka caafimaad ee soo-jireenka ah waxa ay isugu jiraan laba nooc oo adeegyada ah oo cusub: adeegyada Daaweeyaha Soo-jireenka ah "Traditional Healer" iyo Caawiyaha Dabiiciga ah "Natural Helper". Adeegyada Daaweeyaha Soo-jireenka ah waxa kamid ah daaweyn muusig (sida muusig iyo heeso soo-jireen ah, qoob-ka-ciyaar, iyo durbaan-tumid), rooxaaniyad (sida xaflado, caadooyin, daawooyin dhireed) iyo habraacyo isku-dhafan oo kale. Adeegyada Caawiyaha Dabiiciga ah waxa ay caawimo ka geysan karaan taageerada hagitaaneed, dhismaha xirfadaha bulsho-nafsiyeed, is-maaraynta, iyo taageerada uur-ku-taallada.
- La xidhiidh degmadaada adiga oo adeegsanaya lambarka taleefanka ee ku yaalla jaldiga buug-yarahan si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeeggan.

***Adeegyada Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada ee La Xoojiyey "Enhanced Community Health Worker" (CHW) (waa ay ku kala duwan yihiin degmooyinku)***

- CHW yadu waa shaqaale caafimaad oo tababar gaar ah qaba isla markaana xubno lagu kalsoon yahay ka ah bulshooyinkooda.
- Yoolka Adeegyada CHW ee La Xoojiyey waa in gacan lagaga geysto joojinta cudurrada, naafanimada, iyo mashaakilka caafimaad ee kale kahor inta aanay ka darin. Adeegyada CHW ee La Xoojiyey waxa kamid ah dhammaan isla qaybaha iyo xeerarka ay leeyihiin adeegyada ka hortagga ee CHW ee caadiga ah, balse waxa loo khaasyeelay dadka u baahan taageero caafimaadka habdhaqan ah oo

dheeraad ah. Yoolku waa in taageero dheeraad ah la bixiyo si loo ilaaliyo caafimaadka iyo badqabka xubnahan.

- Qaar adeegyadan ah waxa kamid ah waxbarasho iyo tababar caafimaad, oo ay kamid yihiin xakameynta iyo kahortagga cudurrada dabadheeraada ama gudba; xaaladaha caafimaadka habdhaqan, kuwa dhalmada-kahor, iyo kuwa afka; iyo kahortagga dhaawaca; dardargelin iyo tababar caafimaad, oo ay kamid yihiin dejinta yoolasha iyo abuuritaanka qorshe hawleedka lagaga hadlayo kahortagga iyo maareynta cudurrada.
- Bixinta Adeegyada CHW ee La Xoojiyey waa arrin ikhtiyaari u ah degmooyinka ka qaybqaateyaasha ah. Tixraac qaybta "Macluumaadka Dheeraadka ah ee Ku Saabsan Degmadaada" ee ku taalla gebagebada buug-yarahan si aad u ogaato in degmadaadu ay bixiso adeeggan.

***Shaqaaleynta La Taageero "Supported Employment" (waa ay ku kala duwan yihiin degmooyinku)***

- Habka Meelaynta iyo Taageerada Shakhsiga (IPS) ee Shaqaaleynta La Taageero waa adeeg ka caawiya dadka qaba baahiyo caafimaad habdhaqan oo daran inay helaan oo haystaan shaqooyin wanaagsan oo bulshadooda dhexdeeda ah.
- Iyaga oo ka qayb qaadanaya Shaqaalaynta La Taageero ee IPS, dadku waxa ay heli karaan natiijooyin shaqo oo wanaagsan waxana ay taageeri karaan kasoo kabashadooda xaaladdooda caafimaadka habdhaqan.
- Barnaamijkani sidoo kale waxa uu gacan ka geystaa horumarinta madax-banaanida, dareenka kamid ahaanshaha, iyo caafimaadka iyo badqabka guud.
- Bixinta Shaqaaleynta La Taageero waa arrin ikhtiyaari u ah degmooyinka ka qaybqaateyaasha ah. Tixraac qaybta "Macluumaadka Dheeraadka ah ee Ku Saabsan Degmadaada" ee ku taalla gebagebada buug-yarahan si aad u ogaato in degmadaadu ay bixiso adeeggan.

## ADEEGYADA LAGU HELI KARO TALEEFANKA AMA ADEEGGA CAAFIMAAD EE ONLAYNKA AH "TELEHEALTH"

Kulan shakhsi ah, oo fool-ka-fool ah oo idin dhex mara adiga iyo adeeg-bixiyahaagu ma aha mid lagaaga baahan yahay marwalba si aad u awooddo inaad hesho adeegyada caafimaadka habdhaqan. Iyada oo ku xidhan adeegyadaada, waxa laga yaabaa inaad awooddo inaad adeegyadaada ku hesho taleefanka ama adeegga caafimaadka ee onlaynka ah "telehealth". Adeeg-bixiyahaaga ayaa kuu sharxi doona wax ku saabsan adeegsiga taleefanka ama adeegga caafimaad ee onlaynka ah "telehealth" isla markaana hubin doona inaad ogolaato kahor inta aan adeegyada lagu bilaabin taleefanka ama adeegga caafimaadka onlaynka ah "telehealth". Xattaa haddii aad ogolaato inaad adeegyo ku hesho adeegga caafimaadka onlaynka ah "telehealth" ama taleefanka, waxa aad wakhti dambe dooran kartaa inaad adeegyadaada ku hesho si shakhsi ah ama fool-ka-fool ah. Noocyada adeegyada habdhaqan qaarkood lagu ma bixin karo keliya adeegga caafimaadka ee onlaynka ah "telehealth" ama taleefanka maadaama oo lagaaga baahan yahay inaad joogto goob cayiman si aad u hesho adeegga, sida adeegyada daaweynta hoy ama adeegyada isbitaalka.

## HANNAANKA XALLINTA MASHAAKILKA: SIDA LOO XAREEYO CABASHADA, RACFAANKA, AMA LOO CODSADO DHEGAYSI CADDAALAD AH OO GOBOL

**Ka Waran Haddii aan Heli Waayo Adeegyada aan ka Doonayo Degmadayda?**

Degmadaadu waxa khasab ah inay leedahay qaab aad ku xallin karto wixii mashaakil ah ee la xidhiidha adeegyada aad doonayso ama aad helayso. Tan waxa loo yaaqaan hannaanka xallinka-mashaakilka, waxana ku jiri kara waxyaabaha soo socda:

- Hannaanka Cabashada: Cabiraad hadal ah ama qoraal ah oo aad ku muujinayso ku qanacsanaan la'aanta wax la xidhiidha adeegyadaada caafimaadka maskaxeed ee takhasuska ah, adeegyadaada cilladda adeegsiga maandooriyaha, adeeg-bixiye, ama degmada. Tixraac qaybta Hannaanka Cabashada ee buug-yarahan si aad u hesho wixii macluumaad ah ee dheeraad ah.
- Hannaanka Racfaanka: Racfaan waa marka aanad ogoleyn go'aanka degmada ee beddelka adeegyadaada (sida, diidmada, joojinta, ama dhimista adeegyada) ama bixin la'aanta kharashkooda. Tixraac qaybta Hannaanka Cabashada ee buug-yarahan si aad u hesho wixii macluumaad ah ee dheeraad ah.
- Hannaanka Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobolka: Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobolku waa kulan lala yeesho qaaddi sharci oo maamul oo ka socda Waaxda Adeegyada Bulshada ee California (CDSS) haddii ay degmadu diiddo racfaankaaga. Tixraac qaybta Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobolka ee buug-yarahan si aad u hesho wixii macluumaad ah ee dheeraad ah.

Xareyna cabasho, racfaan, ama codsiga Dhegaysi Caddaalad ah oo Gobol lagaaga ma aargoosan doono wax saameyn ahna kuma yeelan doono adeegyada aad helayso. Xareynta cabasho ama racfaan waxa uu caawimo ka geystaa inaad hesho adeegyada aad u baahan tahay oo aad xalliso wixii mashaakil ah ee aad ka wajahdo adeegyadaada caafimaadka habdhaqan. Cabashooyinka iyo racfaanadu sidoo kale waxa ay caawiyaan degmada iyaga oo siinaya macluumaad ay u adeegsan karto wanaajinta adeegyada. Degmadaada ayaa natiijada ku ogaysiin doonta adiga, adeeg-bixiyeyaashaada, iyo waalidiintaada/masuulladaada marka cabashadaada ama racfaankaagu uu dhamaystirmo. Xafiiska Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobolka ayaa natiijada ku ogaysiin doonta adiga iyo adeeg-bixiyahaaga marka Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobolku uu dhamaystirmo.

**Ogsoonow**: Wax dheeraad ah ka ogow hannaan kasta oo kamid ah hannaanada xallinta mashaakilka.

**Ma La Iga Caawin Karaa Xareynta Racfaan, Cabasho, ama Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol?**

Degmadaada ayaa kugu caawin doonta inay kuu sharraxdo hannaanadan waajibna ay ku tahay inay kaa caawiso xareynta cabasho, racfaan, ama codsiga Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol. Degmada ayaa sidoo kale kaa caawin doonta go'aansashada inaad u qalanto waxa loo yaqaan hannaanka "racfaanka la dedejiyey", kaas oo ka dhigan in dib loogu eegi doono si ka dhakhso badan sida kale maadaama oo caafimaadkaaga, caafimaadkaaga maskaxeed, iyo/ama xasiloonidaadu ay halis ku jiraan. Waxa aad sidoo kale u igman kartaa qofkale in uu kaa wakiil noqdo, oo ay kamid yihiin adeeg-bixiyahaaga ama qareenkaaga.

Haddii aad jeclaan lahayd caawimo, la xidhiidh degmadaada adiga oo adeegsanaya lambarka taleefanka ee ku yaalla jaldiga buug-yarahan. Degmadaadu waa inay kaalmo macquul ah kaa siiso dhamaystirka foomamka iyo tallaabooyinka habraaceed ee kale ee la xidhiidha cabashada ama racfaanka. Tan waxa kamid ah, balse aan ku xaddidneyn, bixinta adeegyo turjubaad iyo lambarro bilaash ah oo leh TTY/TDD iyo awood turjubaad.

**Haddii aan U Baahan Tahay Kaalmo Dheeraad ah**

*La Xidhiidh Waaxda Adeegyada Daryeelka Caafimaad, Xafiiska Difaacaha Macaamiisha "Office of the Ombudsman":*

- # ka Taleefanka: **1-888-452-8609**, Isniinta illaa Jimcaha, 8 g.h. to 5 g.d. (marka laga reebo fasaxyada).

*AMA*

- Iimeylka: MMCDOmbudsmanOffice@dhcs.ca.gov. **Fadlan ogsoonow**: Farrimaha iimeylka ah looma tixgeliyo qarsoodi (fadlan ha ku darin macluumaad shakhsiyeed farriinta iimeylka ah).

Waxa aad sidoo kale ka heli kartaa caawimo sharciyeed oo bilaash ah xafiiska kaalmada sharciyeed ee deegaankaaga ama kooxo kale. Si aad u dalbato

xuquuqdaada Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol, waxa aad kala xidhiidhi kartaa Qaybta Su'aalaha iyo Jawaab-celinta Dadweynaha ee Waaxda Adeegyada Bulshada ee California lambarkan taleefan: **1-800-952-5253** (wixii TTY ah, wac **1-800-952-8349**).

**Cabashooyinka**

***Waa Maxay Cabasho?***

Cabasho waa cabiraad qanaaco-la'aan aad ka qabto adeegyadaada caafimaadka habdhaqan ee aan soo hoos gelin hannaanka racfaanka ama Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol. Tan waxa kamid ah walaacyada aad ka qabto tayada daryeelkaaga, sida ay kuula dhaqmaan shaqaalaha iyo adeeg-bixiyeyaashu, iyo diidmooyinkaaga go'aanada la xidhiidha daryeelkaaga.

Tusaaleyaasha cabashooyinka:

- Haddii aad dareento in adeeg-bixiye uu si adaab-darro ah kuula dhaqmay ama se aanu ixtiraamin xuquuqdaada.
- Haddii degmadu ay u baahato wakhti dheeraad ah oo ay ku gaadho go'aan ku saabsan ansixinta adeeg uu adeeg-bixiyahaagu kuu dalbay, isla markaana aad diiddo wakhtigan dheeraadka ah.
- Haddii aanad ku qanacsaneyn tayada daryeelka aad helayso ama qaabka qorshahaaga daaweynta laguugu sheegayo.

***Waa Maxay Hannaanka Cabashadu?***

Hannaanka cabashadu waxa uu:

- Ka koobnaan doonaa tallaabooyin fudud oo aad ugu xaraynayso cabashadaada af ahaan ama qoraal ahaan.
- Noqon doonaa mid aan kugu keenin inaad weydo xuquuqdaada ama adeegyadaada ama aan aargoosi loogu geysan adeeg-bixiyahaaga.
- Kuu sahli doonaa inaad u igmato qofkale in uu kaa wakiil noqdo. Kani waxa uu noqon karaa adeeg-bixiye ama qareen. Haddii aad ogolaato in qofkale kaa wakiil noqdo, waxa lagaa dalban karaa inaad saxeexdo foom ogolaansho, kaas oo degmadaada fasax u siinaya inay macluumaad siiso qofkaas.

- Xaqiijin doonaa in qofka la igmaday ee go'aanka ka gaadhaya cabashadu uu yahay mid u qalma gaadhista go'aanada isla markaana aanu qayb ka ahayn wax heer dib u eegis ama go'aan-gaadhis ah oo hore.
- Go'aamin doonaa waajibaadka degmadaada, adeeg-bixiyahaaga, iyo naftaada.
- Hubin doonaa natiijooyinka cabashada in lagu bixiyo jadwal-wakhtiyeedka loo baahan yahay.

***Goorma ayaa aan Xareyn Karaa Cabasho?***

Waxa aad xareyn kartaa cabasho wakhti kasta haddii aanad ku qanacsaneyn adeegga aad heshay ama aad walaac kale ka qabto degmadaada.

***Sidee ayaa aan u Xareyn Karaa Cabasho?***

Si aad kaalmo uga hesho xareynta cabashooyinka la xidhiidha adeegyada bukaan-jiifka iyo/ama hoy, waxa aad wici kartaa Barnaamijka U Doodista Bukaanka ee Adeegga Qoyska Yuhuudiga ah "Jewish Family Service" (JFS) adiga oo si bilaash ah uga wacaya lambarka (800) 479-2233 ama (619) 282-1134.
Si aad kaalmo uga hesho xareynta cabashooyinka la xidhiidha adeegyada bukaan-socodka, waxa aad wici kartaa Xarunta Waxbarashada Caafimaadka iyo U Doodista Bukaanka "Consumer Center for Health Education and Advocacy" (CCHEA) adiga oo si bilaash ah uga wacaya lambarka (877) 734-3258.

Cabashooyin afka ah iyo kuwo qoraal ahba waa la xareyn karaa. Cabashooyinka afka ahi uma baahna in lagu la socdo qoraal ahaan. Haddii aad cabashadaada ku xarayso qoraal ahaan, fadlan ogsoonow waxyaabaha soo socda: Degmadaadu waxa ay geysaa galwaraaqeedyo cinwaanka loo diruhu hore ugu sii qoran yahay "self-addressed envelopes" dhammaan goobaha adeeg-bixiyeyaasha. Haddii aanad haysan galwaraaqeed cinwaanka loo diruhu hore ugu sii qoran yahay "self-addressed envelope", waxa aad cabashooyinkaaga u dirtaa:

**<u>Wixii ah Adeegyada Bukaan-jiifka iyo/ama Hoy:</u>**

Jewish Family Service of San Diego
Joan & Irwin Jacobs Campus
Turk Family Center Community Services Building
8804 Balboa Avenue
San Diego, CA 92123

**<u>Wixii ah Adeegyada Bukaan-socodka:</u>**

Consumer Center for Health Education and Advocacy (CCHEA)
1764 San Diego Avenue, Suite 100
San Diego, CA 92110

***Sidee Baa aan U Ogaan Karaa In Degmadu Heshay Cabashadayda?***

Degmadaada waxa looga baahan yahay inay ku siiso wargelin qoraal ah oo ay kuugu sheegayso in cabashadaada la helay muddo shan maalmood ah gudahood oo ka bilaabma helitaanka. Cabashada lagu helay taleefanka ama loo helay si fool-ka-fool ah ee aad ogolaato xallinteeda dhammaadka maalin-shaqeedka xigta, waa ay ka reebban tahay oo waxa laga yaabaa in aanad helin warqad.

***Goorma Ayaa Cabashadayda Go'aan Laga Gaadhi Doonaa?***

Go'aan ku saabsan cabashadaada waa in degmadaadu ku gaadhaa muddo 30 maalmood ah gudahood oo ka bilaabma taariikhda cabashadaada la xareeyey.

***Sidee Baa aan Ku Ogaanayaa in Degmadu ay Go'aan Ka Gaadhay Cabashadayda?***

Marka go'aan laga gaadho cabashadaada, degmadu waxa ay:

- Kuu soo diri doontaa adiga ama qofka aad igmatay wargelinta go'aanka oo qoraal ah;
- Kuu soo diri doontaa adiga ama qofka aad igmatay Wargelin ah Go'aamin Faa'iido oo Taban taas oo kuu sheegaysa xaqa aad u leedahay codsiga Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol hadii degmadu kugu ogaysiin weydo go'aanka cabashada wakhtigii loogu talagalay;
- Kuu sheegi doontaa xaqa aad u leedahay inaad codsato Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol.

Waxa laga yaabaa in aanad helin wargelinta go'aanka oo qoraal ah haddii cabashadaada aad ku xaraysay taleefanka ama aad u xaraysay si fool ka fool ah isla markaana aad ogolaatay in mushkiladdaadii la xalliyey dhammaadka maalin-shaqeedka xiga taariikhda xareynta.

**Ogsoonow**: Degmadaada waxa looga baahan yahay inay ku siiso Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada ee Taban taariikhda ay dhammaato wakhtiga loo qoondeeyey. Waxa aad wici kartaa degmada si aad uga hesho macluumaad dheeraad ah haddii aad heli weydo Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada ee Taban.

***Ma Jiraa Wakhti Kama Dambeys ah oo Xareynta Cabashada ah?***

Maya, waxa aad xareyn kartaa cabasho wakhti kasta. Ha ka labalabeyn inaad mashaakilka ku wargeliso degmada. Degmadu waxa ay marwalba kaala shaqayn doontaa inaad hesho xal wax ka qabanaya walaacyadaada.

**Racfaanada**

Waxa aad xareyn kartaa racfaan marka aanad ogoleyn go'aanka degmada ee adeegyada caafimaadka habdhaqan ee aad hadda hesho ama aad doonayso inaad hesho. Waxa aad codsan kartaa dib u eegid lagu sameeyo go'aanka degmada adiga oo adeegsanaya:

- Hannaanka Racfaanka ee Caadiga ah.

AMA

- Hannaanka Racfaanka ee La Dedejiyey.

**Ogsoonow**: Labada nooc ee racfaanadu waa isku mid; si walba ha noqotee, waxa jira shuruudo cayiman oo loogu qalmo racfaan la dadajiyey (ka eeg hoos shuruudaha).

Degmadu waxa ay kaa caawin doontaa dhamaystirka foomamka iyo qaaditaanka tallaabooyinka habraaceed ee kale ee xareynta racfaanka, oo ay kamid yihiin diyaarinta racfaan qoraal ah, in lagu ogaysiiyo goobta uu foomku kaga jiro websaytkooda ama in lagu siiyo foomka marka aad codsato. Degmadu waxa ay sidoo kale kaaga la talin doontaa kaagana kaalmeyn doontaa codsiga sii waditaanka faa'iidooyinka inta lagu gudo jiro racfaan laga qaadanayo go'aaminta faa'iidada ee taban si waafaqsan sharciyada federalka.

***Maxaa uu Qabtaa Hannaanka Racfaanka ee Caadiga ahi?***

Hannaanka Racfaanka ee Caadiga ahi waxa uu:

- Kuu sahli doonaa inaad ku xarayso racfaan hadal ahaan ama qoraal ahaan.

- Hubin doonaa xareynta racfaanku in aanay kugu sababi doonin inaad weydo xuquuqdaada ama adeegyadaada ama aan sinaba aargoosi loogu geysan doonin adeeg-bixiyahaaga.
- Kuu sahli doonaa inaad u igmato shakhsi kale (oo ay kamid yihiin adeeg-bixiye ama qareen) in uu kaa wakiil noqdo. Fadlan ogsoonow: Haddii aad u igmato shakhsi kale in uu kaa wakiil noqdo, degmadu waxa laga yaabaa inay kaa dalbato inaad saxeexdo foom aad ugu ogolaanayso degmada inay siiso macluumaad shakhsigaas.
- Kuu sii wadi doonaa faa'iidooyinka marka aad codsato racfaan wakhtiga loo qoondeeyey dhexdiisa. Fadlan ogsoonow: Tani waa 10 maalmood oo ka bilaabata taariikhda Wargelintaada Go'aaminta Faa'iidada ee Taban laguu soo diray ama si shakhsi ahaan ah laguu siiyey.
- Hubin doonaa inaanad bixin kharashka adeegyada lasii wado inta la sugayo racfaanka haddii go'aanka racfaanku uu noqdo mid taageeraya go'aaminta faa'iidada ee taban ee degmada.
- Hubin doonaa in go'aan-gaadheyaasha racfaankaagu ay yihiin kuwo u qalma isla markaana aan ku lug lahayn wax heer dib u eegis ama go'aan-gaadhis ah oo hore.
- Kuu sahli doonaa adiga ama wakiilkaagu in aad dib u eegtaan faylka kiiskaaga, oo ay kamid yihiin diiwaanada caafimaad iyo dukumintiyada la xidhiidha ee kale.
- Kuu sahli doonaa inaad fursad macquul ah u hesho inaad soo bandhigto caddeyn, markhaati, iyo doodo fool ka fool ah ama qoraal ah.
- Kuu sahli doonaa adiga, shakhsiga aad igmatay, ama wakiilka sharciyeed ee hantida shakhsiga dhintay in la idin ka dhigo dhinacyo ka tirsan racfaanka.
- Ku siin doonaa xaqiijin qoraal ah oo ka timid degmadaada oo muujinaysa in racfaankaagii dib u eegis lagu wado.
- Kugu wargelin doonaa xaqa aad u leedahay inaad codsato Dhegaysi Caddaalad ah oo Gobol, kadib dhamaystirka hannaanka racfaanka.

***Goorma ayaa aan Xareyn Karaa Racfaan?***

Waxa aad u xareyn kartaa racfaan degmadaada marka:

- Degmada ama adeeg-bixiyaha qandaraaska lagu la jiraa uu go'aamiyo in aanad buuxin shuruudda helitaanka ee adeegyada caafimaadka habdhaqan.

- Bixiyaha daryeelkaaga caafimaad uu adeeg caafimaadka habdhaqan ah kuugu taliyo oo uu ansixin ka codsado degmadaada, balse degmadu ay diiddo codsiga ama ay wax ka beddesho nooca ama inta jeer ee adeegga.
- Adeeg-bixiyahaagu uu ansixin ka codsado degmada, balse degmadu ay dalbato macluumaad dheeraad ah isla markaana ay dhamaystiri weydo hannaanka ansixinta wakhtigii loogu talagalay.
- Degmadaadu ay ku bixin weydo adeegyada wakhtiyadii ay hore ugu qoondaysay.
- Aad dareento in degmadaadu aanay dabooleyn baahiyahaaga wakhtigii munaasabka ahaa.
- Cabashadaada, racfaankaaga, ama racfaankaaga la dedejiyey aan xal laga gaadhin wakhtigii loogu talagalay.
- Adiga iyo adeeg-bixiyahaagu aad diiddaan adeegyada caafimaadka habdhaqan ee daruuriga ah.

***Sidee ayaa aan u Xareyn Karaa Racfaan?***

- Waxa aad ku xareyn kartaa ractaan adiga oo u maraya mid kamid ah saddexda hab ee soo socda:
    - Si aad kaalmo uga hesho xareynta la xidhiidha adeegyada bukaan-jiifka iyo/ama hoy, waxa aad wici kartaa Barnaamijka U Doodista Bukaanka ee Adeegga Qoyska Yuhuudiga ah "Jewish Family Service" (JFS) adiga oo si bilaash ah uga wacaya lambarka (800) 479-2233 ama (619) 282-1134. Si aad kaalmo uga hesho xareynta la xidhiidha adeegyada bukaan-socodka, waxa aad wici kartaa Xarunta Waxbarashada Caafimaadka iyo U Doodista Bukaanka "Consumer Center for Health Education and Advocacy" (CCHEA) adiga oo si bilaash ah uga wacaya lambarkooda (877) 734-3258. Kadib wicitaanka, waa inaad xarayso racfaan qoraal ah oo xiga sidoo kale; ama
    - Boosta ku dirto racfaankaaga (Degmada ayaa geyn doonta galwaraaqeedyo cinwaanka loo diruhu hore ugu sii ku qoran yahay "self-adressed envelopes" dhammaan goobaha adeeg-bixiyeyaasha si aad ugu dirto racfaankaaga). Ogsoonow: Haddii aanad haysan galwaraaqeed cinwaanka loo diruhu hore ugu sii qoran yahay "self-addressed envelope",

waxa aad racfaankaaga si toos ah ugu diri kartaa:

**<u>Wixii ah Adeegyada Bukaan-jiifka iyo/ama Hoy:</u>**

Jewish Family Service of San Diego
Joan & Irwin Jacobs Campus
Turk Family Center Community Services Building
8804 Balboa Avenue
San Diego, CA 92123

**<u>Wixii ah Adeegyada Bukaan-socodka:</u>**

Consumer Center for Health Education and Advocacy (CCHEA)
1764 San Diego Avenue, Suite 100
San Diego, CA 92110

ama

- Ku gudbi racfaankaaga iimeylka ama faakiska. Fadlan tixraac qayba "Macluumaadka Xidhiidhka Degmada" ee buug-yarahan si aad u hesho habka ugu munaasabsan (sida, iimeylka, faakiska) ee gudbinta racfaankaaga.

### *Sidee Baa aan Ku Ogaanayaa in Racfaankayga Go'aan Laga Gaadhay?*

Adiga ama qofka aad igmatay ayaa ogaysiis qoraal ah ka heli doona degmadaada oo sheegaya go'aanka racfaankaaga. Ogaysiiska waxa ku jiri doona macluumaadka soo socda:

- Natiijooyinka hannaanka xallinta racfaanka.
- Taariikhda go'aanka racfaanka la gaadhay.
- Haddii racfaanka aan go'aan looga gaadhin sida aad doonayso, wargelinta waxa ku jiri doona macluumaad la xidhiidha xaqa aad u leedahay Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol iyo sida loo codsado Dhegaysiga Cadaaladda Gobol.

### *Ma Jiraa Wakhti Kama Dambays ah oo Xareynta Racfaanka ah?*

Waa inaad ku xarayso racfaan 60 maalmood gudahood oo ka bilaabma taariikhda ku qoran Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada Taban. Ma jiraan wakhtiyo kama dambeys ah oo lagu xaraynayo racfaan marka aanad helin Wargelin ah Go'aaminta Faa'iidada Taban, sidaas darteed waxa aad xareyn kartaa noocan racfaanka ah wakhti kasta.

***Goorma ayaa Go'aan Laga Gaadhi Doonaa Racfaankayga?***

Degmadu waa inay go'aan kaga gaadho racfaankaaga muddo 30 maalmood ah gudahood oo ka bilaabma helitaanka codsigaaga.

***Ka Waran Haddii Aanan Sugi Karin 30 Maalmood Go'aanka Racfaankayga?***

Haddii racfaanku uu buuxiyo shuruudaha hannaanka racfaanka ee la dedejiyey, waxa loo dhamaystiri karaa si ka dhakhso badan.

***Waa Maxay Racfaanka La Dedejiyo?***

Racfaanka la dedejiyaa waxa uu raacaa hannaan la mid ah ka uu raaco hannaanka caadiga ah balse waa uu ka dhakhso badan yahay. Halkan waxa ah macluumaad dheeraad ah oo la xidhiidha racfaanada la dedejiyey:

- Waa inaad muujiso in sugitaanka racfaanka caadiga ahi uu uga sii dari karo xaaladdaada caafimaadka habdhaqan.
- Hannaanka racfaanka la dedejiyey waxa uu raacaa wakhtiyo kama dambeys ah oo ka duwan kuwa hannaanka caadiga ah.
- Degmadu waxa ay haysataa 72 saacadood si ay dib ugu eegto racfaanada la dedejiyey.
- Waxa aad sameyn kartaa codsi hadal ah oo aad ku codsanayso hannaan la dedejiyey.
- Kuma qasbanid inaad qoraal ka dhigtid codsigaaga hannaanka la dedejiyey.

***Goorma ayaa aan Xareyn Karaa Racfaan La Dedejiyey?***

Haddii sugitaanka illaa 30 maalmood go'aanka racfaanka ee caadiga ah uu khatar gelin doono noloshaada, caafimaadkaaga, ama awooddaada helitaanka, joogtaynta, ama dib u helitaanka caafimaadka ugu wanaagsan, waxa aad codsan kartaa xallin racfaan oo la dedejiyey.

*Macluumaad Dheeraad ah oo La Xidhiidha Racfaanada La Dedejiyey:*

- Haddii racfaankaagu uu buuxiyo shuruudaha racfaanka la dedejiyey, degmadu waxa ay ku xallin doontaa 72 saacadood oo ka bilaabma helitaankiisa.
- Haddii degmadu ay go'aamiso in racfaankaagu aanu buuxin shuruudda racfaanka la dedejiyey, waxa looga baahan yahay inay ku siiyaan ogaysiis hadal

ah oo wakhtiga munaasab ku ah waxana ay ku siin doonaan wargelin qoraal ah laba maalmood gudahood, oo laguugu sharxayo sababta go'aankeeda. Racfaankaagu kadib waxa uu raaci doonaa jadwal-wakhtiyeedyada racfaanka caadiga ah ee hore loogu soo sheegay qaybtan.

- Haddii aad ogolaan weydo go'aanka degmada ee ah in racfaankaagu aanu buuxin shuruudda racfaanka la dedejiyey, waxa aad xareyn kartaa cabasho.
- Kadib marka ay degmadaadu xalliso codsigaaga racfaanka la dedejiyey, adiga iyo dhammaan dhinacyada qaybta ka ah racfaanka waxa lagu ogaysiin doonaa hadal ahaan iyo qoraal ahaan labadaba.

**Dhegaysiyada Cadaaladda ah ee Gobolka**

***Waa Maxay Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol?***

Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol waa dib u eegis madax-bannaan oo uu sameeyo qaaddi sharciyeed oo maamul oo ka socda Waaxda Adeegyada Bulshada ee California (CDSS) si loo xaqiijiyo inaad hesho adeegyada caafimaadka habdhaqan ee aad u qalanto ee hoos yimaadda barnaamijka Medi-Cal.

Fadlan booqo websaytka Waaxda Adeegyada Bulshada ee California https://www.cdss.ca.gov/hearing-requests for additional resources.

***Waa Maxay Xuquuqdayda Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol?***

Waxa aad xaq u leedahay in:

- Aad codsato dhegaysi kahor qabsooma qaaddi sharciyeed oo maamul, oo sidoo kale loo yaqaano Dhegaysiga cadaaladda ah ee Gobol, si wax looga qabto kiiskaaga.
- Aad barato sida loo codsado Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol.
- Aad wax ka barato shuruucda qeexaysa sida metelaaddu u shaqayso inta lagu gudo jiro Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol.
- Aad codsato in laguu sii wado faa'iidooyinkaaga inta lagu gudo jiro hannaanka Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol haddii aad codsato Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol wakhtiga loo qoondeeyey dhexdiisa.
- Aanad bixin kharashka adeegyada sii socda inta Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol la sugayo haddii go'aanka kama dambaysta ahi uu taageero go'aaminta faa'iidada ee taban ee degmada.

***Goorma ayaa aan Xareyn Karaa Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol?***

Waxa aad xareyn kartaa Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol haddii:

- Aad xarayso racfaan oo aad hesho waraaq xallin racfaan oo kuu sheegaysa in degmadaadu diidday codsigaagii racfaanka.
- Cabashadaada, racfaankaaga, ama racfaankaaga la dedejiyey aan lagu xallin wakhtigii loogu talagalay.

***Sidee Baa aan u Codsadaa Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol?***

Waxa aad ku codsan kartaa Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol:

- Onlayn ahaan: websaytka Maaraynta Kiis ee Racfaanada ee Waaxda Adeegyada Bulshada: https://acms.dss.ca.gov/acms/login.request.do
- Qoraal ahaan: U gudbi codsigaaga waaxda daryeelka ee degmada "the county welfare department" adiga oo ugu hagaajinaya cinwaanka ka muuqda Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada Taban, ama boosta ugu dir:

  **California Department of Social Services**
  **State Hearings Division**
  **P.O. Box 944243, Mail Station 9-17-37**
  **Sacramento, CA 94244-2430**

- Faakis ahaan: 916-651-5210 or 916-651-2789

Waxa aad sidoo kale ku codsan kartaa Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol ama Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol ee la dedejiyey:

- Taleefan ahaan:
  - *Waaxda Dhegaysiyada Gobol*, si bilaash ah uga wac, lambarka **1-800-743-8525** ama **1-855-795-0634**.
  - *Su'aalaha iyo Jawaab-celinta Dadweynaha*, si bilaash ah uga wac, lambarka **1-800-952-5253** ama TDD lambarka **1-800-952-8349**.

***Ma Jiraa Wakhti Kama Dambeys ah oo La Dalbado Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol?***

Waxa aad haysataa 120 maalmood oo ka bilaabma taariikhda wargelinta go'aanka racfaanka ee qoraalka ah ee degmada si aad u codsato Dhegaysiga Cadaaladda ah ee

Gobol. Haddii aanad helin Wargelin Go'aaminta Faa'iidada ee Taban ah, waxa aadd xarayn kartaa Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol wakhti kasta.

### *Ma ii sii Socon Karaan Adeegyadu Inta aan Sugayo Go'aanka Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol?*

Haa, haddii aad hadda hesho adeegyo la ansixiyey isla markaana aad doonayso inaad sii waddo helitaanka adeegyada inta aad sugayso go'aanka Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol, waa inaad codsato Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol 10 maalmood gudahood oo ka bilaabma taariikhda wargelinta go'aanka racfaanka lagu diray boosta ama laguu keenay. Ama, waxa aad codsan kartaa dhegaysiga kahor taariikhda degmadaadu ay kuu sheegtay in adeegyadaada la joojin doono ama la dhimi doono.

**Ogsoonow:**

- Marka aad codsanayso Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol, waa inaad muujiso in aad doonayso inaad sii wadato helitaanka adeegyada inta lagu gudo jiro hannaanka Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol.
- Haddii aad codsato inaad sii wadato helitaanka adeegyada isla markaana go'aanka kama dambeysta ah ee Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol uu xaqiijiyo dhimitaanka ama joojinta adeegga aad helayso, masuul kama tihid inaad bixiso kharashka adeegyada lagu siiyey intii aad sugaysay Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol.

### *Goorma ayaa Go'aan Laga Gaadhi Doonaa Go'aanka Dhegaysigayga Cadaaladda ah ee Gobol?*

Kadib marka aad codsato Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol, waxa ay qaadan kartaa illaa 90 maalmood inaad hesho go'aan.

### *Ma Ku Heli Karaa Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol Si Ka Dhakhso Badan?*

Haddii aad u aragto in sugitaanka muddadaas dhan ay waxyeello ku keeni karto caafimaadkaaga, waxa aad awood u yeelan kartaa inaad jawaab ku hesho saddex maalin shaqeed gudahood. Waxa aad ku codsan kartaa Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol ee La Dedejiyey adiga oo warqad qoraya adiga laftaadu ama adiga oo ka dalbanaya xirfadlahaaga caafimaad ee guud ama xirfadlahaaga caafimaadka

maskaxeed in uu warqad kuu qoro adiga. Warqaddu waa inay ka koobnaataa waxyaabaha soo socda:

1. Si faahfaahsan u sharrax sida sugitaanka illaa 90 maalmood in kiiskaaga go'aan laga gaadhaa ay si halis ah u waxyeelleyn karto noloshaada, caafimaadkaaga, ama awooddaada helitaanka, joogtaynta, ama dib u helitaanka caafimaadka ugu wanaagsan.
2. Dalbo "dhegaysi la dedejiyey" kadibna warqadda raaci codsiga dhegaysiga.

Qaybta Dhegaysiyada Gobolka ee Waaxda Adeegyada Bulshadu waxa ay dib u eegi doontaa codsigaaga Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol ee la dedejiyey waxana ay go'aamin doontaa in uu buuxiyey shuruudaha iyo in kale. Haddii codsigaaga la ansixiyey, dhegaysi ayaa la muddeyn doonaa, go'aan ayaana lagu gaadhi doonaa saddex maalin shaqeed gudahood oo ka bilaabma taariikhda Qaybta Dhegaysiyada Gobolku ay hesho codsigaaga.

## DARDAARANKA HORE "ADVANCE DIRECTIVE"

**Waa maxay Dardaaranka Hore?**

Waxa aad xaq u leedahay dardaaran hore. Dardaaranka hore waa dukuminti qoraal ah oo ku saabsan daryeelkaaga caafimaad ee uu aqoonsan yahay sharciga California. Waxa aad mararka qaarkood maqli kartaa dardaaranka hore in uu yahay dardaaran nololeed "living will" ama wakiilasho qareen oo joogto ah. Waxa ku jira macluumaad ku saabsan sida aad doonayso in daryeelkaaga caafimaad laguu siiyo ama waxa uu sheegaa go'aanada aad doonayso in la gaadho, haddii ama goorta aad awoodi weydo inaad naftaada u hadasho. Tan waxa kamid noqon kara waxyaabaha sida xaqa aad u leedahay inaad aqbasho ama diiddo daaweyn caafimaad, qalliin, ama aad yeelato ikhtiyaaro daryeel caafimaad oo kale. California, dardaaranka hore waxa uu ka kooban yahay laba qaybood:

- Magacaabiddaada wakiil (qof) gaadha go'aanada ku saabsan daryeelkaaga caafimaad; iyo
- Tilmaamahaaga daryeelka caafimaad ee shakhsiyeed.

Degmada waxa looga baahan yahay inay diyaarsato barnaamij dardaaranka hore ah. Degmadaada waxa looga baahan yahay inay bixiso macluumaad qoraal ah oo ku saabsan siyaasadaha dardaaranka hore isla markaana ay sharraxdo sharciga gobolka haddii laga dalbado macluumaadka. Haddii aad doonayso inaad codsato macluumaadka, waa inaad wacdo lambarka taleefanka ee ku qoran jaldiga buug-yarahan si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Waxa aad ka heli kartaa foom dardaaranka hore ah degmadaada ama internet ka. California, waxa aad xaq u leedahay inaad siiso hagitaanada dardaaranka hore dhammaan bixiyeyaasha daryeelkaaga caafimaad. Waxa aad sidoo kale xaq u leedahay inaad beddesho ama ka noqoto dardaarankaaga hore wakhti kasta.

Haddii aad su'aal ka qabto sharciga California ee la xihiidha shuruudaha dardaaranka hore, waxa aad waraaq u diri kartaa:

**California Department of Justice**
**Attn: Public Inquiry Unit**
**P. O. Box 944255**
**Sacramento, CA 94244-2550**

## XUQUUQDA IYO MASUULIYADAHA

### Masuuliyadaha Degmada

***Maxay ayaa ay Degmadaydu Masuul ka tahay?***

Degmadaadu waxa ay masuul ka tahay waxyaabaha soo socda:

- Ogaanshaha in aad buuxisay shuruudda helitaanka adeegyada caafimaadka habdhaqan ee ay bixiso degmadu ama shabakaddeeda adeeg-bixiyeyaashu.
- Bixinta baadhis ama qiimeyn lagu go'aaminayo in aad u baahan tahay adeegyo caafimaad habdhaqan iyo in kale.
- Bixinta lambar taleefan oo bilaash ah oo laga jawaabo 24 ka saacadood ee maalintii, toddobada maalmood ee toddobaadkii, kaas oo kuu sheegi kara sida aad adeegyo uga heli lahayd degmada. Lambarka taleefanku waxa uu ku qoran yahay jaldiga buug-yarahan.
- Hubinta in ay kaa ag dhaw yihiin adeeg-bixiyeyaal caafimaadka habdhaqan ah oo kugu filan si aad uga heli karto adeegyada ay kharashkooda bixiso degmadu marka aad u baahato.
- Inay kugu wargeliso oo ay ku barto adeegyada aad ka heli karto degmadaada.
- Inay adeegyada kugu siiso luuqaddaada si bilaash ah, haddii loo baahdana, ay ku siiso turjubaan bilaash ah.
- Inay ku siiso macluumaad qoraal ah oo ku saabsan waxa aad heli karto oo ku qoran luuqado kale ama qaabab kale sida daabacaadda farta indhoolka ama farta waaweyn. Tixraac qaybta "Macluumaadka Dheeraadka ah ee Ku Saabsan Degmadaada" ee ku taalla dhammaadka buug-yarahan si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.
- Inay kugu wargeliso isbeddellada waaweyn ee ku yimaadda macluumaadka lagu soo sheegay buug-yarahan ugu yaraan 30 maalmood kahor inta aanay isbeddelladu dhaqan-gelin. Isbeddel waxa loo tixgeliyaa in uu laxaad leeyahay marka uu korodh ama dhinnaansho ku imanayo xaddiga ama noocyada adeegyada la bixiyo, haddii korodh ama dhinnaansho ku imanayo tirada adeeg-bixiyeyaasha shabakadda, ama haddii uu jiro isbeddel kale oo saameyn ku yeelan kara faa'iidooyinka aad ka hesho degmada.
- Hubinta inay ku xidho daryeelkaaga caafimaad qorsheyaasha ama nidaamyada kale ee daruuriga noqon kara si kala-guurka daryeelkaagu u noqdo mid si

habsami leh u socda. Tan waxa kamid ah hubinta in wixii gudbino ah ee khubarada ama adeeg-bixiyeyaasha kale ah si habboon loola socdo iyo in adeeg-bixiyaha cusubi uu diyaar u yahay in uu ku daryeelo.

- Hubinta inaad sii wadi karto aragtida adeeg-bixiyahaaga hadda, xattaa haddii aanu ku jirin shabakaddaada, muddo wakhti ah oo cayiman. Tani waxa ay muhiim u tahay haddii isku-bedelidda adeeg-bixiyeyaashu ay waxyeello u geysan karto caafimaadkaaga ama ay kor u qaadi karto suuragalnimada aad ugu baahan karto inaad tagto isbitaal.

***Miyaa La Heli Karaa Gaadiid?***

Haddii aad la dhibban tahay imaatinka ballamahaaga caafimaadka guud ama caafimaadkaaga habdhaqan, barnaamijka Medi-Cal ayaa kaa caawiya in uu kuu qabanqaabiyo gaadiid adiga. Waa in gaadiid la siiyo xubnaha Medi-Cal ee aan awoodin inay gaadiid helaan iyagu isla markaana ay daruuro caafimaad u hayso helitaanka adeegyada kharashkooda la bixiyo ee Medi-Cal. Waxa jira laba nooc oo ay leeyihiin gaadiidka loogu talagalay ballamuhu:

- Kuwo aan ahayn Kuwo Caafimaad: ku qaaditaanka baabuur khaas ah ama dadweyne ee dadka aan haysan qaab kale oo ay ku tagaan ballamahooda.
- Kuwa Caafimaad ee aan ahayn Xaaladda Degdegga ah: ku qaaditaanka ambalaas, baabuur gaadhi-curyaan, ama gaadhiga lagu qaado bukaanka ee dadka aan adeegsan karin gaadiidka dadweynaha ama kuwa khaaska ah.

Gaadiidka waxa loo heli karaa safarada lagu tegeyo farmasiga ama lagu soo qaadanayo agab caafimaad oo loo baahan yahay, xubnaha-sanaaciga ah, qalabka toosinta lafaha "orthotics", iyo qalab kale.

Haddii aad leedahay Medi-Cal balse aanad ka diiwaangashaneyn qorshe daryeel la maareeyey, isla markaana aad u baahan tahay gaadiid aan mid caafimaad ahayn oo aad ku tagto adeeg la xidhiidha caafimaa, waxa aad si toos ah ula xidhiidhi kartaa adeeg-bixiyaha gaadiidka aan kuwa caafimaad ahayn ama adeeg-bixiyahaaga si aad uga hesho kaalmo. Marka aad la xdihiidho shirkadda gaadiidka, waxa ay ku weydiin doonaan macluumaadka ku saabsan taariikhda iyo wakhtiga ballantaada.

Haddii aad u baahato gaadiid caafimaad oo aan xaaladda degegga ah ahayn, adeeg-bixiyahaaga ayaa kuu qori kara gaadiid caafimaad oo aan xaaladda degdegga ah ahayn isla markaana kugu xidhi kara bixiyaha gaadiidka si uu isugu dubarido gaadiidka aad ku tagayso kagana imanayso ballantaada (ballamahaaga).

Si aad u hesho macluumaad iyo kaalmo dheeraad ah oo la xidhiidha gaadiidka, waxa aad la xidhiidhaa qorshahaaga daryeelka la maareeyey.

### Xuquuqda Xubinta

#### *Waa Maxay Xuquuqdaydu ka Helaha Adeegyada Caafimaadka Habdhaqan ee Medi-Cal ahaan?*

Ka xubin Medi-Cal ah ahaan, waxa aad xaq u leedahay inaad ka hesho adeegyada caafimaadka habdhaqan ee daruuriga ah caafimaad ahaan degmadaada. Marka aad helayso adeegyada caafimaadka habdhaqan, waxa aad xaq u leedahay in:

- Laguu la dhaqmo si ixtiraam shakhsiyeed leh isla markaana la ixtiraamo sharaftaada iyo sirnimadaada.
- Sharraxaad waadax ah oo la fahmi karo lagaa siiyo ikhtiyaarada daaweynta ee la heli karo.
- Aad ka qaybqaadato go'aanada la xidhiidha daryeelkaaga caafimaadka habdhaqan. Tan waxa kamid ah xaqa aad u leedahay inaad diiddo wixii daaweyn ah ee aanad dooneyn inaad hesho.
- Aad hesho buug-yarahan si aad wax uga ogaato adeegyada degmada, waajibaadka degmada, iyo xuquuqdaada.
- Aad dalbato nuqul ah diiwaanadaada caafimaad isla markaana aad codsato in isbeddello lagu sameeyo, haddii ay daruuri tahay.
- Aanad wajihin wax xannibaad ama gaar-yeelid ah oo laguugu soo rogo qaab qasbid, anshax-marin, shaqo-fudeydin, ama aargoosi ah.
- Aad hesho daryeel wakhtiga munaasab ku ah 24/7 xaaladaha degdegga ah, kusoo booddada ah, ama musiibada ah marka ay daruuri yihiin caafimaad ahaan.
- Marka aad codsato, aad hesho macluumaad qoraal ah oo ku diyaarsan qaabab kale sida farta indhoolka, daabacaadda farta waaweyn, iyo qaab dhegaysi ah wakhtiga munaasabka ah.
- Aad ka hesho adeegyada caafimaadka habdhaqan degmada taas oo raacda

heshiiska ay la leedahay gobolka ee helitaanka, awoodda, isku dubaridka, kharash-bixinta, iyo ogolaanshaha daryeelka. Degmada waxa looga baahan yahay inay:

- Shaqaaleysiiso ama heshiis qoraal ah ay la yeelato tiro ku filan oo adeeg-bixiyeyaal ah si ay u hubiyaan in dhammaan xubnaha u qalma Medi-Cal ee xaqa u yeesha adeegyada caafimaadka habdhaqan ay u heli karaan qaab wakhtiga munaasab ku ah.
- Bixiso kharashaadka adeegyada daruuriga ah caafimaad ahaan ee shabakadda ka baxsan wakhtiga munaasabka ah, haddii aanay degmadu hayn shaqaale ama adeeg-bixiye heshiis lagu la jiro oo bixin kara adeegyada.

  **Ogsoonow**: Degmadu waa inay hubiso in aanad wax kharash ah oo dheeraad ah u bixin aragtida adeeg-bixiye ka baxsan shabakadda. Ka eeg hoos wixii macluumaad ah ee dheeraad ah:
  - *Adeegyada caafimaadka habdhaqan ee daruuriga ah caafimaad ahaan* ee loogu talagaly shakhsiyaadka ah 21 sano jir ama wixii ka weyn waa adeegyo macquul ah isla markaana daruuri u ah ilaalinta nolosha, ka hortagga xanuun laxaad leh ama naafanimo laxaad leh, ama khafiifinta xanuun daran. Adeegyada caafimaadka habdhaqan ee daruuriga ah caafimaad ahaan ee loogu talagalay shakhsiyaadka ka yar 21 sano jirku waa adeegyo ilaaliya, taageera, ladnaysiiya, ama ka dhiga mid sidii hore si ka wanaagsan loo xammili karo xaalad caafimaadka habdhaqan ah.
  - *Adeeg-bixiye ka baxsan shabakaddu* waa adeeg-bixiye aan ku jirin liiska adeeg-bixiyeyaasha ee degmada.
- Marka aad codsato, ku siiso feker kale oo laga helo xirfadle daryeelka caafimaad ah oo khibrad leh oo ku jira ama ka baxsan shabakadda iyada oo kuu bilaash ah.
- Hubiso in adeeg-bixiyeyaashu ay u tababaran yihiin bixinta adeegyada caafimaadka habdhaqan ee ay adeeg-bixiyeyaashu ogolaadeen inay bixiyaan.
- Hubiso in adeegyada caafimaadka habdhaqan ee kharashkooda ay degmadu bixiso xaddigooda, muddadooda wakhtiga, iyo baaxaddoodu ay ku filan yihiin daboolidda baahiyaha xubnaha u qalma Medi-Cal. Tan waxa

kamid ah hubinta in habka degmada ee ansixinta kharash-bixinta adeegyadu uu ku salaysan yahay daruurada caafimaad iyo in shuruudaha helitaanka si cadaalad ah loo adeegsaday.
    - Hubiso in adeeg-bixiyeyaasheedu ay sameeyaan qiimeyno dhamaystiran isla markaana ay kuula kaashadaan xaqiijinta yoolasha daaweynta.
    - Isku dubarido adeegyada ay ku siiso iyo adeegyada aad ka hesho qorshahaaga daryeelka la maareeyey ama kuwa aad ka hesho daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah, haddii loo baahdo.
    - Ka qaybqaadato dedaaladda gobolka ee siinta adeegyo ahmiyad-siiya dhaqanka dhammaan dadka, oo ay kamid yihiin dadka aqoontooda Ingiriisidu ay yar tahay iyo dadyawga kasoo jeeda dhaqanada iyo isirada kala duwan.
- Aad cabbirto xuquuqdaada adiga oo aan wajahayn isbeddello waxyeello leh oo lagu sameeyo daaweyntaada.
- Aad hesho daaweyn iyo adeegyo waafaqsan xuquuqdaada lagu sharraxay buug-yarahan iyo dhammaan shuruucda federaalka iyo kuwa gobolka ee khuseeya sida:
    - Cinwaanka VI ee Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 sida ay dhaqangeliyeen shuruucda ku jirta 45 CFR qaybta 80.
    - Xeerka Takoorka Da'da ee 1975 sida ay dhaqangeliyeen shuruucda ku jirta 45 CFR qaybta 91.
    - Xeerka Dhaqancelinta ee 1973.
    - Cinwaanka IX ee Wax Ka Beddellada Sharciyeed "Amendments" ee Waxbarashada ee 1972 (la xidhiidha barnaamijyada iyo hawlaha waxbarashada).
    - Cinwaanada II iyo III ee Xeerka Dadyawga Maraykanka ah ee Naafada ah.
    - Qaybta 1557 ee Xeerka Ilaalinta Bukaanka iyo Daryeelka Caafimaad ee Jaban.
- Waxa aad yeelan kartaa shuruuc dheeraad ah oo hoos yimaadda sharciyada gobolka ee la xidhiidha daaweynta caafimaadka habdhaqan. Si aad ula xidhiidho Qareenka Xuquuqda Bukaanka ee degmadaada, fadlan la xidhiidh degmadaada adiga oo adeegsanaya lambarka taleefanka ee ku qoran jaldiga buug-yarahan.

**Go'aaminada Faa'iidada ee Taban**

***Waa Maxay Xuquuqda aan Leeyahay haddii Degmadu ay Diiddo Adeegyada aan Doonayo ama u Arko inaan u Baahanahay?***

Haddii degmadu ay diiddo, xadiddo, dhinto, dib u dhigto, ama soo afjarto adeeg aad u aragto inaad u baahan tahay, waxa aad xaq u leedahay inaad wargelin qoraal ah ka hesho degmada. Wargelintan waxa loo yaqaan "Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada ee Taban". Waxa aad sidoo kale xaq u leedahay inaad diiddo go'aanka adiga oo dalbanaya racfaan. Qaybaha hoose waxa ay kugu wargelinayaan Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada ee Taban iyo waxa ay tahay in la sameeyo haddii aad diiddo go'aanka degmada.

***Waa Maxay Go'aaminta Faa'iidada ee Taban?***

Go'aaminta Faa'iidada ee Taban waxa lagu qeexaa tallaabooyinka soo socda ee ay qaaddo degmadu:

- Diidmada ama ogolaanshaha xaddidan ee adeeg la codsaday. Tan waxa kamid ah go'aaminada ku salaysan nooca iyo heerka adeegga, daruurada caafimaad, habboonaanta, goobta, ama waxtarka faa'iido kharashkeeda la bixiyo;
- Dhimista, hakinta, ama joojinta adeeg hore loo ansixiyey;
- Diidmada, gebi ahaan ama qayb ahaan, lacagta adeegga;
- In adeegyada lagu bixin waayo wakhtigii loogu talagalay;
- In laga hawlgeli waayo wakhtiyadii loo qoondeeyey xallinta cabashooyinka iyo racfaanada caadiga ah. Wakhtiyada la qoondeeyey waa sida soo socota:
    - Haddii aad cabasho u xarayso degmada oo ay degmadu ay kugu soo celin weydo go'aanka cabashadaada oo qoraal ah muddo 30 maalmood ah gudahood.
    - Haddii aad racfaan u xarayso degmada oo ay degmadu kugu soo celin weydo go'aanka racfaankaaga oo qoraal ah muddo 30 maalmood ah gudahood.
    - Haddii aad xaraysay racfaan la dedejiyey oo aad ku heli weyday jawaab muddo 72 saacadood ah gudahood.
- Diidmada codsiga xubinta ee ka doodista masuuliyadda dhaqaale.

### *Waa Maxay Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada ee Taban?*

Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada ee Taban waa waraaq qoraal ah oo degmadaadu ay kuu soo diri doonto haddii ay go'aansato inay diido, xadiddo, dhinto, dib u dhigto, ama soo afjarto adeegyo adiga iyo adeeg-bixiyahaagu aad u aragtaan inay tahay inaad hesho. Wargelintu waxa ay sharrixi doontaa hannaanka degmadu ay u adeegsatay gaadhista go'aanka waxana ku jiri doona sharraxaad ah shuruudda ama hagitaanada loo adeegsaday go'aaminta in adeeggu yahay mid daruuri ah caafimaad ahaan ama in aanu ahayn.

Tan waxa kamid ah diidmada:

- Bixinta kharashka adeeg.
- Sheegashooyinka adeegyada aan kharashkooda la bixin.
- Sheegashooyinka adeegyada aan daruuriga ahayn caafimaad ahaan.
- Sheegashooyinka adeegyada laga helay nidaamyada bixinta ee khaldan.
- Codsi lagaga doodayo masuuliyad dhaqaale.

**Ogsoonow:** Wargelin Go'aaminta Faa'iidada ee Taban ayaa sidoo kale la adeegsadaa si laguugu sheego in cabashadaada, racfaankaaga, ama racfaankaaga la dedejiyey aan lagu xallin wakhtigii loogu talagalay, ama in aanad adeegyada ku helin heerarka jadwal-wakhtiyeedyada degmada ee loogu talagalay bixinta adeegyada.

### *Muddeynta Wargelinta*

Degmadu waa inay u dirto wargelinta:

- Xubinta ugu yaraan 10 maalmood kahor taariikhda tallaabada joojinta, hakinta, ama dhimista adeegga caafimaadka habdhaqan ee hore loo ansixiyey.
- Xubinta laba maalin shaqeed gudahood oo ka bilaabma go'aanka diidmada kharash bixinta ama go'aanada keenaya diidmada, dib u dhigga, ama wax ka beddelka dhammaan ama wax kamid ah adeegyada caafimaadka habdhaqan ee la codsaday.

***Miyaa aan Had iyo Jeer Heli Doonaa Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada ee Taban Marka aan Heli Waayo Adeegyada aan Doonayo?***

Haa, waa inaad hesho Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada ee Taban. Haddii aad heli weydo wargelin, waxa aad racfaan u xareyn kartaa degmada ama haddii aad dhamaystirtay hannaanka racfaanka, waxa aad codsan kartaa Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol. Marka aad la xidhiidho degmadaada, u sheeg inaad wajahday go'aaminta faa'iidada ee taban balse aanad helin wargelin. Macluumaadka ku saabsan sida loo xareeyo racfaan ama loo codsado Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol waxa ay ku jiraan buug-yarahan waxana sidoo kale laga heli karaa xafiiska adeeg-bixiyahaaga.

***Maxay ayaa ay ii Sheegi Doontaa Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada ee Taban?***

Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada ee Taban waxa ay kuu sheegi doontaa:

- Waxa ay samaysay degmadaadu ee ku saameeyey adiga iyo awooddaada helitaanka adeegyada.
- Taariikhda uu go'aanku dhaqangeli doono iyo sababta go'aanka.
- Haddii sababta diidmadu ay tahay in adeegu aanu daruuri ahayn caafimaad ahaan, wargelinta waxa ku jiri doona sharraxaad waadax ah oo ku saabsan sababta degmadu ay u gaadhay go'aankan. Sharraxaaddan waxa ku jiri doona sababaha caaafimaad ee cayiman ee adeegga loogu tixgelin waayey in uu daruuri kuu yahay caafimaad ahaan.
- Xeerarka gobol ama federaal ee go'aanka lagu saleeyey.
- Xuquuqdaada xareynta racfaan haddii aanad ogoleyn go'aanka degmada.
- Sida nuqullo looga helo dukumintiyada, diiwaanada, iyo macluumaadka kale ee la xidhiidha go'aanka degmada.
- Sida racfaan loogu xareeyo degmada.
- Sida loo codsado Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol haddii aanad ku qanacsaneyn go'aanka ay degmadu ka gaadhay racfaankaaga.
- Sida loo codsado racfaan la dedejiyey ama Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol oo la dedejiyey.
- Sida caawimo looga helo xareynta racfaan ama codsiga Dhegaysiga Cadaaladda ah ee La Dedejiyey.
- Muddada aad haysato si aad u xareyso racfaan ama u codsato Dhegaysiga

Cadaaladda ah ee Gobol.

- Xaqa aad u leedahay inaad sii waddo helitaanka adeegyada inta aad sugayso go'aan racfaan ama Dhegaysiga Cadaaladda ee Gobol ah, sida loo codsado sii waditaanka adeeegyadan, iyo in kharashaadka adeegyadan ay bixin doonto Medi-Cal iyo in kale.
- Goorta ay tahay inaad xarayso racfaankaaga ama codsiga Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol haddii aad doonayso in adeegyadu ay sii socdaan.

***Maxay Tahay inaan Sameeyo Marka aan Helo Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada ee Taban?***

Marka aad hesho Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada ee Taban, waa inaad si taxaddar leh u akhridaa dhammaan macluumaadka ku jira wargelinta. Haddii aad fahmi weydo wargelinta, degmadaada ayaa ku caawin karta. Waxa aad sidoo kale ka codsan kartaa qof kale in uu ku caawiyo.

Waxa aad codsan kartaa sii waditaanka adeegga la joojiyey marka aad gudbiso racfaan ama aad codsato Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol. Waa inaad codsato sii waditaanka adeegyada wakhti aan ka dambeyn 10 maalmood kadib taariikhda Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada ee Taban la diray ama laguu keenay, ama kahor taariikhda dhaqangalka isbeddelka.

***Ma Sii Heli Karaa Adeegyadayda Inta aan Sugayo Go'aan Racfaan?***

Haa, waxa aad awood u yeelan kartaa inaad sii hesho adeegyadaada inta aad sugayso go'aan. Tani waxa ay ka dhigan tahay inaad sii arki karto adeeg-bixiyahaaga oo aad sii heli karto daryeelka aad u baahan tahay.

***Maxay Tahay inaan Sameeyo Si aan u sii Helo Adeegyadayda?***

Waa inaad buuxiso shuruudaha soo socda:

- Waxa aad dalbataa sii helitaanka adeegga muddo 10 maalmood ah gudahood oo ka bilaabma marka degmadu ay kuu soo dirto Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada ee Taban ama kahor taariikhda degmadu ay kuu sheegto in adeeggu uu joogsan doono, kolba labada taariikhood ta dambaysa.

- Waxa aad xaraysay racfaan 60 maalmood gudahood oo ka bilaabma taariikhda ku qoran Wargelinta Go'aaminta Faa'iidada ee Taban.
- Racfaanku waxa uu ku saabsan yahay joojinta, dhimista, ama hakinta adeeg aad hore u qaadan jirtay.
- Adeeg-bixiyahaagu waxa uu ogolaaday in aad u baahan tahay adeegga.
- Muddada wakhtiga ah ee degmadu ay hore u ansixisay adeeggu ma uu dhammaan weli.

### *Ka Waran Haddii Degmadu ay Go'aansato in aanan u Baahneyn Adeegga Kadib Racfaanka?*

Lagaaga ma baahnaan doono inaad bixiso kharashyada adeegyada aad heshay intii racfaanka la sugayey.

## Masuuliyadaha Xubinta

### *Waa maxay masuuliyadahaygu ka xubin Medi-Cal ah ahaan?*

Waxa muhiim ah inaad fahanto sida ay adeegyada degmadu u shaqeeyaan si aad u heli karto daryeelka aad u baahan tahay. Waxa sidoo kale muhiim ah inaad:

- Xaadirto daaweyntaada wakhtiga laguu muddeeyey. Waxa aad heli doontaa natiijada ugu wanaagsan haddii aad kala shaqayso adeeg-bixiyahaaga yoolal u sameynta daaweynta iyo raacitaanka yoolashaas. Haddii aad u baahato inaad ka maqnaato ballan, waxa aad wacdaa adeeg-bixiyahaaga ugu yaraan 24 saacadood kahor ballanta, una beddel ballanta maalin iyo wakhti kale.
- Had iyo jeer sido Kaadhkaaga Aqoonsiga Faa'iidooyinka Medi-Cal (BIC) iyo aqoonsi sawir leh marka aad xaadirayso daaweyn.
- U sheeg adeeg-bixiyahaaga haddii aad u baahato turjumaan hadal kahor ballantaada.
- U sheeg adeeg-bixiyahaaga dhammaan walaacyadaada caafimaad. Markasta oo ay dhamaystirmaan macluumaadka aad wadaagto ee ku saabsan baahiyaagu, waa markasta oo ay badato guusha laga gaadhayo daaweyntaada.
- Hubi inaad weydiiso adeeg-bixiyahaaga wixii su'aalo ah ee aad qabto. Waxa aad muhiim u ah inaad si buuxda u fahanto macluumaadka aad hesho inta lagu gudo jiro daaweynta.

- Raac tallaabooyinka hawleed ee qorshaysan ee adiga iyo adeeg-bixiyahaagu aad isla qaadateen.
- La xidhiidh degmadaada haddii aad wax su'aalo ah ka qabto adeegyadaada ama haddii aad wax mashaakil ah kala kulanto adeeg-bixiyahaaga oo aad awoodi weydo inaad xalliso.
- U sheeg adeeg-bixiyahaaga iyo degmada haddii wax isbeddello ahi ku yimaaddaan macluumaadkaaga shakhsiyeed. Tan waxa kamid ah cinwaankaaga, lambarkaaga taleefanka, iyo wixii macluumaad caafimaad ah ee kale ee saameyn kara awoodaada ka qaybqaadashada daaweynta.
- Ula dhaqan shaqaalaha bixiya daaweyntaada si ixtiraam iyo adaab leh.
- Haddii aad ka shakido khiyaano ama faldembiyeed, soo sheeg:
  - Waaxda Adeegyada Daryeelka Caafimaad waxa ay ka dalbanaysaa qofkasta oo ka shakiya khiyaano, khasaarin, ama xadgudb Medi-Cal in uu Laynka Taleefanka ee Khiyaanada ee DHCS Medi-Cal ka waco lambarka **1-800-822-6222**. Haddii aad dareento in tani ay xaalad degdeg ah tahay, fadlan wac **911** si aad kaalmo degdeg ah u hesho. Wicitaanku waa bilaash, qofka wicitaanka samaynayana waxa uu noqon karaa mid haybtiisa la qariyey.
  - Waxa aad sidoo kale soo sheegi kartaa khiyaano ama xad-gudub laga shakiyey adiga oo iimeyl ugu soo diraya fraud@dhcs.ca.gov ama adeegsanaya foomka onlaynka ah ee ku jira barta http://www.dhcs.ca.gov/individuals/Pages/StopMedi-CalFraud.aspx.

***Miyaa aan Ku Qasbanahay inaan Bixiyo Kharashka Medi-Cal?***

Badanka dadka ku jira Medi-Cal kuma qasbana inay wax kharash ah ka bixiyaan adeegyada caafimaadka guud ama habdhaqan. Xaaladaha qaar, waxa aad ku qasbanaan kartaa inaad bixiso kharashka adeegyada caafimaadka guud iyo/ama habdhaqan iyada oo lagu salaynayo xaddiga lacagta ah ee aad hesho ama kasbato bil kasta.

- Haddii dakhligaagu uu ka yar yahay xaddiyada Medi-Cal ee xajmiga qoyskaaga, kuma qasbanaan doontid inaad bixiso kharashka adeegyada caafimaadka guud ama habdhaqan.

- Haddii dakhligaagu uu ka badan yahay xaddiyada Medi-Cal ee xajmiga qoyskaaga, waxa aad ku qasbanaan doontaa inaad waxoogaa lacag ah ka bixiso adeegyadaada caafimaadka guud ama habdhaqan. Xaddiga aad bixiso waxa loo yaqaan 'saamigaaga kharashka'. Marka aad bixiso 'saamigaaga kharashka,' Medi-Cal ayaa bixin doonta baaqiga biilashaada caafimaad ee la bixiyo ee bishaas. Bilaha aanad lahayn kharashaad caafimaad, kuma qasbanid inaad wax kharash ah bixiso.
- Waxa laga yaabaa inaad ku qasbanaato inaad bixiso 'kobayman' wixii daaweyn ah ee hoos yimaadda Medi-Cal. Tani waxa ay ka dhigan tahay inaad bixiso xaddi jeebkaaga ah markasta oo aad hesho adeeg caafimaad ama aad u tagto qolka xaaladda degdegga ah ee isbitaal adeegyadaadii caadiga ahaa.
- Adeeg-bixiyahaaga ayaa kuu sheegi doona in aad u baahan tahay inaad samayso kobayman iyo in kale.

## WARGELINTA TAKOOR-LA'AANTA

Takoorku waxa uu ka soo horjeedaa sharciga. Degmada San Diego waxa ay raacdaa sharciyada xuquuqda madaniga ah ee Gobol iyo Federaal. Degmada San Diego sifo sharci-darro ah kuma takoorto, kuma reebto dadka, ama ulama dhaqanto si ka duwan sida dadka kale iyada oo ku salaynaysa jinsi "sex", qowmiyad, midab, diin, abtirsiin, qaranka uu qofku kasoo jeedo, aqoonsiga kooxda isir, da', naafanimo maskaxeed, naafanimo jidheed, xaalad caafimaad, macluumaad hidde-side, xaalad guur, jinsi "gender", aqoonsi jinsiyeed, ama doorasho galmeed.

Degmada San Diego waxa ay bixisaa:

- Kaalmooyin iyo adeegyo bilaash ah iyada oo siisa dadka naafada ah si ay uga caawiso inay hadalkooda usoo gudbiyaan si wanaagsan, sida:
    - Tujubaano luuqadda dhegoolka ah oo khibrad leh
    - Macluumaadka qoraalka ah oo ku qoran qaabab kale (farta waaweyn, farta indhoolka, dhegaysi ama qaababka elegtarooniga lagu heli karo)
- Adeegyo luuqadeed oo bilaash ah iyada oo siisa dadka luuqaddooda koowaad aanay ahayn Ingiriisi, sida:
    - Turjubaano khibrad leh
    - Macluumaad ku qoran luuqado kale

Haddii aad u baahato adeegyadan, waxa aad la xidhiidhaa Laynka Helitaanka iyo Musiibooyinka ee 24 ka saacadood ah maalintii, 7 da maalmood ah toddobaadkii adiga oo wacaya (888) 724-7240. Ama, haddii aanad wax u maqli karin ama u hadli karin si wanaagsan, fadlan wac 711. Marka aad codsato, dukumintigan waxa laguugu diyaarin karaa farta indhoolka, farta waaweyn, dhegaysi, ama qaabab elegtaroonig ahaan lagu heli karo.

## SIDA LOO XAREEYO CABASHO

Haddii aad u aragto in Degmada San Diego ay ku guuldarreysatay inay ku siiso adeegyadan ama ay sifo sharci-darro ah kuugu takoortay qaab kale iyada oo ku salaynaysa jinsi "sex", qowmiyad, midab, diin, abtirsiin, qaranka uu qofku kasoo

jeedo, aqoonsiga kooxda isir, da', naafanimo maskaxeed, naafanimo jidheed, xaalad caafimaad, macluumaad hidde-side, xaalad guur, jinsi "gender", aqoonsi jinsiyeed, ama doorasho galmeed, waxa aad cabasho u xareyn kartaa hay'adaha u doodista ee soo socda. Waxa aad cabasho ku xareyn kartaa taleefan ahaan, qoraal ahaan, fool ka fool, ama elegtaroonig ahaan:

- Taleefan ahaan:
  - Si aad caawimo uga hesho xareynta la xidhiidha **adeegyada bukaan-jiif iyo/ama hoy**, waxa aad ka wici kakrtaa **Barnaamijka U Doodista Bukaanka ee Adeegga Qoyska Yuhuudiga ah (JFS)** lambarka 619-282-1134 or 1-800-479-2233.
  - Si aad caawimo uga hesho xareynta la xidhiidha **adeegyada bukaan-socodka**, waxa aad wici kartaa **Xarunta Waxbarashada Caafimaadka iyo U Doodista Bukaanka "Consumer Center for Health Education and Advocacy" (CCHEA)** adiga oo si bilaash ah uga wacaya lambarkooda (877) 734-3258 (TTY 1-800-735-2929).
  - Ama, haddii aanad waxba u maqli kareyn ama u hadli kareyn si wanaagsan, fadlan wac 711.
- Qoraal ahaan: Buuxi foom cabasho ama waraaq qor oo u dir:
  - **Wixii ah Adeegyada Bukaan-jiifka iyo/ama Hoy:**

    Jewish Family Service of San Diego
    Joan & Irwin Jacobs Campus
    Turk Family Center Community Services Building
    8804 Balboa Avenue
    San Diego, CA 92123

  - **Wixii ah Adeegyada Bukaan-socodka:**

    Consumer Center for Health Education and Advocacy (CCHEA)
    1764 San Diego Avenue, Suite 100
    San Diego, CA 92110

- Fool ka fool: Waxa aad booqataa xafiiska dhakhtarkaaga ama goob adeeg-bixiye heshiis kula jira Degmada San Diego oo u sheeg inaad doonayso inaad xarayso cabasho.
- Elegtaroonig ahaan: Waxa aad booqataa websaytyada hoose ee soo socda:

- **Wixii ah Adeegyada Bukaan-jiifka iyo/ama Hoy:**
  Adeegga Qoyska Yuhuudiga ah ee San Diego **barta** https://www.jfssd.org/our-services/adults-families/patient-advocacy/
- **Wixii ah Adeegyada Bukaan-socodka:**
  Xarunta Waxbarashada iyo U Doodista Bukaanka "Consumer Center for Health Education and Advocacy" (CCHEA) barta https://www.lassd.org/mental-health-and-substance-abuse-patients-rights/

**XAFIISKA XUQUUQDA MADANIGA AH - WAAXDA ADEEGYADA DARYEELKA CAAFIMAAD EE CALIFORNIA**

Waxa aad sidoo kale ugu xareyn kartaa cabasho xuquuqda madaniga ah Waaxda Adeegyada Daryeelka Caafimaad ee California, Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah taleefan ahaan, qoraal ahaan, ama elegtaroonig ahaan:

- Taleefan ahaan: Wac **916-440-7370**. Haddii aanad u hadli karin ama wax u maqli karin si wanaagsan wac **711 (Adeegga Naafanimada Isgaadhsiineed ee Gobolka California)**.
- Qoraal ahaan: Waxa aad buuxisaa foom cabasho ama waraaq u dir:

  **Department of Health Care Services - Office of Civil Rights**
  **P.O. Box 997413, MS 0009**
  **Sacramento, CA 95899-7413**

  Foomamka cabashada waxa laga heli karaa barta:

  https://www.dhcs.ca.gov/discrimination-grievance-procedures

- Elegtaroonig ahaan: Waxa aad iimeyl u dirtaa CivilRights@dhcs.ca.gov.

**XAFIISKA XUQUUQDA MADANIGA AH - WAAXDA ADEEGYADA CAAFIMAADKA IYO AADANAHA EE MARAYKANKA**

Haddii aad u aragto in lagu takooray iyada oo lagu salaynayo qowmiyad, midab, qaranka aad kasoo jeeddo, da', naafanimo ama jinsi "sex", waxa aad sidoo kale cabasho xuquuqda madaniga ah ugu xareyn kartaa Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha ee Maraykanka, Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah taleefan ahaan, qoraal ahaan, ama elegtaroonig ahaan:

- Taleefan ahaan: Wac **1-800-368-1019**. Haddii aanad si wanaagsan u hadli karin ama wax u maqli karin, fadlan wac **TTY/TDD 1-800-537-7697**.
- Qoraal ahaan: Waxa aad buuxisaa foom cabasho ama waraaq u dir:

  **U.S. Department of Health and Human Services**
  **200 Independence Avenue, SW**
  **Room 509F, HHH Building**
  **Washington, D.C. 20201**

- Foomamka cabashada waxa laga heli karaa barta: http://www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html.
- Elegtaroonig ahaan: Waxa aad booqataa Bogga Xafiiska Cabashada Xuquuqda Madaniga ah ee barta https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf

## WARGELINTA NIDAAMYADA SIRNIMADA

Bayaan sharraxaya siyaasadaha iyo habraacyada degmada ee ilaalinta qarsoodinimada diiwaanada caafimaad ayaa la heli karaa waxana lagu siin doonaa marka aad codsato.
Haddii aad tahay da' oo aad leedahay awood aad ku ogolaan karto adeegyada caafimaadka habdhaqan, lagaaga ma baahna inaad hesho ogolaansho xubin kale si aad u hesho adeegyada caafimaadka habdhaqan ama inaad soo gudbiso sheegasho adeegyo caafimaadka habdhaqan ah.

Waxa aad ka dalban kartaa degmadaada inay kuugu soo dirto farriimaha la xidhiidha adeegyada caafimaadka habdhaqan cinwaan boos, cinwaan iimeyl, ama lambar taleefan oo kale oo aad doorato. Tan waxa loo yaqaanaa "codsiga farriimaha qarsoodiga ah." Haddii aad ogolaato daryeelka, degmadu ma siin doonto macluumaadka ku saabsan adeegyadaada caafimaadka habdhaqan qofkale isaga oo aan haysan ogolaanshahaaga qoraalka ah. Haddii aanad bixin cinwaan boos, cinwaan iimeyl, ama lambar taleefan, degmadu waxa ay farriimaha adiga kugu saabsan kusoo diri doontaa cinwaanka ama lambarka taleefanka ee lagaa hayo.

Degmadu waa ay ixtiraami doontaa codsiyadaada ku helitaanka farriimaha qarsoodiga ah habka ama qaabka aad dalbato. Ama waxa ay hubin doonaan in farriimaha ku khuseeyaa noqdaan kuwo ay fududahay in laga dhigo habka ama qaabka aad dalbatay. Degmadu waxa ay u diri doontaa goobta kale ee aad doorato. Codsigaaga farriimaha qarsoodiga ahi waxa uu soconayaa illaa aad ka noqoto ama aad gudbiso codsi cusub oo farriimaha qarsoodiga ah.

Macluumaad ku saabsan sida loo codsado farriimaha qarsoodiga ah ayaa laga heli karaa bogga Optum ee Ka Faa'iidaysteyaasha & Qoysaskooda ee Qorshaha Caafimaadka Habdhaqan ee San Diego: https://www.optumsandiego.com/content/SanDiego/sandiego/en/beneficiary_and_families.html oo hoos yimaadda qaybta cinwaankeedu yahay "IPI ga Helitaanka Bukaanka iyo Helitaanka Xogta Xubinta (DMC-ODS & SMHS)"

Booqo linkiga soo socda si aad u hesho Wargelinta Nidaamyada Sirnimada (NPP) ee Degmada oo ku qoran dhammaan luqadaha aasaasiga ah: https://www.sandiegocounty.gov/content/sdc/hhsa/programs/sd/compliance_office/resources/privacy/npp.html

## ERAYO AY TAHAY IN LA OGAADO

**988 Laynka Caawimada ee Qudh-iska-jarista iyo Musiibooyinka:** Lambar taleefan oo siiya taageero bilaash ah, oo qarsoodi ah dadka wajahaya musiibo caafimaadka maskaxeed ah, oo ay kamid yihiin fekero qudh-iska-jarid. Waxa la heli karaa 24/7 si uu dadka soo wacaya ugu xidho la taliyeyaal tababaran oo bixin kara caawimo iyo taageero.

**Qaaddiga sharciga ee maamul:** Qaaddi dhegaysta isla markaana go'aan ka gaadha kiisaska ku lugta leh go'aaminada faa'iidada ee taban.

**Ururka Daaweynta Balwadda ee Maraykanka (ASAM):** Urur daaweyn xirfadeed oo metelaya dhakhaatiir iyo xirfadleyaal daryeelka caafimaad ah oo kale oo ku takhasusay daaweynta balwadda. Ururkani waxa uu abuuray Shuruudaha ASAM, oo ah kooxda shuruudaha ee qaran ee daaweynta balwadda.

**Xallinta racfaanka:** Hannaanka xallinta diidmadaada go'aan ay ka gaadhay degmadu daboolidda kharashka adeeg aad codsatay. Si ka fudud haddii loo dhigo: Waa qaabka aad ku helayso in laguugu noqdo go'aan aanad ogoleyn.

**Bar-Is-Dhexgalka Borogaraaminta Ablikeeshinada (API yada):** API yadu waa sida farriin-qaadeyeel "messengers" u saamaxa barnaamijyada softiweerka ee kala duwan inay wada "hadlaan" oo ay macluumaad wadaagaan.

**Qiimeyn:** Hawl adeeg oo loo qorsheeyey in lagu qiimeeyo xaaladda caafimaadka maskaxeed, shucuureed, ama habdhaqan ee hadda.

**Ogolaansho:** Bixinta ogolaansho ama ansixin.

**Wakiilka la igmaday:** Qof sharci ahaan loogu ogolaaday in uu wakiil ka noqdo qof kale.

**Caafimaadka Habdhaqan:** Waxa uu tilmaamayaa badqabkeena shucuureed, nafsiyeed, iyo bulsheed. Si ka fudud haddii loo dhigo: Waxa uu ku saabsan yahay sida aynu u fekerno, dareeno, ee aynu ula falgalno dadka kale.

**Faa'iidooyinka:** Adeegyada iyo daawooyinka daryeelka caafimaad ee kharashkooda lagu bixiyo qorshahan caafimaad.

**Kaadhka Aqoonsiga Faa'iidooyinka (BIC):** Kaadh aqoonsi oo xaqiijinaya caymiskaaga caafimaad ee Medi-Cal.

**Adeegyada Isku Dubaridka Daryeelka (Isku Dubaridka Daryeelka):** Waxa uu ka caawiyaa dadka inay dhex mushaaxaan nidaamka daryeelka caafimaad.

**Daryeele:** Qof daryeel iyo taageero siiya qofkale oo u baahan caawimo.

**Maareeye Kiis:** Kalkaalisooyin caafimaad oo diiwaangashan ama shaqaale bulsheed oo ka caawin kara xubin fahanka mashaakilka caafimaad ee waaweyn isla markaana la qabanqaabin kara adeeg-bixiyeyaasha xubinta.

**Maareyn kiis:** Waa adeeg ka kaalmeeya xubnaha helitaanka adeegyada caafimaad, waxbarasheed, busheed, dhaqancelin, ama adeegyada bulsho ee kale ee ay u baahan yihiin. Si kale haddii loo dhigo, waxa uu ka caawiyaa dadka inay helaan daryeelka iyo taageerada ay u baahan yihiin.

**CHP (Barnaamijka Caymiska Caafimaadka ee Carruurta):** Barnaamij dawladeed oo ka caawiya qoysaska inay u helaan caymis caafimaad carruurtooda haddii aanay awoodi karin.

**Isuduwaha Xuquuqda Madaniga ah:** Waxa uu xaqiijiyaa in hay'ad (sida dugsi, shirkad, ama hay'ad dawli ah) ay u hoggaansan tahay sharciyada dadka ka ilaaliya takoorka.

**Diiradda-saara Macmiilka:** Wax diiradda saara baahiyaha iyo doorbiditaanada macmiilka.

**Ururo bulsheed:** Kooxo dad ah oo ka wada shaqeeya horumarinta bulshadooda.

**Adeegyada dadka waaweyn ee bulsheed (CBAS):** Adeegyo bukaan-socod, oo xarumeed oo lagu bixiyo daryeelka kalkaalinta caafimaad ee xirfadeed, adeegyo bulsheed, daaweyno, daryeel shakhsiyeed, tababar iyo taageero qoys iyo daryeele, adeegyo nafaqo, gaadiid, iyo adeegyo kale oo loogu talagalay xubnaha u qalma.

**Ku xasilinta bulshada dhexdeeda:** Waxa uu ka caawiyaa dadka wajahaya musiibo caafimaadka maskaxeed ah inay taageero ku helaan bulshadooda dhexdeeda halkii ay ka tegi lahaayeen isbitaal.

**Sii waditaanka adeegga:** Eeg sii waditaanka daryeelka.

**Sii waditaanka daryeelka:** Awoodda xubinta qorshuhu ay u leedahay inay adeegyo Medi-Cal ah kasii hesho adeeg-bixiyahooga ka-baxsan-shabakadda ee hore u jiray muddo ah illaa 12 bilood haddii adeeg-bixiyaha iyo degmadu ay isla qaataan.

**Kobayman (co-pay):** Kharashka ay xubin bixiso, guud ahaan wakhtiga adeegga, kaas oo dheeraad ka ah kharashka ay bixiso shirkadda caymisku.

**Adeegyada Kharashkooda La Bixiyo:** Adeegyada Medi-Cal ee ay degmadu masuul ka tahay kharashkooda. Adeegyadda kharashkooda la bixiyo waa kuwo hoos yimaadda xeerarka, shuruudaha, xaddidaadaha, iyo ka reebitaanada heshiiska Medi-Cal, wixii wax ka beddel heshiis ah, iyo sida ku qoran Buug-yarahan Xubinta (sidoo kale loo yaqaan Caddeynta Kharash-bixinta ee Isku-dhafan (EOC) iyo Foomka Sheegista).

**Adeegyada ahmiyadda-siiya dhaqanka:** Bixinta adeegyo ixtiraama oo ahmiyad-siiya dhaqanka, luuqadda, iyo caqiidooyinka qofka.

**Shakhsi(yaadka) Taageerada Laxaaadka Leh ee La Magacaabay:** Shakhsi(yaadka) ay xubinta ama adeeg-bixiyuhu u arko inay muhiim u yihiin guusha daaweynta. Kuwan waxa kamid ah waalidiinta ama masuulada sharciyeed ee ilmaha yar, qofkasta oo isla guri kula nool, ama qaraabada kale ee xubinta.

**DHCS:** Waaxda Adeegyada Daryeelka Caafimaad ee California. Kani waa xafiiska Gobolka ee kormeera barnaamijka Medi-Cal.

**Takoorka:** La dhaqanka aan cadaaladda ama aan sinnaanta ahayn ee lagu la kaco qof iyada oo lagu salaynayo qowmiyaddiisa, jinsigiisa "gender", diintiisa, jihadiisa galmeed, naafanimadiisa, ama sifooyinkiisa kale.

**Baadhista, ogaanshaha, iyo daaweynta hore ee joogtada ah "Early and periodic screening, diagnostic, and treatment" (EPSDT):** Waxa aad tagtaa "Medi-Cal ka Carruurta iyo Dhawryo-toban-jirrada."

**Adeegyada Daaweynta ee Qoys:** Waxa uu siiyaa taageero iyo daaweyn carruurta iyo qoysaskooda si caqabadaha caafimaadka maskaxeed wax loogaga qabto bay'adda guriga.

**Adeegyada kala korinta:** Adeegyo lagaga hortagayo ama dib loogu dhigayo uurka. Adeegyada waxa la siiyaa xubnaha ku jira da'da uur-qaadista si awood loogu siiyo inay go'aamiyaan tirada iyo kala fogeynta carruurta.

**Fee-for-Service (FFS) Medi-Cal:** Hab kharash-bixin kaas oo adeeg-bixiyeyaasha Caafimaadka Habdhaqan lagu siiyo kharashka adeeg kasta oo ay siiyaan bukaanka,

halkii kharash bille ama sanadle ah lagu siin lahaa bukaankiibaa. Medi-Cal Rx waa mid kharashkiisa lagu bixiyo barnaamijkan.

**Masuuliyad dhaqaale:** Masuul ka noqoshada bixinta deyn ama kharash.

**Guri korin:** Qoys siiya daryeel beddel ah oo 24 ka saacadood ah carruurta aan la nooleyn waalidiintooda ama masuulladooda.

**Khiyaanada:** Fal ku talagal ah oo khiyaano ama marin-habaabin oo uu sameeyo qof garanaya in khiyaanada ama marin-habaabintu ay keeni karto in isagu ama qofkale uu helo waxoogaa faa'iido aan la ogoleyn ah.

**Medi-Cal Dhamaystiran:** Daryeel caafimaad oo bilaash ah ama qiime-jaban oo loogu talagalay dadka ku nool California kaas oo bixiya wax ka badan keliya uun daryeelka caafimaadka xaaladda degdegga ah. Waxa uu bixiyaa daryeel caafimaad guud, caafimaad ilkeed, caafimaad maskaxeed, kala korin, iyo caafimaad aragga ah (indhaha). Waxa uu sidoo kale bixiyaa kharashka daaweynta adeegsiga khamriga iyo daroogada, daawada uu dhakhtarkaagu qoro, iyo wax kale oo dheeraad ah.

**Cabasho:** Cabirraadda qanacsanaan la'aanta ee hadalka ama qoraalka ah ee xubin ee ay ka qabto adeeg kharashkiisa ay bixiso Medi-Cal, qorshe daryeel oo la maareeyey, degmo, ama adeeg-bixiye Medi-Cal. Cabashadu waxa ay lamid tahay tabasho.

**Masuul:** Qof sharci ahaan masuul ka ah daryeelka iyo badqabka qofkale, caadi ahaan ilme ama qof aan daryeeli karin naftiisa.

**Isbitaal:** Goob ay xubin kaga hesho daryeel bukaan-jiif iyo mid bukaan-socod dhakhaatiirta iyo kalkaalisooyinka caafimaad.

**Isbitaal-dhigis:** Dhigitaanka isbitaal si daaweyn loogu sameeyo ka bukaan ahaan.

**Bixiyeyaasha Daryeelka Caafimaad ee Hindida (IHCP):** Barnaamij daryeel caafimaad oo ay ka hawlgalaan Adeegga Caafimaadka ee Hindida (IHS), Qabiil Hindi ah, Barnaamijka Caafimaadka ee Qabiileed, Ururka Qabiileed ama Ururka Hindida ee Magaaleed (UIO) sida eray-bixinadaas loogu qeexay Qaybta 4 ee kamid ah Xeerka Horumarinta Daryeelka Caafimaad ee Hindida (25 U.S.C. qaybta 1603).

**Qiimeynta Hore:** Qiimeyn lagu sameeyo xubinta si loo go'aamiyo baahida loo qabo adeegyada caafimaadka maskaxeed ama daaweynta cilladda adeegsiga maandooriyaha.

**Sun-Saarista Bukaan-jiifka:** Adeeg daryeel degdeg ah oo caafimaad oo ikhtiyaari ah oo lagu siiyo xubnaha qaba dhibaatooyinka caafimaad ee daran ee la xidhiidha xaraaradda joojinta balwadda.

**Habka Nidaamka Aasaasiga ah ee Isku Dhafan:** Hage tibaaxa qiyamka, heerarka, iyo nidaamyada la shaqaynta carruurta, dhallinyarta, iyo qoysaska ku nool California.

**Xirfadle caafimaadka maskaxeed ah oo liisan haysta:** Adeeg-bixiye kasta oo liisan u haysta si waafaqsan sharciga Gobolka California ee khuseeya sida kuwa soo socda: dhakhtar liisan haysta, cilminafsi-yaqaan liisan haysta, shaqaale bulsheed kiliinikeed oo liisan haysta, la taliye kiliinikeed oo xirfadle ah oo liisan haysta, daaweeye guur iyo qoys oo liisan haysta, kalkaaliso caafimaad oo diiwaangashan, kalkaaliye caafimaad oo tababaran "vocational" oo liisan haysta, farsamo-yaqaan caafimaadka dhimirka ah oo liisan haysta.

**Isbitaal dhimir oo liisan haysta:** Xarun daaweynta caafimaadka maskaxeed ah oo liisan u haysata in uu siiyo daryeel bukaan-jiif 24 ka saacadood ah bukaanka khalkhalsan maskax ahaan, aanay ku filneyn maskaxdoodu, ama halis ku ah naftooda ama dadka kale.

**Xarun hoy oo liisan haysata:** Xarumaha siiya adeegyada aan kuwa caafimaad ahayn ee hoy dadka waaweyn ee kasoo kabanaya mashaakilka la xidhiidha si xun u adeegsiga khamriga ama daroogada kale.

**Daryeelka caafimaad ee la maareeyey:** Qorshe caafimaad Medi-Cal oo u adeegsada keliya dhakhaatiir, xirfadleyaal takhasus, xarumo caafimaad, farmasiiyo, iyo isbitaalo cayiman dadka qaata Medi-Cal ee ka diiwaangashan qorshahaas.

**Medi-Cal:** Nooca California ee barnaamijka Medicaid ee federaalka. Medi-Cal waxa uu siiyaa daryeel caafimaad oo bilaash ah iyo mid qiime-jaban dadka u qalma ee ku nool California.

**Medi-Cal ka Carruurta iyo Dhawryo-toban-jirrada:** Faa'iido loogu talagalay xubnaha ka yar da'da 21 ee caawimo lagaga geysto in lagu ilaaliyo caafimaadkooda. Xubnuhu

waa inay maraan hubinta caafimaad ee munaasabka ku ah da'dooda iyo baadhitaano habboon si loo helo mashaakilka caafimaad isla markaana loo daaweeyo xanuunada xilli hore. Waa inay helaan daaweynta lagu daryeelayo ama caawimo lagaga geysanayo xaaladaha lagu heli karo hubitaanada. Faa'iidadan waxa sidoo kale loo yaqaanaa faa'iidada Baadhista, Ogaanshaha, iyo Daaweynta Hore ee Joogtada ah "Early and Periodic Screening, Diagnostic, and Treatment" (EPSDT) ee hoos timaadda sharciga federaalka.

**Khabiirka Taageerada Faceed ee Medi-Cal:** Shakhsi lasoo noolaa xaalado caafimaadka habdhaqan ama adeegsiga maandooriyaha ah isla markaana ku jira soo kabasho, kaas oo buuxiyey shuruudaha barnaamijka shahaado-siinta ay Dawladdu-ansixiyey ee degmada, kaas oo shahaado ka haysta degmada, isla markaana bixiya adeegyadan isaga oo uu hagayo Xirfadle Caafimaadka habdhaqan ah kaas oo liisan ka haysta, rukhsad khaas ah ka haysta, ama ka diiwaangashan Dawladda.

**Medi-Cal Rx:** Adeeg faa'iido farmasi kaas oo qayb ka ah FFS Medi-Cal loona yaqaan "Medi-Cal Rx" kaas oo siiya faa'iidooyin iyo adeegyo farmasi, oo ay kamid yihiin daawooyinka dhakhtar qoro iyo qaar agab caafimaad ah dhammaan xubnaha Medi-Cal.

**Daruuri ah caafimaad ahaan (ama daruuro caafimaad ah):** Wixii ah xubnaha 21 sano jirka ah ama ka weyn, adeeg waxa uu noqonayaa mid daruuri ah caafimaad ahaan marka uu yahay macquul isla markaana uu daruuri u yahay ilaalinta nafta, ka hortagga xanuun laxaad leh ama naafanimo laxaad leh, ama khafiifinta xanuun daran. Wixii ah xubnaha ka yar da'da 21 sano jirka, adeeg waxa uu daruuri yahay caafimaad ahaan marka lagu saxayo ama lagu khafiifinayo xanuun ama xaalad maskaxeed oo lagu ogaaday adeeg baadhis.

**Daaweynta Loo Kaashado Daawooyinka (MAT):** Adeegsiga daawooyinka ay ansixisay FDA oo ay weheliyaan la talin ama daaweyno habdhaqan si loo bixiyo habraac "bukaanka oo dhamaystiran ah" oo loo maro daaweynta cilladda adeegsiga maandooriyaha.

**Xubin:** Shakhsi ka diiwaangashan barnaamijka Medi-Cal.

**Musiibo caafimaadka maskaxeed ah:** Marka uu qof wajahayo xaalad halkaas oo habdhaqankooda ama calaamadahoodu ay naftooda iyo dadka kale geliyaan halis isla markaana ay u baahdaan daryeel degdeg ah.

**Qorshe caafimaadka maskaxeed ah:** Degmo kastaa waxa ay leedahay qorshe caafimaadka maskaxeed ah kaas oo masuul ka ah ku siinta ama ugu qabanqaabinta adeegyo caafimaadka maskaxeed ah oo takhasus ah xubana Medi-Cal bulshadooda dhexdeeda.

**Shabakad:** Koox ah dhakhaatiir, xarumo caafimaad, isbitaalo, iyo adeeg-bixiyeyaal kale oo degmada heshiis kugu la jira bixinta daryeelka degmada.

**Qaaditaanka caafimaad ee aan ahayn xaalad degdeg ah:** ku qaaditaanka ambalaas, baabuur gaadhi-curyaan, ama gaadhiga lagu qaado bukaanka ee dadka aan adeegsan karin gaadiidka dadweynaha ama kuwa khaaska ah.

**Qaaditaanka aan ahayn ka caafimaad:** Qaaditaanka marka lagu socdo ama laga soo noqonayo ballan ah adeeg kharashkiisa ay bixiso Medi-Cal oo uu ansixiyey adeeg-bixiyaha xubinta iyo marka lasoo qaadanayo daawooyinka dhakhtar qoray iyo agab caafimaad.

**Xafiiska Difaacaha Macaamiisha "Office of the Ombudsman":** Waxa uu gacan ka geystaa xallinta mashaakilka isaga oo dhexdhexaad ka ah arrimaha si uu u hubiyo in xubnuhu ay helaan dhammaan adeegyada daruuriga ah caafimaad ahaan ee kharashkooda la bixiyo ee qorsheyaashu sida lagu heshiiyey ay masuul ka yihiin.

**Meelaynta guriga-ka-baxsan:** Ka wareejin ku meelgaadh ah ama joogto ah oo ilmaha laga wareejiyo gurigiisa loona wareejiyo bay'ad ka ammaan badan sida qoys korin ama guri kooxeed.

**Adeeg-bixiye ka-baxsan-shabakadda:** Adeeg-bixiye aan qayb ka ahayn shabakadda ay heshiiska kula jirto degmadu.

**Jeebka-laga-bixiyo:** Kharash shakhsiyeed oo lagu dallaco xubin si ay u hesho adeegyada kharashkooda la bixiyo. Tan waxa kamid ah kharashyada caymiska "premiums", kobayga, ama wixii kharashaad dheeraad ah ee laga bixiyo adeegyada kharashkooda la bixiyo.

**Adeegyada caafimaadka maskaxeed ee bukaan-socodka:** Adeegyada bukaan-socodka ee xubnaha qaba xaaladaha caafimaadka maskaxeed ee u dhexeeya khafiif illaa dhexdhexaad oo ay kamid yihiin:

- Qiimeynta iyo daaweynta caafimaadka maskaxeed ee shakhsiyeed iyo kooxeed (daaweynta-nafsiyeed)
- Shaybaadhka nafsiyeed marka caafimaad ahaan loo arko inay daruuri yihiin si loo qiimeeyo xaalad caafimaadka maskaxeed ah
- Adeegyada bukaan-socod ee loo bixiyo ujeedka ah la socodka daaweynta loo adeegsado daawooyinka
- La talinta caafimaadka maskaxeed
- Shaybaadhka, agabka, iyo kaabeyaasha bukaan-socodka

**Adeeg-bixiyaha ka qaybqaataha ah (ama dhakhtarka ka qaybqaataha ah):** dhakhtar, isbitaal, ama xirfadle daryeel caafimaad oo liisan haysta oo kale ama xarun caafimaad oo liisan haysata, oo ay kamid yihiin xarumaha degdeg-xigeenka "sub-acute facilities" ee degmada heshiiska kugu la jira inay xubnaha siiyaan adeegyada kharashkooda la bixiyo wakhtiga xubintu ay helayso daryeel.

**Sameynta qorshaha:** Hawl adeeg oo ka kooban sameynta qorsheyaasha macaamiisha, ansixinta qorsheyaasha macaamiisha, iyo/ama la socoshada horumarka xubinta.

**Daawooyinka la qoro**: Daawo sharci ahaan u baahan amar adeeg-bixiye liisan haysta in la bixiyo, waxana ay ka duwan tahay daawooyinka aan-la-qorin (“OTC”) oo iyagu aan u baahneyn qoraal dhakhtar.

**Daryeelka aasaasiga ah:** Sidoo kale loo yaqaan "daryeelka joogtada ah". Kuwani waa adeegyo daruuri ah caafimaad ahaan iyo daryeel ka hortag, booqashooyin baadhista caafimaadka carruurta ah, ama daryeelka sida daryeelka la socoshada ee joogtada ah. Yoolka adeegyadani waa in laga hortago mashaakilka caafimaad.

**Adeeg-bixiyaha daryeelka ee aasaasiga ah (PCP):** Adeeg-bixiyaha liisanka haysta ee xubin ay ka hesho inta ugu badan daryeelkeeda caafimaad. PCP gu waxa uu ka caawiyaa xubinta inay hesho daryeelka ay u baahan tahay. PCP waxa uu noqon karaa:

- Dhakhtar guud
- Dhakhtar gudeed "Internist"
- Dhakhtar carruureed
- Dhakhtar qoys

- OB/GYN
- Adeeg-bixiye Daryeelka Caafimaad ee Hindida ah (IHCP)
- Xarun Caafimaad oo uu Ansixiyey Federaalku (FQHC)
- Xarun Caafimaad oo Miyi (RHC)
- Kalkaaliye Caafimaad oo Sare
- Kaaliye dhakhtar
- Kiliinig

**Ogolaanshaha hore (ansixinta-hore):** Hannaanka ay xubin ama adeeg-bixiyeheedu ay tahay inay degmada uga codsato inay u ansixiso adeegyo cayiman si loo xaqiijiyo in degmadu ay kharashkooda bixin doonto. Gudbintu ma aha ansixin. Ogolaanshaha hore waxa uu la mid yahay ansixinta-hore.

**Xallinta mushkiladda:** Hannaanka u saamaxa xubin xallinta mushkilad ama walaac ku saabsan arrin la xidhiidha masuuliyadaha degmada, oo ay kamid tahay bixinta adeegyada.

**Hagaha Adeeg-bixiyeyaasha:** Liis ah adeeg-bixiyeyaasha ku jira shabakadda degmada.

**Xaalad caafimaad oo degdeg ah oo dhimirka ah:** Cillad maskaxeed taas oo calaamadaheedu ay halis yihiin ama daran yihiin oo ay halis degdeg ah ku keeni karaan xubinta ama dadka kale ama xubintu aanay wakhtigaas la taagan yahay awoodeyn helitaanka ama adeegsiga cuntada, hoyga, ama dharka cilladda maskaxeed awgeed.

**Shaybaadh maskaxeed:** Shaybaadh gacan ka geysta fahanka fekerrada, dareenada, iyo habdhaqanada qofka.

**Gudbin:** Marka PCP ga xubin uu sheego in xubintu ay daryeel ka heli karto adeeg-bixiye kale. Adeegyada daryeelka kharashkooda la bixiyo qaarkood ayaa u baahan gudbin iyo ansixin-hore (ogolaansho hore).

**Adeegyada iyo qalabka dhaqan-celin "rehabilitative" iyo kuwa dhaqan-barid "habilitative":** Adeegyo iyo qalab lagaga caawiyo xubnaha qaba dhaawacyada, naafanimooyinka, iyo xaaladaha daba dheeraada inay helaan ama soo ceshadaan xirfadaha maskaxeed iyo jidheed.

**Adeegyada hoyga guriyeed:** Waxa uu siiyaa guriyeyn iyo taageero ku meelgaadh ah dadka hoy la'aanta ah ama wajahaya musiibo guriyeyn.

**Baadhista:** Hubin degdeg ah oo loo sameeyo si loo go'aamiyo adeegyada ugu munaasabsan.

**Saamiga kharashka:** Xaddiga lacagta ah ee xubinta ay tahay inay ka bixiso kharashaadkeeda caafimaad kahor inta aanay Medi-Cal bixin kharashka adeegyada.

**Khalkhallada (mashaakilka) shucuureed ee daran:** Waxa ay tilmaantaa cillad maskaxeed, habdhaqan, ama shucuureed oo laxaad leh oo ku timaadda carruurta iyo dhawryo-toban-jirrada taas oo carqaladeysa awoodda ay u leeyihiin inay si habsamni leh uga hawlgalaan guriga, dugsiga, ama bulshada dhexdeeda.

**Xirfadle takhasus (ama dhakhtar takhasus):** Dhakhtar daaweeya noocyo mashaakil daryeel caafimaad ah oo cayiman. Tusaale ahaan, dhakhtarka qalliinka toosinta lafaha waxa uu daaweeyaa lafaha jaban; dhakhtarka xasaasiyaduhu waxa uu daaweeyaa xasaasiyadaha; dhakhtarka wadnuhuna waxa uu daaweeya mashaakilka wadnaha. Inta ugu badan, xubintu waxa ay u baahataa in PCP geedu u gudbiyo xirfadle takhasus.

**Adeegyada caafimaadka maskaxeed ee takhasuska ah (SMHS):** Adeegyo loogu talagalay xubnaha qaba baahiyaha adeegyada caafimaadka maskaxeed kuwaas oo ka sarreeya heerka khafiif illaa dhexdhexaad ee naafanimada.

**Ku-salaysan-awoodaha:** Eegitaanka waxa uu qof qaban karo, halkii diiradda laga saari lahaa uun mashaakilkiisa.

**Adeegyada cilladda adeegsiga maandooriyaha:** Adeegyada caawiya dadka la dhibaataysan balwadda daroogada iyo khamriga.

**Adeegga caafimaad ee onlaynka ah "Telehealth":** Qaab adeegyada daryeelka caafimaad loogu bixiyo tiknoolajiyadaha macluumaadka iyo isgaadhsiinta si loo fudaydiyo daryeelka caafimaad ee bukaanka.

**Uur-ku-taallada:** Culays shucuureed iyo mid nafsiyeed oo qoto dheer oo ka yimaadda wajihidda ama goob-joog u noqoshada dhacdo argagax leh.

**Adeegyada caafimaadka maskaxeed ee takhasuska ah ee lagu saleeyo uurkutaallada:** Adeegyadani waxa ay garawsan yihiin in dad badan oo la dhibaataysan

mashaakil caafimaadka maskaxeed ah ay wajaheen uurkutaallo, waxana ay siiyaan daryeel fiiro gaar ah u yeesha oo taageeraya dadkaas soo wajahay uurkutaallada.

**Qorshe Daaweyn:** Qorshe wax lagu daboolayo baahiyaha xubinta isla markaana lagu la soconayo horumarka si dib loogu doo dabbaalo heerka ugu suuragalsan ee shaqayneed ee xubinta.

**TTY/TDD:** Qalab ka kaalmeeya dadka dhegoolka ah, dhegaha culus, ama qaba naafanimada hadal inay sameeyaan ama qabtaan wicitaanada taleefanka. TTY waxa ay u taagan tahay "Teletypewriter". TDD waxa ay u taagan tahay Qalabka Isgaadhsiinta ee Dhegoolka "Telecommunications Device for the Deaf".

**Adeegyada Shaqo:** Adeegyo ka caawiya dadka inay helaan oo haystaan shaqooyin.

**Liiska sugitaanka:** Liiska dadka sugaya wax aan hadda ahaan la heli karin balse la heli karo mustaqbalka.

**Toos-isugu-xidhis:** Wareejin daryeel oo habsami u socod leh oo laga wareego hal adeeg-bixiye loona wareego midkale.

## MACLUUMAAD DHEERAAD AH OO KU SAABSAN DEGMADAADA

### Macluumaad Gaar u ah Degmada oo Dheeraad ah

Adeegyada soo socda waxa loo tixgeliyaa inay ikhtiyaari u yihiin degmooyinka ka qaybqaateyaasha ah, Degmada San Diego ayaa bixisa adeegyada ku taxan hoos:

### Adeegyada Caafimaadka Maskaxeed ee Takhasuska ah

- Adeegyada Taageerada Faceed ee Medi-Cal
- Daaweynta Bulshada ee Firfircoon "Assertive Community Treatment"
- Daaweynta Bulshada ee Firfircoon ee Caafimaadka-sharciyeed "Forensic Assertive Community Treatment" (FACT)
- Daryeelka Takhasuska ah ee La Isku Dubariday (CSC) ee Kacdoonka Waallida ee Ugu Horraysa (PED)
- Adeegyada Naadiga
- Adeegyada Shaqaalaha Caafimaadka Bulsheed ee La Xoojiyey (CHW)
- Shaqaaleynta La Taageero
- Adeegyada Ugu-Tegista-Gudaha "In-Reach Services"

### Adeegyada DMC-ODS

- Adeegyada Taageerada Faceed ee Medi-Cal
- Adeegyada Dhiirrigelinta-abaalmarineed
- Adeegyada Shaqaalaha Caafimaadka Bulsheed ee La Xoojiyey (CHW)
- Shaqaaleynta La Taageero

Fadlan tixraac qaybta "Baaxadda Adeegyada" si aad u akhrido sharraxaadaha dhamayska tiran ee ku saabsan adeegyadan.